# INJIILKA SHARIIFKA AH

## The Noble Gospel

A Poetic Somali Translation
of the Gospel According to Matthew

Aweis A. Ali
*Translator*

ISBN: 978-9914-701-21-0

# INJIILKA SHARIIFKA AH

## The Noble Gospel

A Poetic Somali Translation
of the Gospel According to Matthew

SOMALI
Bible Society

Published by
Somali Bible Society
Mogadishu, Somalia

First Edition, 2020

SomaliBibleSociety.org
info@SomaliBibleSociety.org

Aweis A. Ali
Translator

The translator can be reached at amazingwisdom@gmail.com

This license lets you distribute, remix, tweak, and build upon this work, even commercially,
as long as you credit Aweis A. Ali for the original work of the poetic translation.

ISBN: 978-9914-701-21-0

# Tusmada Buugga

DEDICATION ........ xi
TUSMADA BUUGGA ........ xii
HORDHAC ........ xiii
Abtirsiinta Sayid Ciise Masiix ........ 1
Dhalashadii Sayid Ciise Masiix ........ 2
Booqashadii Kuwii Bari Ka Yimid ........ 3
U Cararkii Masar ........ 5
Caruurtii La Laayay ........ 6
Ka Soo Noqodkii Masar ........ 7
Risaaladii Nebi Yaxye ........ 8
Baabtiiskii Sayid Ciise Masiix ........ 10
Jirrabaaddii Sayid Ciise Masiix ........ 10
Sayidkii Oo Degay Kafarna'um ........ 12
Wacdigii Sayid Ciise Masiix ........ 13
Sayidka Oo U Yeeray Xertiisii Ugu Horreysay ........ 14
Sayidka Oo Bogsiiyey Dad Badan ........ 15
Wacdigii Sayidka Markuu Buurta Joogay ........ 15
Kuwa Barakadaysan ........ 16
Waxtarka Cusbada Iyo Feynuusta ........ 17
Oofinta Sharciga ........ 18
Dhiig Gelidda ........ 19
Sinada Iyo Xummaha Kale ........ 21
Ha Dhaaranina ........ 22
Aargoosiga ........ 23
Cadawgiinna Jeclaada ........ 24
Sadaqabixinta Qarsoon ........ 25
Salaadda Qarsoon ........ 26
Tukashadii Ciise Baray ........ 27

Soonka ........ 28
Khasnadda Runta Ah ........ 29
Dhawridda Indhaha ........ 30
Talo Saarashada Eebbe ........ 30
Qofna Ha Xukumina ........ 32
Ducada Suubban ........ 33
Qaynuunka Dahabka Ah ........ 34
Labada Irid ........ 35
Mirahooda Eega! ........ 35
Camalka Suubban ........ 36
Labada Aasaas ........ 37
Barraslihii La Bogsiiyey ........ 38
Boqol U Taliyihii Loo Bogsiiyey ........ 39
Sayidka Oo Bogsiiyey Dad Badan ........ 41
Natiijada Xernimada ........ 41
Sayidka Oo Duufaan Dejiyey ........ 42
Jinnoolayaashii Reer Gandareni ........ 43
Cuuryaankii La Bogsiiyey ........ 45
U Yeeriddii Matayos ........ 46
Su'aal Soonka Ku Saabsan ........ 47
Dhimasho Iyo Dhiigbax ........ 48
Indhoolayaashii La Bogsiiyey ........ 50
Ninkii Carrabka La'aa ........ 51
Naxariistii Sayidka ........ 52
Laba Iyo Tobankii Rasuul Ee Sayid Ciise ........ 52
Howshii Rasuullada ........ 53
Silica ........ 55
Ha Baqina! ........ 58
Natiijada Addeecidda Sayidka ........ 59
Nebi Yaxye ........ 61

Magaalooynkii La Habaaray ........ 65
Maanka Caruurta Oo Kale ........ 66
Shuqulka Sayidka ........ 66
Ninkii Gacanta La'aa Oo La Bogsiiyey ........ 69
Midiidinkii La Doortay ........ 70
Ciise Iyo Be'elsebul ........ 71
Sayidka Oo Diiday Mucjisooyinkii La Weyddiistay ........ 74
Jinnigu Waa Ku Noqday Qofkii Uu Ka Baxay ........ 75
Walaaltinimada Dhabta Ah ........ 76
Sarbeeb Ku Saabsan Beerreyga ........ 77
Sababta Sarbeebta Loo Isticmaalo ........ 79
Micnaynaynta Sarbeebta Beerreyga ........ 81
Sarbeebta Ku Saabsan Gocondhada ........ 82
Labadii Sarbeeb Ee Ku Saabsanaa Iniin Khardal Ah Iyo Khamiirka ........ 84
Micnaynta Sarbeebtii Gocondhada ........ 85
Sarbeebyadii Maalkii Qarsoonaa, Luulka, Iyo Shabagga ........ 87
Sayidka Oo Laga Celiyey Naasared ........ 88
Casho Ayaa La Siiyey Shan Kun Oo Qof Dad Ka Badan ........ 91
Sayidka Ayaa Badda Ku Dul Socday ........ 93
Dadkii Lagu Bogsiiyey Gennesared ........ 95
Ciise Ayaa Ka Jawaabay Eedayntii Ku Saabsanayd Ku Xadgudubka Xeerka ... 96
Bogsiinta Inantii Reer Kancaan ........ 99
Dadkii Badnaa Ee La Bogsiiyey ........ 101
Cunto Ayaa La Siiyey Afar Kun Oo Qof Dad Ka Badan ........ 102
Ciise Waa Diiday Markii Calaamo La Weyddiistay ........ 103
Ciise Wuxuu Xertiisii Ku Canaantay Indhala'aantoodii ........ 104
Butros Ayaa Qiray In Ciise Yahay Masiixa ........ 106
Ciise Waa Sii Sheegay Dhimashadiisa Iyo Sarakiciddiisa ........ 107
Nafta Waa In La Diido ........ 108
Waxaa Is Bedelay Muuqa Ciise ........ 109

Waxaa La Bogsiiyey Wiilkii Jinniga Qabay ........ 112
Mar Labaad Ayuu Ciise Sii Sheegay Dhimashadiisii ........ 113
Canshuurtii Macbudka  Ayuu Ciise Bixiyay ........ 113
Is-hoosaysiinta ........ 115
Ciise Ayaa Ka Digay In  Aan Dadka La Xumayn ........ 115
Masaalka Ku Saabsan Laxdii Luntay ........ 117
Xumaanfalayaal Wixii Loo Samayn Lahaa ........ 117
Tukashada Jameecada Ah ........ 118
Waajibka Is Cafinta Iyo Masaalkii Ku Saabsanaa Midiidinkii
Aan Abaalka Lahayn ........ 118
Wax Ku Saabsan Naag Furidda ........ 121
Ciise Ayaa U Duceeyay  Carruur Yaryar ........ 123
Nin Hodon Iyo Dhalinyaro  Ah Ayaa Doonaya Nolosha Weligeed Ah ........ 124
Faa'iido La'aanta Hodonka ........ 125
Masaalkii Ku Saabsanaa Beerta  Canabka Ah Iyo Shaqaalaha ........ 127
Mar Seddaxaad Ayuu Ciise Sii Sheegay Dhimashadiisa ........ 129
Waxaa La Weyddiistay  Derejada Dunida ........ 130
Weynaanta Runta Ah ........ 131
Ciise Ayaa Bogsiiyey  Laba Nin Oo Indhala' ........ 132
Ciise Guul Ayuu Ku  Galay Yeruusaalem ........ 133
Macbudkuu Ciise Nadiifiyay ........ 135
Geedkii Berdaha Ahaa  Ee Miraha Aan Dhalin ........ 137
Ciise Waxaa Wax Laga Weyddiiyey Amarkiisii ........ 138
Masaalkii Ku Saabsanaa Labadii Wiil ........ 139
Masaalkii Ku Saabsanaa Beerta Canabka ........ 140
Masaalka Ku Saabsan Casuumaadda Arooska ........ 143
Wax Ku Saabsan Canshuurta La Siiyo Kaysar ........ 145
Sarakicidda Kuwii Dhintay ........ 146
Qaynuunka Ugu Weyn ........ 148
Wax Masiixa Ku Saabsan ........ 149

Ciise Ayaa Canaantay Culimmadii Iyo Farrisiintii ........ 150
Ciise Ayaa U Ooyay Yeruusaalem ........ 156
Ciise Ayaa Sii Sheegay Dumidda Macbudka........157
Dhibaatooyinka Imanaya........ 158
Imaatinka Wiilka Aadanaha ........162
In La Soo Jeedo Ayaa Loo Baahan Yahay........163
Masaalka Ku Saabsan Addoommadii Aaminka Ahaa iyo Kuwii Aan Aaminka Ahayn ........165
Masaalka Ku Saabsan Tobankii Gabdhood ........166
Masaalka Ku Saabsan Talantiyaasha ........168
Maalinta Xisaabta........171
Shirqoolkii Ciise Loo Dhigay........175
Ciise Oo Lagu Subkay Beytaniya ........175
Khiyaanadii Yuudas ........177
Cashadii Ugu Dambaysay........177
Ciise Ayaa Sii Sheegay Xertiisa Ka Tegiddooda........180
Ciise Oo ku Jiray Beer Getsemane........181
Ciise Waa La Qabtay ........183
Ciise Ayaa Lagu Xukumay Wadaadkii Sare Hortiisa ........185
Butros Ayaa Dafiray Ciise........188
Ciise Waxaa Loo Dhiibay Billaatos Oo Taliyaha Reer Rooma Ahaa ........189
Dhimmashadii Yuudas ........189
Ciise Oo Billaatoos Hor Taagan ........191
Ciise Waxaa Lagu Qodbay Iskutallaabta ........194
Ciise Waa Dhintay........197
Ciise Waa la Aasay ........ 199
Ciise Ayaa Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay ........201
Ciise Ayaa Galili Ugu Muuqday Kow Iyo Tobankii Xertiisa Ahaa ........ 204
GUNAANAD........ 205
ABOUT THE TRANSLATOR........ 206

# WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS TRANSLATION

*The Gospel according to Matthew has been poetically translated in a remarkable manner. The translator has used his poetic gift to produce a translation never seen before. Somali people are fond of poetry, and this translation will help them read, enjoy and understand the sacred scriptures.*

**Hope Abukar**
**Evangelist**
**Abuur Cusub Ministry**
**Nairobi, Kenya**

*I am very thankful to the Lord for allowing me to read this new poetic translation of the Gospel according to Matthew. Brother Aweis has done a superb job on this translation. This poetic rendition of Matthew bears witness to the fact that the Lord has helped His Somali church to mature to this level. This translation is a blessing to the Somali church in this present generation, and it will continue being a blessing to the generations to come. I want to encourage the Somali Christians to cherish this magnificent work and use it to nurture their life in the Lord. The Somali church is forever indebted to brother Aweis for his ability to contextualize the message of the Good News accurately and enjoyably.*

**Amin A. Ahmed**
**Author and Hymnologist**
**Horn of Africa**

*This poetic translation of the Gospel according to Matthew is a much-needed contextualization of the Good News of Jesus Christ, the Messiah. It is much easier now to memorize this entire Gospel and recite it by heart like a popular Somali poem.*

*The Somali people are passionate about poetry, and multiple Western explorers and educators have described them as a nation of poets; these explorers and educators include the Canadian novelist and scholar, Margaret Laurence, and the 19th-century British explorer, Richard Francis Burton, who traversed the Somali peninsula. I would describe this poetic translation as the best of all of Aweis' books thus far.*

**Y. B. Xirsi**
**Poet and Hymnolgist**
**Somalia**

*This Somali translation beautifully presents the Gospel of St. Matthew in classical Somali poetry. This rare and monumental work of sacred poetry would undoubtedly bless and inspire countless Somali believers and seekers for generations to come. The uniqueness and the effectiveness of this spiritual work is that it beautifully and superbly transforms the sanctified prose Gospel narration into a piece of powerful Somali poetry, which will undoubtedly linger in the poetry-inclined mind of the Somali reader for a very long time. I once again congratulate brother Aweis for his tireless effort to write, translate and produce many beautiful Somali Christian works written not only in the form of the usual prose narrative but also in the much more complicated universal language of poetry. Keep up the good work, brother Aweis, you are a true inspiration to Somali Christians everywhere!*

**Quule M. Egal**
**Somali Christian Elder**
**Ontario, Canada**

*This poetic translation of the Gospel according to Matthew is an asset to the Somali church, a contribution for which we have been waiting a long time. This poetic rendition of the Gospel satisfies the poetically leaning Somali hearts everywhere. It is a useful tool for the Somali church. Aweis has done something that was never done in the history of the Somali church. We are delighted with this magnificent work.*

**Grace and Peace,**
**Shino & Shania Gabow**
**Somali Christian Media Ministries**
**East Midlands, UK**

*I praise the Lord for my brother, Aweis; he has devoted his time to present the Gospel to the Somali people in a way they can comprehend it. Aweis has poetically translated the Gospel according to Matthew, composed Christian hymns and wrote the first catechism ever to be written in the Somali language. Aweis is a good brother who has been an encouragement to me for a long time. May God bless his efforts of developing Somali Christian literature.*

**Kawser Omar**
**Bible Teacher**
**Addis Ababa, Ethiopia**

# DEDICATION

This poetic translation of the Gospel according to Matthew is dedicated to the late Prof. Ahmed Ali Haile, a peacemaker, an educator and a disciple of Christ. Ahmed was one of the wisest and most generous men I have ever known.

# TUSMADA BUUGGA

1. Hordhac
2. Cutubka 1aad
3. Cutubka 2aad
4. Cutubka 3aad
5. Cutubka 4aad
6. Cutubka 5aad
7. Cutubka 6aad
8. Cutubka 7aad
9. Cutubka 8aad
10. Cutubka 9aad
11. Cutubka 10aad
12. Cutubka 11aad
13. Cutubka 12aad
14. Cutubka 13aad
15. Cutubka 14aad
16. Cutubka 15aad
17. Cutubka 16aad
18. Cutubka 17aad
19. Cutubka 18aad
20. Cutubka 19aad
21. Cutubka 20aad
22. Cutubka 21aad
23. Cutubka 22aad
24. Cutubka 23aad
25. Cutubka 24aad
26. Cutubka 25aad
27. Cutubka 26aad
28. Cutubka 27aad
29. Cutubka 28aad
30. GUNAANAD
31. TURJUMAHA

# HORDHAC

Injiilka Shariifka Ah sida uu Matayos u qoray ayaad kitaabkan kaga bogan doontaan. Waxaa intaas dheer, in kitaabkan loo turjumay hab suugaaneed iyadoo laga soo guuray turjumaaddii tiraabta ahayd loona soo guuray turjumaad tix ah. Waxaa iminka suurtagal ah in laxan la saaro kadibna qasiiddo ahaan loo qaado kitaabkan oo dhan.

Waa markii ugu horreysay taariikhda ee kitaab dhan oo ku jira Kitaabka Qudduuska Ah loo turjumo si tix ah waxaanse rejaynayaa in aysan noqon markii ugu dambaysay.

Eebbe ayaan uga mahadnaqayaa in uu iga dhigay mid marar badan uu u adeegsaday in uu taariikh cusub ku soo kordhiyo kiniisadda Soomaaliyeed ee caalamiga ah.

Kitaabkan waxaa ku baxay dadaal badan ee fadlan ka faa'iidayso kuna naaxi ruuxaaga. Fadlan la wadaag kitaabkan cid kasta oo xiisaysa suugaanta iyo caqiidada Eebbe ee Sayid Ciise Masiix.

Waxaan halkan uga mahadnaqayaa walaalaha igu dhiirigeliyay in aan kitaabkan u turjumo hab suugaaneed si ay uga faa'iidaystaan Masiixiyiinta Soomaaliyeed iyo Soomaalida kale ee weli xaqa doondoonaya.

Waxaan u ducaynayaa akhristayaasha kitaabkan aniga oo Eebbe uga baryaya in uu ka xijaabo wixii shar ah oo dhan kuna negeeyo tubta toosan ee saxda ah taas oo ah Sayid Ciise Masiix oo ah Badbaadiyaha keliya ee dunida.

Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan Masiixiyiinta Soomaaliyeed in ay dhaxal qoraal ah uga tagaan kiniisadda Soomaaliyeed. Kiniisaddii aan qoraal lahayni malahan taariikh la sheego waayo wixii la qoro ayaa qiima leh oo anfacaya quruumo iyo jiilal aad u badan. Dhaqanka Soomaaliyeed ee ku salaysan wax afka laga sheego dhaxal la isku hallayn karo ma ahan.

Waxaan idinkaga tegayaa nabad iyo caano iyo magaca qiimaha badan ee Sayid Ciise Masiix.

**Aweis A. Ali**

# Abtirsiinta Sayid Ciise Masiix

1 Kanu waa kitaabkii abtirsiinyada Ciise Masiix, ina Daa'uud, ina
Ibraahim.
[2]Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaq wuxuu dhalay Yacquub, Yacquub
wuxuu dhalay Yahuudah iyo walaalihiis, [3]Yahuudah waxay Tamar u
dhashay Feres iyo Serah, Feresna wuxuu dhalay Esroom, Esroom wuxuu
dhalay Araam, [4]Araam wuxuu dhalay Caminadaab, Caminadaab wuxuu
dhalay Naasoon, Naasoon wuxuu dhalay Salmoon, [5]Salmoon waxay
Raxab u dhashay Bocas, Bocas waxay Ruud u dhashay Coobeed,
Coobeed wuxuu dhalay Yesay, [6]Yesay wuxuu dhalay boqor Daa'uud.
Daa'uud waxay naagtii Uuriyaah qabi jiray u dhashay
Sulaymaan, [7]Sulaymaan wuxuu dhalay Rexabcaam, Rexabcaam wuxuu
dhalay Abyaah, Abyaah wuxuu dhalay Aasaa, [8]Aasaa wuxuu dhalay
Yoosafaad, Yoosafaad wuxuu dhalay Yooraam, Yooraam wuxuu dhalay
Cusyaah, [9]Cusyaah wuxuu dhalay Yootam, Yootam wuxuu dhalay
Axaas, Axaas wuxuu dhalay Xisqiyaah, [10]Xisqiyaah wuxuu dhalay
Manaseh, Manaseh wuxuu dhalay Aamoon, Aamoon wuxuu dhalay
Yoosiyaah, [11]Yoosiyaah wuxuu dhalay Yekonyaah iyo walaalihiis waagii
Baabuloon loo kaxeeyey.
[12]Goortii Baabuloon loo kaxeeyey dabadeed, Yekonyaah wuxuu dhalay
Salaatii'eel, Salaatii'eel wuxuu dhalay Serubaabel, [13]Serubaabel wuxuu
dhalay Abihuud, Abihuud wuxuu dhalay Eliyaaqiim, Eliyaaqiim wuxuu
dhalay Asoor, [14]Asoor wuxuu dhalay Saadooq, Saadooq wuxuu dhalay
Akhiim, Akhiim wuxuu dhalay Eliyuud, [15]Eliyuud wuxuu dhalay
Elecaasaar, Elecaasaar wuxuu dhalay Mataan, Mataan wuxuu dhalay
Yacquub, [16]Yacquub wuxuu dhalay Yuusuf oo ahaa ninkii Maryan, tii
Ciise, kan Masiix la yidhaahdo, ka dhashay.
[17]Abtirsiinyada Ciise
Ibraahim iyo Daa'uud
Waa afariyo toban oday
Daa'uud iyo waagii
Baabuloon la aadayna
waa afar iyo toban oday
Baabuloon iyo Masiixana
waa afar iyo toban oday

## Dhalashadii Sayid Ciise Masiix

18 Ciise hooyadiis oo
Yuusuf weli u doonnayd
Intaanay is taabanin
uur yaa ku soo baxay
Uu qudduusku leeyahay
Yuusuf aanuu garanayn
19 Nin xaquu ahaayoo
Maryan in ay ogaadaan
Dadka kale arkaanna
marna aanan doonayn
Wuxuuse uu go'aansaday
in uu hoos isaga furo
20 Intii aanuu weli furin
fikirkaasna uu weday
Eebbe yaa malaa'ig
riyo ugu soo diray
OoYuusuf kuna tiri
ha ka baqan in aad Maryan
Arad aad ka dhigato
Ruuxa ah Qudduuskaa
Uurkeedu kaba yimid
21 Wiilka ay dhalayasana
Ugu wanqal Ciise
isagaa dadkiisa
Illeyn kaba badbaadin
dembi wixii ay gelayeen
22 Waxaas oo idilna
waxaa ay u dhacayaan
In la oofiyaa uun
hadaladi Eebbe
Nebigiisu uu yiri
23 Inan bikrad ah baa
Uuraysan doontoo
oo wiil umuliyoo

Magiciisu uu yahay
Eebbe baa innala jira
24 Yuusuf wuu istaagoo
hurdadii idlaystoo
Amarkii malaa'igta
yuu toos u fuliyoo
Ooridiisi qaatoo
25 Inkastuusan uba tegin
Illaa ay umushay wiil
Ciise uu u bixiyey

## Booqashadii Kuwii Bari Ka Yimid

**2** Markii Ciise uu dhashay
uu ku dhashay Beytlaxam
Herodos ahaa Boqor
marti yaa isaga
Bari uga yimid oo
iyagoo intaa leh
2 Amiirkii Yuhuudda
intee lagu umulayoo
Bari waxaan ku aragnay
xiddigtiisi oo ifi
Oo waxaannu dooni
in aan caabudno e
3 Welwel ayaa ku beermay
oo saaqay Herodos
Iyo Yeruusaalemba
4 Wadaad saroo dhan ururi
Culimadu isugu yeer
weyddiiyey idilkood
Halkii uu Masiixii
uu ku dhalan lahaayoo
5 Oo waxay u sheegeen
in ay Beytlexam tahay
Nebigiina uu qoray

[6]Adiga Beytlaxamey
oo dhulkii Yuhuudda ah
Kuma aad yarida eeg
aaqilada Yuhuudda ah
Oo waxaaba kaa iman
taliyaha adduunkoo
Dadkayga Israa'iil
yuu u talin doonaa
[7]Markaas ayuu Herodos
raggii aaqiliintii
Hoos ugu yeeroo
oo uu ka hubsaday
Goortii ay u muuqatay
xiddigtii ifeysay
[8]Markaas ayuu Beytlaxam
cid uu u dirayoo
Oo uuna kuba yiri
taga oo ilmaha yar
Aad iigu doona
goorta aad heshaanna
Ogeysiis i siiyoo
si aan u tago oo
Oo aan u caabudo
[9]Markii ay boqorkii
Warkiisii ay maqleen
waa ay tageenoo
Xidigtii bari ayaa
idilkood horkacdoo
Illaa aya dul timid
oo ay kor joogsatay
Ilmihii dushiisa
[10]xiddigti arkeenoo
Farxad aad u weyn bey
ay wada farxeenoo
[11]Aqalkii galeenoo
oo waxay arkeen

Ilmihii yaraa iyo
hooyadiis Maryan ahayd
Waana ay dhaceenoo
isagay caabudayeen
Khasnadihii u fureen
waana aya u dhiibeen
Hadiyado dahab ah
beeyo iyo malmal
[12]Riyaana loogu digay oo
uma noqon Herodos
Jid kale ayayna
dhulkoodi u mareen

## U Cararkii Masar

[13]Goortii ay ka tageen
malaa'igti Eebbe
Ayaa Yuusuf riyo
ugu muuqatay oo
Iyadoona kuna leh
kac oo kexeeyoo
Ilmaha iyo hooyadiis
oo Masar u carara
Oo halkaasna jooga
illaa aniga amarkey
Sababtoo ah Herodos
yaa ilmaha dooni
Sidii uu u dili lahaa
[14]Wakhti habeen ah
Yuu soo kacay oo
ilmihiyo hooyadiis
Uu soo kexeeyoo
oo ay tageen Masar
[15]Oo ayna joogeen
illaa Herodos dhimashadi

Oo waxaa la oofiyey
waxyigii Eebbe
Nebigiisu uu yiri
oo ahaana sidatan
Inankayga Masar baan
ayaan uga yeeray

## Caruurtii La Laayay

16 Markuu arkay Herodos
in reer barigii
Aad ugu ciyaareen
ayuu intuu carooday
Cid laysa u diray
inamadi dhammaantood
Intii yaryarayd
oo laba jirsatay
Iyo intii ka yarayd
oo joogay Beytlaxam
Iyo meelaha u dhaw
wakhtigii uu ka hubsaday
Nimankii aqliga lahaa
17 Markaasaa la oofiyey
Waxyigii Eebbe
uu nebi Yeremyaah
U soo dhiibey beri hore
18 Cod ayaa la maqlay
oo Raama laga maqlay
Oohin iyo baroor weyn
Raaxeel oo ooyi
Caruurteed u ooyi
oo aanan doonayn
In la qalbi qaboojiyo
waayo ma aanay joogin

## Ka Soo Noqodkii Masar

19Herados markii uu
dhintay oo xijaabtay
Malaa'igti Eebbe
Yuusuf riyo ku aragyoo
Masar intuu joogay
oo ayna kuna tiri
20Ilmihiyo hooyadiis
kac oo kaxeeyoo
Oo taga Israa'iil
dhulkii uu lahaa
Oo wey dhinteen
intii dili lahayde
21Markaasuu kacay oo
ilmihii kexeeyey
Iyo hooyadiisba
oo tageen dalkii
Israa'iil ahaa
22Laakiin markii uu
Maqlay in Arkhela'os
meeshii aabbihiis
Herodos ahaa
u taliyo Yuhuudiya
Wuu ka baqay inuu
tago aaggaas isaga ah
Markaasaa Eebbe
riyo ugu digay oo
Oo uu ku leexday
Galiliya agteeda
23Waxaa uuna yimid
oo degay magaalo
Naasared la oran jiray
si ay u noqoto
Nebiyadi Eebbe
wixii ay yiraahdeen

Reer Naasared inuu
magiciisu uu noqon

## Risaaladii Nebi Yaxye

**3** Yaxye Baabtiisaha oo
isna maalmahaas yimid
Ayaa Yuhuudiya
cidladeeda tegay oo
Wacdi uga jeediyey
isagoo intaa leh
2 Toobad keena ummad yahay
illeyn boqortooyadi
Ahayd tii jannada yaa
ayaa soo dhawaataye
3 Illeyn kani waa kii
uu nebi Ishacyaah
Ka hadlay oo yiri:
Cidlada ayaa
mid cod uga qayl yaa
Jidka Eebbe hagaajiya
waddooyinkiisa oo idil
In la toosiyaa waa
4 Nebi Yaxye isaguba
waxaa uu guntanaa
Waa dhogorta geel oo
dhar ahaan u tolnayd
Oo suun megedna
dhexda ugu xidhnaaye
Cunto waxaa u ahaa
ayax iyo malab
Uu soo qaraabtee
5 Oo reer Yeruusaalem
Ayaa u soo baxay
iyo dhammaan Yahuudiya

Dadkii Urdun agteediyo
agaheeda deganaa
6 Webi Urdun ayuu
ku baabtiisay iyagoo
Dembigooda qiranoo
7 Kolkuu arkay laakiin
In badan oo Faarrisiin
iyo Sadukiin ah
Oo u yimid baabtiis
ayuu wuxuu yiri
Ilmihii jilbisay
yaa idiinka diga
In aad ka carartaan
carada imanaysa?
8 Miro toobad istaahila
waa in aad bixisaan
9 Oo ha ku fikirina
in aad tiraahdaan
Nebi Ibraahim Ayaan
aabbe u leennahay
Waxaan aan leeyahay
Eebbe wuxuu awoodaa
In uu nebi Ibraahim
dhagaxyadaad arkaysaan
Caruur uga kiciyo
10 Waxaa intaas dheer
In weliba faaskii
uu geedaha guntooda
Uu dhigan yahay oo
geed weliba oo aan
Miro wanaagsan aan bixin
in la gooynahayoo
Lagu tuuri uun dabka
11 Anigu kolley biyo
Ayaan idinku baabtiisi
illaa toobadkeentaan

Laakiin kan imanaya
ayaa iga itaal weyn
Kan aanan istaahilin
in aan qaado kabihiis
Isaga ayaa
Ruuxa Qudduuka ah
Iyo weliba dab
Idinku baabtiisi
[12]Gacantiisa ayay
masaftiisu ku jirtaa
Oo wuuna sifeyn
meesha uu wax ku tumi
Sarreenkiisa oo idil
maqsinkuu ku ururin
Buunshaha dab ayuu
uu ku gubi doonaa
Kaas oo aan damahayn

## Baabtiiskii Sayid Ciise Masiix

[13]Oo markaas ayuu
uu Ciise soo tegay
Galilina ka yimid oo
Webi Urdun uu yimid
Nebi Yaxye ayuu rabay
inuu soo baabtiisoo

## Jirrabaaddii Sayid Ciise Masiix

**4** Ruuxa ayaa
Ciise uun kaxeeyoo
Oo geeyey cidlada
in Ibliisku jirrabo
[2]Oo afartan maalmood

iyo afartan habeen
Ayuu soomanaayoo
aad ayuu u baahday
3 Duufiyihi u yimid oo
Kuna yiri isaga
War haddii aad tahay
Eebbe Inankiisii
Dhagaxyadan ku oro
kibis ii noqda
4 Isna u jawaab oo
kuna yiri isagii
Waa ay qoran tahay
kibis oo keliya
Dadku kuma u nooloo
Eray kastoo Eebbe
Ka soo baxa afkiisa
ayaa uu ku nool yahay
5 Kolkaa yuu Ibliiskii
uu geeyey magaaladi
Ahayd qudduuska
oo uuna saaray
Munaaraddi ahayd
tii macbudku uu lahaa
6 Oo uuna kuna yiri
Haddii aad tahay
Inankii Eebbe
hoos isu tuur oo
Illeyn wey qoran tahay
Eebbe ayaa
ku amri doonaa
In malaa'igihiisu
ay gacmahooda
Ay kugu qaban oo
in aanay cagtaadu
Dhagax aanay ku dhicin
7 Ciise ayaa ku yiri

waa ay qoran tahay
Eebbahaaga Rabbiga ah
waa in aanad jirrabin
[8]Haddana Ibliiskii
ayaa buur aad u dheer
Inta uu geeyay
boqortooyo ayuu tusay
Intii jirtay dunida
iyo weli ammaantood
[9]Waxaa uuna ku yiri
Waxan oo dhan
Ayaan ku siini
Haddaad ii sujuuddid
Oo aad i caabuddid
[10]Markaas ayaa
Ciise uu ku yiri
Ibliis yahow bax
Illeyn waa qoran tahay
inaad caabuddo
Eebbahaaga Rabbiga ah
oo waa in aad
U adeegto keligiis
[11]markaas ayuu
Uu ka tegay Ibliiskii
waxaana u yimid
Malaa'igo oo
weyna u adeegeen

## Sayidkii Oo Degay Kafarna'um

[12]Markii uu maqlay
in la qabtay Yaxye
Ayuu Galili
uu ku leexday Ciise
[13]Inta uu Naasared

ka tegay ayuu
Oo wuxuu yimid
oo uuna degay
Kafarna'um oo ahayd
badda agaheeda
Oo soohdimaha
Sebulun iyo Naftaali
Ayay ku jirtay
[14]iney noqoto wixii
Nebi Ishacyaah
uu Eebbe soo faray
[15]Dhulka Sebulun iyo
iyo dhulka Naftaali
Xagga jidka badda iyo
webi Urdun shishadiisa
Quruumaha ka mid ah
Galili iyo
[16]Umadihii fadhiyi jiray
Gudcurka ayaa
Iftiin weyn arkay oo
ummadihii fadhiyi jiray
Dalka iyo hooska
Dhimashada lahaa iyo
Iftiin yaa u baxay

## Wacdigii Sayid Ciise Masiix

[17]Intaas dabadeed
Ciise ayaa billaabay
Inuu wacdiyo
oo uu yiraahdo
Inaad toobad keentaan
waa inay ahaataa
Boqortooyadii ahayd
tii uun jannada
Ayaa soo dhawaatee

## Sayidka Oo U Yeeray Xertiisii Ugu Horreysay

18 Markuu ag marayay
Galili baddii ahayd
ayuu wuxuu arkay
Labo ah walaalo
Simoonkii la oran jiray
Butros iyo Andros
oo ahaa walaalkiis
Iyaga oo shabag
badda ku tuuraya
Kaluumaystayaal ayay
illeyn ahaayeen
19 Oo wuxuu ku yiri
isoo raaca aniga
Waan idinka dhigayaa
dad jillaabtayaal oo
20 Shabagyadii ayay
isaga tageen oo
Raaceen isagii
21 Hore uga soco halkaa
Wuxuu arkay laba kale
oo walaalo ahaa
Yacquub ina Sebedi
iyo walaalkii Yaxye
Iyagiyo aabbahood
dooni ay ku jiraan
Oo shabagyadoodii
hagaajinaya oo
Wuuna u yeeray
22 Oo wey isaga tageen
Doonnidiyo aabbahood
oo isaga raaceen

## Sayidka Oo Bogsiiyey Dad Badan

[23]Ciise ayaa Galili
oo dhan soo wareegay
*Sunagogyadii ayuu
Injiilkii ku baray oo
Boqortooyadii ayuu
wacdi uga jeediyey
Bukaan oo dhan iyo cudur
ayuu bogsiiyey
[24]Warkiisii ayaa tegay
Suuriya oo dhan
Oo waxay u keeneen
kuwii bukay oo dhan
Oo cudurro kala duwan
iyo silic qabay oo
Iyo kuwo jinni qaba
iyo kuwo suuxdin qaba
Iyo kuwo cuuryaan ah
waana uu bogsiiyey
[25]Waxaa raacay isagii
dad aad u badan oo
Isaga kala yimid
Galili iyo Dekabolis
Iyo Yeruusaalem
iyo Yuhuudiya
Iyo Webi Urdun
iyo weli duleedkiis

** "Sunagog" waa macbud lagu cibaadeysto*

## Wacdigii Sayidka Markuu Buurta Joogay

**5** Markuu arkay dadkii
aadka u badnaa
Ayuu fuulay buuroo

oo uu fadhiistay
Oo xertiisii ayaa timid
[2]Afkiisuuna kala furay
Oo wax baray iyagii
isaga oo leh

## Kuwa Barakadaysan

[3]Ruuxa kuwa ka ah
masaakiinta ayaa
Barakaysan oo
iyagaa leh jannada
Tan ah boqortooyada
waayo iyaga ayaa
Loo qalbi qaboojin uun
[4]Kuwa baroorta ayaa
Barakaysan oo
qalbiqaboojin ayay
Heli uun doonaan
[5]Inta camalka qabow
Ayaa barakadaysan
illeyn dhulka ayay
Dhaxli uun doonaan
[6]Inta xaqnimada
U gaajaysan oo
misna u harraadsan
Ayaa barakaysan
waa ay dhergi doonaan
[7]Inta naxariista leh
ayaa barakadaysan
Waayo iyaga ayaa
loo naxriisan uune
[8]Inta qalbiga ka ah
daahiriinta ayaa
Barakaysan oo

Eebbeey arkaayaan
[9]Inta nabadda dhalisa
ayaa barakadaysan
Iyagaa loogu yeeri
ilmihii Eebbe
[10]Inta xaqnimada
aawadeed la silca
Ayaa barakadaysan
waayo iyagaa leh
Boqortooyada ah
tii jannada ahayd
[11]Idinkaa barakaysan
markey idin caayaan
Oo laydin silciyo
oo xummaan idilkeed
La idinka sheegoo
aniga aawadey
[12]Farxa oo reyreeya
waayo jannada ayaa
Abaalgudkiinnu yaallaa
oo uu ku weyn yahay
Sidaas ayayna
horay ugu silciyeen
Nebiyadi uun hore

## Waxtarka Cusbada Iyo Feynuusta

[13]Cusbadii dhulka ayaad
idinku tihiinoo
Cusbo aan dhadhamayn
maxaa ay taraysaa?
Wax ay tarayso
ayaan markaa jirin
In la tuuro mooye
dadku ay ku tuntaan

[14]Iftiinka dunida
idinka ayaa ah
Magaalo haddii ay
buur ay ku taallo
Ma ay qarsoontee
[15]Feynuus haddii ay
Dadku ay shitaan
inta ay la boodaan
Weel ma ay hoos geliyaan
waxa ayse saaraan
Meeshi ay lahayde
weyna u iftiintaa
Inta guriga joogtee
[16]Sidaas oo kale
Iftiinkiinnu dadka
hortiisa ha iftiimo
Si ay shuqulladiinna
u arkaan wanaagood
Oo Aabbihiinna
oo ku jira jannada
Ay u ammaanaan

## Oofinta Sharciga

[17]Ha u malaynina
in aan u imid
In aan burriyo
sharciga iyo Qorniinka
Nebiyadi Eebbe
uma aanan iman
In aan burriyee
waxa aan u imid
In aan wada oofiyo
[18]Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah

inta aanu cirku
Iyo dhulku idlaan
shaqal ama dhibici
Kama ay idlaanayaan
sharciga isaga ah
[19]Qofkii uun jebiyaa
in yarba ha noqotee
Oo sidaas u bara
dadka uu wax barayo
Waxaa uu isaga
magaciisu uu noqon
Kan ugu yar
boqortooyadii ahayd
Tii jannada ee
[20]Waxaan idinku leeyahay
Haddii aanay
xaqnimada tiinna ah
Aana ay ka badnaan
tan culimada iyo
Farrisiinta iyaga ah
ma aad geleysaan
Boqortooyadii ahayd
tan ah jannada

## Dhiig Gelidda

[21]Waa aad maqasheen
war hoy in lagu yiri
Kuwii hore u jiray
waa inaanad dhiig gelin
Kii dhiig qabaa uun
waxaa uu galabsan
Xukunkee ogaada
[22]Waxaan idinku leeyahay
Kii u carooda

walaalkiisa kii ah
Waxaa uu galabsan
waa uun xukunkee
Kii uun walaalkiis
doqon ugu yeera
Jahannama ayuu
dabkeeda uu gelayaa
23Haddaba haddii aad
meesha allabariga
Aad keento hadiyad
oo aad xusuusato
In uu walaalkaa
kuu haysto eed
24Meesha allabariga
hadiyadda uga tag
Oo horta walaalkaa
heshiis uun la soo gaar
Intaas kadib kaalay
oo bixi hadiyadda
25Cadowgaaga dhaqso uun
ula sii heshii
Inta aad jidka
heedhe aad ku soctaan
Si aan cadowgu
aanu kuugu dhiibin
Ninka xaakinka ah
xaakinkuna askari
Aanu kuugu dhiibin
oo aan xabsiga
Aan laguugu tuurin
26Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
xabsigaas isaga ah
Ma aad ka baxaysid
inta aad ka siiso
Taanada ugu yar
ee ugu dambeysa

## Sinada Iyo Xummaha Kale

[27]Waa aad maqasheen
in hore loo yiri
Ha sinaysanina uun
[28]Anigaa idin leh
Ninkii qof dumar ah
damac u eegaa
Qalbigiisa ayuu
durba ka sinaystay
[29]Ishaada midigta ah
haddii ayba
Ku xumayso adiga
iska bixi oo tuur
Waxaa adiga kuu roon
inaad weyso
Xubin qur ah
intii jirkaaga
Jahannama uu
wada galo idilkiis
[30]Gacantaada midigta ah
haddii ay
Ku xumeyso adiga
iska jar oo tuur
Waxaa adiga kuu roon
inaad weyso
Xubin qur ah
intii jirkaaga
Jahannama uu
wada galo idilkiis
[31]Hore ayaa loo yiri
kii fura afadiis
Warqadda ah furniinka
ha siiyo iyada
[32]Waxaan idinku leeyahay
nin walba oo

Afadiisa ku fura
sino aawadeed
Wixii aan ahayn
in ay sineysato
Ayuu ka dhigaa
oo kii aroosaa
Afadii la soo furay
waa uu sineystaa

## Ha Dhaaranina

33 Waa aad maqasheen
in hore loo yiri
Nidarradiinna waa in
aanaanad jebinina
Laakiin waa in
aad Eebbe hortiisa
Adi nidarradaada
aad ku oofisaa waa
34 Anigaa idinku leh
dhaaraha waa in
Aad kaba fogaataan
jannada waa in
Aanaad ku dhaaran
waa Eebbe carshigiis
35 Dhulkana waa in
aanad ku dhaaran
Waa Eebbe meeshuu
uu dhigo cagihiis
Yeruusaalem waa in
aanad ku dhaaran
Boqorka weyn ayaa
iyadaa iska leh
36 Madaxaaga waa in
aanad ku dhaaran

Waayo tin keli ah
caddaan ama madow
Kama aad dhigi
karahaysid iyada
37 Hadalkiinnu waa in
uu ahaado keliya
Haah iyo haah
ama maya iyo maya
Intaas ka badani
sharka ayuu
Uu ka yimaadaa

## Aargoosiga

38 Waa aad maqasheen
in hore loo yiri
Il il ha loo rido
iligna waa ilig
39 Anigaa idinku leh
ha caabbina axadkii
shar iyo waxaas fala
ku alla iyo kii
Dhabankaaga midigta ah
kaa dhirbaaxa adiga
Kan kale u jeedi
40 oo kii doona
In uu adiga
ashtako kugu oogo
Si uu u qaato
garanka aad xiran tahay
Shaatigaaga ugu dar
41 ku alla iyo kii
Kugu qasba adiga
inaad mayl la socotid
Mayl kalena ugu dar

[42]Kii ku dawarsada adi
Wixii uu baryaba sii
kii ammaah kaa raba
Ha ka jeesan isaga

## Cadawgiinna Jeclaada

[43]Waa aad maqasheen
in hore loo yiri
Deriskaaga waa in
aad jeclaato isaga
Cadowgaagana aad
necbaatid isaga
[44]Anigaa idinku leh
cadowgaaga waa in
Aad jeclaatid isaga
u duceeya kuwa
Idin habaara idinka
wanaag u fala
Kuwa idin neceb
oo Eebbe u barya
Kuwa idin caaya
oo idin silciya
[45]Si aad u ahaataan
carruurta Aabbihiin
Oo ku jira jannada
qoraxdiisa ayuu
U soo bixiyaa
inta xun iyo
Inta wanaagsanba
roobna wuu u di'iyaa
Kuwa xaqa ah iyo
kuwa aan ahaynba
[46]Abaalkee aad leedihiin
haddii aad jeceshihiin

Kuwa idin jecel
canshuur ururi yaalkuba
Miyaa anay sidaa falin?
47 Haddii aad salaantaan
Walaalihiinna oo qura
maxaa ah dheeraad
Oo aad samaysaan?
Dadka kale miyaa anay
Sidaas anay samayn?
48 Sidaas aawadeed
U samaada sida
Aabbihiinna jannadu
Sida uu u san yahay

## Sadaqabixinta Qarsoon

**6** Iska jira inaydnaan
xaq ahaanshihiina
In aadna dadka
hortiisaa ku samayn
In ay idin arkaan
haddii kale abaal
Kuma aad lihidiin
Aabbihiinna jannada
Ku jira ee ogaada
2 Marka aad bixinaysaan
Sadaqo waa in
aanad ku dhufan buun
Munaafaqiintu iyagaa
sunagogyada iyo
Jidadka agtooda
istus la istaagee
Si uu dadku
u ammaano iyaga e
Waxaan idin leeyahay

oo runtiina iga ah
Abaalgudkoodi waa ay
heleen ee ogaada
3 Adigu goortaad
aad bixinaysid sadaqo
Bidixdaadu waa in
aanay ogaanin
Midigtaadu waxa ay
samaynayso iyadu
4 Sadaqadaadu si ay
qarsoodi u ahaato
Oo Aabbahaaga
qarsoodiga arka
Kuu abaal gudaayee

## Salaadda Qarsoon

5 Marka aad adigu
salaad aad tukanayso
Ha ahaanina
munaafaqiinta oo kale
Waayo iyagaa jecel
in ay ku tukadaan
Sunagogyada iyo
isgoysyada jidadka
Si ay dadku u arkaan
Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
abaalgudkoodi waa ay
Heleen ee ogaada
6 Adigu marka aad
Salaad aad tukanayso
qolkaaga qarsoon aad
Albaabkaaga soo xiro
Aabbahaaga bari

Indhuhu aanay arkayn
wax kasta oo qarsoon
Aabbahaaga arka
ayaa kuu abaal gudi
[7]Marka aad tukanaysid
waa in hadalkaaga
Aanaad ku celcelin
gaalada oo kale
Iyagaa aaminsan
in hadalkooda badan
Ay tahay sababta
u maqlaayo Eebbe
[8]Idinku ha ahaanina
sida iyaga oo kale
Illeyn idinka Aabbihiin
waa uu og yahay
Baahidiinna oo idil
inta aanad hadlin

## Tukashadii Ciise Baray

[9]Sidan u tukada
Aabbahayga jannada
ku jirow adigu
Qudduus ha ahaado
magacaagu adigee
[10]Boqortooyadaada ah
tii jannada Eebbow
Ha timaado oo
doonistaada waa in
Lagu yeelo dhulka oo
sida jannada oo kale
[11]Maalin cunto innagu filan
maanta inna sii
[12]Qaamaheenna innaga cafi

sidaan innaguba
U cafinnay kuwa
noo qaamaysan innaga
13 Jirrabaad ha inoo kaxayn
shartase innaga du
Xoogga iyo ammaanta
iyo boqortooyada
Adigaaa leh weligaa
aamiin Ebbow aammiin
14 Waayo haddii aad
dadka aad u cafisaan
Xummaantooda iyaga
Aaabbihiinna jannada
Ku jira ayaa
idin cafiyi doona
15 Laakiin haddii aad
dadka aanad cafiyin
Aabbihiinnu xumaantiinna
idiin cafiyi maayo

## Soonka

16 Marka aad sooman tihiin
ha u fool qulubsanaan
Munaafaqiinta oo kale
waa is fool-xumeeyaan
Si ay ugu muuqdaan
in ay sooman yihiin
Waxaan idin leeyahay
oo runtiina iga ah
Abaalgudkoodi waa ay
heleen ee ogaada
17 Laakiin adigu

marka aad sooman tahay
Waa in madaxaaga
aad saliid marisaa
Foolkana aad dhaqataa
[18]si aanad dadka
Aadna ugu muuqan
inaad sooman tahay
Laakiin Aabbahaaga
indhuhu aanay arkayn
Aad ugu muuqatid
wax kasta oo qarsoon
Aabbahaaga arka
ayaa kuu abaal gudi

## Khasnadda Runta Ah

[19]Dhulka waa in
aanad maalkiinna
Ku ururin isaga e
aboor iyo mirir
Ayaa baabi'inaya
tuug ayaana jebin
Oo xadaya isagee
[20]jannada waa in
maalkiinna aad
ku urursataan
Aboor iyo mirir
ayaan baabi'in karin
Tuug ayaanan jebin Karin
oon xadi karayne
[21]Halka uu maalku
kuu yaallo adiga
Qalbigaagu uu yaal

## Dhawridda Indhaha

[22]Ileyska jirku
waa indhahaagee
Haddii indhahaagu
ay toosan yihiin
Jirkaaga oo dhan
ayaa iftiimi doona
[23]Indhahaagu haddii
ay qaloocan yihiin
Jirkaaga oo dhan
gudcur buu ahaane
Iftiinka kugu jira
haddii uu gudcur yahay
Gudcurkaas ar weynaa!

## Talo Saarashada Eebbe

[24]Laba sayid Ayaan
qofna u shaqayn karin
Mid ayuu nacayaa
mid ayuuna jeclaan
Mid ayuu marxabayn
midna wuu yasaayaa
Uma wada shaqayn kartaan
Eebbe iyo maal e
[25]Anigaa idinku leh
ha uga welwelina
Wixii ay naftiinnu
ay cuni lahayde
Oo ay cabbi lahayd
jirkiinna waa in
Aanad uga welwelin
wixii uu xiran lahaa
Sow nafta iyadu
kama roona cuntada

Iyo cabbitaanba
sow jirka isaguna
Kama roona dharka?
[26]Shibiraha cirka eeg
Waxba ma ay beertaan
mana ay gurtaan wax
Maqsinnona ma ay lahan
ay wax ku urursadaan
Oo Aabbihiinna
ku jira jannada
Ayaa cunto siiya
idinku miyaydnaan
Iyaga ka roonayn?
[27]Midkiinnee ayaa
Inta uu welwelo
dhererkiisa in uu
Dhudhun uun ku dara
awoodi karaya?
[28]Dharka maxaa aad
uga welweshaan?
Fiiriya ubaxyada
duurkaa isaga yaal
Sida ay u baxayaan
ma ay shaqeeyaan
Mana ay miiqdaan
[29]Anigaa idinku leh
In xitaa Sulaymaan
wakhtigii ammaantiisa
Oo la isku daray
dhar uma uu gashan
Sida kuwan oo kale
[30]Haddii Eebbe
Sidaa u huwiyo
Cawskaa isaga ah
Iminka ku yaal duur
oo la gubayo berri
Intee ka badan
ayuu idin huwinayaa

Iimmaan yar yaalow?
31 Ha uun welwelina
Idinka oo leh
maxaan aan cunnaa?
Ama aan cabbaynaa?
Ama aan xirannaa?
32 Gaalada ayaa
waxaas oo dhan
Doondoona iyaguye
Aabbihiina jannada
Ku jira ayaa og
inaad waxaas oo dhan
Aad u baahan tihiin
33 Marka hore waa in
Boqortooyada Eebbe
iyo xaqnimadiisa
Marka hore aad doontaan
oo waxaas oo dhan
Ayaa la idin siiniye
34 Waa in aanad berito
Aanad ka welwelin
waayo iyada ayaa
Isu welweleysa e
maalin kasta iyadaa
Sharkeedu uu ku filan yahay

## Qofna Ha Xukumina

**7** Qofna waa in Aydan
aanad xukumina
Inaan laydin xukumin
2 Xukunkii aad xukuntaan
Ayaa laydinku xukumi
qiyaastii aad qiyaastaan
La idinku qiyaasiye
3 Isha walaalkaa

Saxarka uun ku jiraa
maxaad u aragtaa?
Maxaadna u eegeyn
ishaada dogob
ayaa ku jiree?
4 Walaalkaa sidee ayaad
Ugu oran kartaa
iddaa aan saxarka
Ishaada ku jiraa
kaa saaro aniguye
Dogob ayaa illeyn
ishaada ku jiree?
5 Munaafaq ayaad tahay
ishaada dogobka
Ku jiraa iska saar
markaas ayaad bayaan
Waxaad u arkaysaa
saxarka uun ku jira
Isha walaalkaa
si aad uga saartee
6 Waxa qudduuska ah
eeyaha ha siinina
Luulkiinna waa in
doofaarrada aanad
Hortooda aad ku tuurina
si ayan ugu tuman
Oo ayan idinkana
idinku jeesanoo
Oo ayan idin dilin

## Ducada Suubban

7 Weyddiista oo waa
la idin siiniye
Doona oo waa

aad heli doontaan
Garaaca oo waa
la idinka furiye
8Oo kii weyddiistaa
waa uun la siiyaa
Oo kii doonaana
waa uu helaaye
Oo kii garaaca
waa uun laga furi
9Midkiinnee ayaa
haddii ilmihiisu
Uu weyddiisto kibis
dhagax siin lahaa uun?
10Ama xitaa kalluun
haddii uu wediisto
Siin lahaa abeeso?
11Idinka oo shar leh
Haddii aad garataan
inaad hadiyado
Wanaagsan ilmihiinna
aad siisataan
Intee ka badan
Aaabbihiinna jannada
Ku jiraahi uu
wax wanaagsan uu
Siinayaa isagu
kuwa barya isaga?

## Qaynuunka Dahabka Ah

12Wixii aad doontaan
in laydiin sameeyo
U sameeya dadka kale
Towreed iyo Nebiyadi
Waa dulucdoodii

## Labada Irid

[13]Iridda ciriirsan
waa in aad ka gashaan
Waayo iridda yaa weyn
jidkaa ah waasac
Kan u kaca baaba'a
oo inta ka gashaa
Ayaa aad u fara badan
[14]Iriddaa ciriiri ah
Jidkaa yariis ah
kan nolosha u kaca
Inta heshaa yaraa

## Mirahooda Eega!

[15]Iska jira nebiyada
been beenta ah
Ido iska dhigaya
markey idiin imanayaan
Yey wax uun boobta
ayay hoosta ka yihiin
[16]Mirahooda ayaad
ku garan iyagee
Oo ma geed qodax leh
canab laga gurtaa abid?
Mise yamaarug ayaa
berde laga gurtaa isna?
[17]Geedkii uun wanaagsan
miro wacan ayuu dhali
Geedkiise uun xun
miro xun ayuu dhali
[18]Geedkii uun wanaagsan
ayaan dhalin miro xun
Geed xumina ma uu dhalo

miro uun wanaagsane
[19]Geedkii aan dhalin
miro uun wanaagsan
Inta la jaro yaa
dabka lagu tuuri oo
[20]Waxa aad ku garan
waa uun mirahooda

## Camalka Suubban

[21]Ma ahan Rabbiyow
iyo Rabbiyow
Qofkii igu yiraahda
midka uun gelaaya
Boqortoyada ah
tan jannada ee
Kii uun sameeya
doonista Aabbahay
Ee jannada ku jira
kaasaa uun gelaaya
[22]Maalintaas in badan
baa i oran doona
Rabbiyow iyo Rabbiyow
magacaaga sow ma aan
Wax anan ku sheegin
oo miyaanan magacaaga
Jinniyo aan ku saarin
oo miyaanan magacaaga
Wax badan oo awood leh
aanan ku samayn?
[23]Markaasaan ku oran
weligayba idinma
Aanaan aqoone
shar miiran ayaad tihiin
Ordoo iga taga

## Labada Aasaas

[24]Qof kasta oo maqla
hadalka aan leeyahay
Oo ku camal falaa
waxaa loo ekaysiin
Qof aqli badan oo
gurigi uu lahaa
Ka dul dhisay dhagax oo
[25]Roobkii ayaa da'ay
Daadkii ayaa yimid
dabayshii ayaa dhacday
Gurigii ayay
aad ugu dhaceenoo
Gurigaas ma uu dumin
waayo dhagax ayuu
Dushiisa uu ka dhisnaa
[26]Qof kasta oo
Hadalka aan leeyahay
maqla oon addeecin
Waxaa loo ekaysiin
qof doqon ah oo kale
Oo ciidda dusheeda
ka dhistay guri oo
[27]Roobkii ayaa da'ay
daadkii ayaa yimid
Dabayshii ayaa dhacday
gurigii ayay
Aad ugu dhaceenoo
waa uu dumay gurigii
Dumid aad u weyn
[28]Markii Ciise uun
Uu dhammeeyey hadaladan
ayaa dadkii
Ay waxbariddiisii
aad ula yaabeen

29 Wuxuu wax u barayay
sida mid amar leh
Uma aanuu barayn
culimada oo kale

## Barraslihii La Bogsiiyey

**8** Buurtii markii uu
ka soo degay ayay
Dad aad u badani
soo raaceen isagii
2 Oo bal eeg nin baras qaba
ayaa u yimidoo
Intuu jilba joogsaday
ayuu ku yiri
Sayidow haddii aad
doonto waad awooddaa
Inaad iga yeesho
mid daahir ah
3 Ciisena intuu
gacantiis u taagay
Ayuu taabtoo
oo uu ku yiri
Waan doonaya ee
daahir noqo iminka
Daahir ayuu noqdoo
waa uu daayay baraskii
4 Ciise ayaa ku yiri
iska eeg ninkow
Cidna ha u sheegin
orod oona iska tag
Oo wadaadka is tus
oo bixi hadiyaddii
Uu Muuse amray
ha u noqoto iyagee
Marag ay arkaane

## Boqol U Taliyihii Loo Bogsiiyey

5 Markii uu galay
Kafarna'um ayaa
Waxaa u yimid
boqol u taliye
Isagoo baryaaya
6 oo leh, Sayidow
Midiidinkii ani
i shaqaynaayay
Ayaa jiifa guriga
isagoo curyaamoo
Oo aad u il daran
7 Ciise ayaa ku yiri
Waan imanayaa oo
anigaa bogsiine
8 Waxaa u jawaabay
boqol u taliyihii
Oo ku yiri, Sayidow
ma aan istaahilo
Inaad saqafka gurigayga
aad hoos gashide
Hadal keliya uun dheh
isagaa bogsanayee
9 Anigu waxaan ahay
askari laga sarreeyoo
Anigana askar
ayaa i hoos timaada
Kan waxaan ku iraahdaa
Tag, waana uu tagaa
Midna waxaan iraahdaa
Kaalay, oo yimaadaa
Waxaan aan iraahdaa
aniga midiidinkay
Waxan ii samee
wuuna ii sameeyaa

[10]Ciise markii uu
intaas uu maqlay
Waa uu yaabay
waxaa uuna ku yiri
Intii la socotay
[11]Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
iimmaan saan u weyn
Kama aanan dhex helin
reer bini Israa'iil
Waxaan idin leeyahay
Qaar badan ayaa bari
Iyo galbeed ka iman
oo la fadhiisan
Ibraahimya Isxaaq
iyo Yacquuboo
Boqortooyadii ahayd
tii jannada ayay
Gudaha u fadhiisan
[12]balse ilmihii
Boqortooyadii ahayd
tii jannada ayaa
Lagu tuuri iyaga
dibadda guducurka ah
Waxaa jiri un meeshaas
ilko jirriqsi
Iyo baroore
[13]Markaas ayuu
Ciise uu tag yiri
boqol u taliyihi
Sidaad u rumaysatay
ayay kuu noqone
Oo saacaddaasna
ayuu midiidinkiisii
U bogsaday isaga

## Sayidka Oo Bogsiiyey Dad Badan

14 Goortii uu Ciise
uu galay gurigii
Butros uu lahaa
waxaa uu arkay
Butros soddohdiis oo
jiifta oo qandhaysan
15 Markaas ayuu
uu taabtay gacanteed
Qandhadii ayaa markaas
ka baxday iyadii
Waana ay kacdoo
u adeegtay isagii
16 Markii ay noqotay
makhribkii ayay
Waxaa ay u keeneen
dad badan oo
Jinniyo qaba uun
eray ayuuna
Uu ku saaray jinniyadi
kuwii bukay oo dhan
Waa uu bogsiiyey
17 si ay u noqoto
Waxyigii Eebbe
uu nebi Ishacyaah
U soo dhiibay beri hore
Isagaa qaatay
innaga bukaankeen
Iyo cudurradeennii
isku raray iyaga

## Natiijada Xernimada

18 Markii uu Ciise
arkay dad badan

Oo ku wareegsan
ayuu amray
In dhinaca kale
ay tagaan oo
[19]Markaas ayaa
mid ka mid ah culimadi
U yimid isagii
oo ku yiri, Macallin
Meeshii aad tagtid
waa aan ku raacaa
[20]Ciise ayaa ku yiri
Dawacooyinka eeg
Godad ayay leeyihiin
shimbiraha cirkana eeg
Buulal ayay leeyihiin
Wiilka Aadanuhuse
Meel uu dhigto madaxiis
ma uu lahane
[21]Mid kale oo xertiisa ah
ayaa ku yiri
Sayidow ii oggolow
horta inaan tago
Soo aaso aabbahay
[22]Ciise ayaa ku yiri
Aniga isoo raac
meydadku ha aasteen
Iyaga meydkoodee

## Sayidka Oo Duufaan Dejiyey

[23]Markii uu fuulay
doontii ayay
Xertiisii ay raaceen
oo duufaan weyn
Ayaa ka kacay haradii

illaa ay hirarkii
Doontii ay qariyeen
isna wuu hurdayoo
[25]Markaas ayaa xerti
u timid isagii
Oo toosiyeenoo
iyaga oo leh
Inna badbaadi Sayidow
waa aan qarqaynaa
[26]Isna waxaa uu yiri
maxaad u baqaysaan?
Iimaankiinnu waa
mid aad u yar
Markaas ayuu kacay
oo canaantay dabayshii
Iyo weliba hirarkii
xawaal weyn ayaa dhacay
[27]Waa ay yaabeen nimankii
waxay is yiraahdeen
Nin caynkee ah weeye
dabaysha iyo hirarkuba
Waa ay addeecaan?

## Jinnoolayaashii Reer Gandareni

[28]Markii uu yimid
dhinaca kale ee gobolka
Ee reer Gandareni
waxaa la kulmay isaga
Laba qof oo jinni qaba
Xabaalaha ayay
Ka soo baxeen iyaguye
iyagoo khatar
Si aad ah u ahoo
jidka aan la mari karin

[29]Waa ay qayliyeen
iyaga oo leh
Maxaa innoo dhexeeya
Wiilka Eebbow?
Ma waxaad u timid
inaad na silciso
Iyadoon wakhtigii
aanba la gaarin?
[30]Waxaa iyaga ka fogaa
xayn ah doofaarro
Oo aad u badnaa
oo daaqahayay
[31]Jinniyadii ayaa baryay
iyaga oo leh
Haddaad inna saaraysid
innoo dir xayntaas
Doofaarrada ahe
[32] Baxa! ayuu yiri
Markaas ayay baxeen
ay galeen doofaarradi
Oo Xayntii oo dhammi
jar hoose ayay
Dhammaantood u yaaceen
illaa iyo haradii
Biyihii ayayna
ay ku bakhtiyeen gebi
[33]Oo daajiyayaashii
ayaa cararay oo
Ay galeen magaaladi
waxaa ayna weriyeen
Waxa alliyo wixii dhacay
iyo jinnoolayaalkii
Wixii ku dhacay iyo
[34]Magaaladi oo dhan
Ayaa lagaga soo baxay
in ay Ciise u tagaan

Goorti ay arkeenna
waxa ay ka baryeen
In uu isaga tago
iyaga gobolkooda

## Cuuryaankii La Bogsiiyey

**9** Markaas ayuu
uu dooni fuulay oo
U tallaabay dhanka kale
oo yimid magaaladiis
2Waxa ay u keeneen
nin ahaa cuuryaan
Oo sariir ku jiifoo
Ciise ayaa arkay
Immaanka kooda
oo ku yiri cuuryaanki
Kalsoonow, inankow
dembi wixii aad lahayd
Cafi ayay kaa yihiin
3Qaar ka mid ah culimadi
Ayaa isku yiri
ninkan u gefaaye Eebbe
Eega wuu dembaabaye
4Ciise ayaa ku yiri
Intuu gartay fikirkoodi
maxaa aad qalbigiinna
Sharta ugu fikirtaan?
5Iyamaa howl yar
In la yiraahdo
wixii aad lahayd dembi
Cafi ayay kaa yihiin
ama in la yiraahdo
Kac oo soco idigu?
6Si aad u garataan

Wiilka Aadanuhu in
uu dhulka ku leeyahay
Amar uu dembiyada
uu ku cafiyo isagu
Markaas ayuu Ciise
uu ku yiri cuuryaankii
Kac oo qaado sariirtaada
oo tag gurigaaga
7 Markaas ayuu kacay
oo tegay gurigiisi
8 Dadkii aadka u badnaa
markii ay arkeen
Waa ay baqeenoo
oo Eebbe ammaaneen
Amarkan oo kale
Eebbaa siiyey dadka

## U Yeeriddii Matayos

9 Markii uu Ciise
uu tegay halkaas
Intuu uu socday
Ayuu wuxuu arkay
Matayos nin uu
magaciisu uu ahaa
Oo fadhiya Meesha
ururinta canshuurta
Oo wuxuu ku yiri
i soo raac aniga
Markaas ayuu kacay
oo raacay isaga
10 Intii uu Ciise
aqalkii Matayos
Uu ka cashaynayay
canshuur ururiyayaal

Iyo dembiilayaal badan
ayaa u yimaadeen
Oona la fadhiisteen
Ciise iyo xertiisa
[11]Markey arkeen Farrisiintii
Ayay ku yiraahdeen
Isaga xertiisii
macallinkiinnu maxaa uu
Canshuurqaadayaal iyo
ula cunaa dembiilayaal?
[12]Markii uu maqlay
ayuu ku yiri
Uma baahna dhakhtar
kuwa iska ladan e
Kuwa buka ayaase
u baahan dhakhtar
[13]Balse taga oo barta
macnaha erayadan
Waxa aan doonayo
waa uun naxariise
Ma ahan alla bari
waayo uma aan iman
In aan u yeero
kuwa xaqa ahee ladan
Balse waxaan u imid
in dembiilayaasha
Aan u yeero iyaga

## Su'aal Soonka Ku Saabsan

[14]Waxaa u yimid
xertii Yaxye oo leh
Innaga iyo Farrisiintu
maxaan u soonnaa
Xertaaduse u soomin?

15 Ciisaa ugu jawaabay
Dadka jooga arooska
oo miyey baroortaan
Arooskoo la jooga?
Laakiin waxaa iman
Maalin arooska
laga qaadayo iyaga
Ayna soomi doonaan
16 Karriin cusayb ah
Qofna kuma uu tolo
dhar duug ahee
Illeyn karniinkii
ayaa soo go'ayee
Oo jeexdintii
ayaa sii xumaatee
17 Haddii uu khamri
sidiisaba uu cusub yahay
Laguma uun shubo
qarbeddo duug ah
Qarbeddada iyada ah
ayaa qarxaysoo
Khamrigii ayaa daadan
qarbeddada iyaduna
Waa ay hallowdaa
khamri haddii uu
Uu cusub yahay
waxaa lagu shubaa uun
Qarbeddo cusayb ah
oo labaduna
Waa ay raagayaan

## Dhimasho Iyo Dhiigbax

18 Intii uu Ciise
hadlayay ayaa
Waxaa u yimid

nin taliye ah
Oo u jilba joogsaday
kuna yiri isaga
Gabadhaydi ayaa
dhimatay iminka
Gacantaada uun saar
waa ay noolaane
[19]Markaas ayuu Ciise
raacay isagii
Isagiyo xeriisii
[20]Markaas ayaa
Laba iyo toban sano
islaan dhiigbax
Uu hayay iyada
ayaa timid dhabarkiis
Oo darafta maradiisa
ayay taabatoo
[21]Oo waxay isku tiri
haddaan iska taabto
Isaga maradiisa
waa aan bogsan uun
[22]Ciise ayaa u jeestay
oo arkay iyadii
Oona ku yri
Kalsoonow inan yahay
Imaankaaga adiga
ayaa ku bogsiiyee
Oo saacadaas ayay
bogsatay islaantii
[23]Ciisena markii uu
galay gudaha aqalkii
Uu lahaa taliyuhu
ayuu wuxuu arkay
In la yeerinaayo
biibiilayaal uun
Ay buuqayaan dadna

24 waxaa uuna ku yiri
Iska eega inantu
ma aanay dhimanine
Waa ay uun hurdaysaa
waa ayna ku qosleen
25 Markii uun la saaray
dadkii aadka u badnaa
Intuu galay gudihii
ayuu qabtay gacanteed
Inantiina toostay
26 Arrintan warkeeduna
Gobolka oo dhan
ayuu ku faafay

## Indhoolayaashii La Bogsiiyey

27 Intii uu meeshaas
ka tegayay ayaa
Waxaa uun daba galay
laba nin oo indha la'
Iyagoo ku qaylin
ina Daa'uudoow
Innoo naxriiso
28 Markuu galay aqalkii
Yey indhoolayaashii
isaga u yimaadeen
Ciise ayaa ku yiri
inaan arrintiinna
Idiin yeeli karayo
ma aad rumaysan tihiin?
Haa ayay yiraahdeen
Sayidow waa aan
Rumaysannahay arrintan
29 Indhahooda yuuna
Taabtay isagoo leh

imaankiinnu siduu yahay
Ha idiin ahaato
30 Markaas ayay iyagii
Indhahoodi furmeen
Ciise aad buu ugu digay
Isaga oo ku leh
iska jira arrintan
Cidi yey ogaanin
31 Iyagii baxeenoo
Warkiisa oo idil
gobolkaas oo dhan
Ayay ku fidiyeen

## Ninkii Carrabka La'aa

32 Kolkii ay baxeen
ayaa loo keenay
Nin isagu carrab la'
oo haddana jinni qaba
33 Oo kolkii jinnigii
laga saaray isaga
Waa uu hadlayba
dadkii aadka u badnaa
Waa ay yaabeen
oo waxay yiraahdeen
Arrintan oo kale
weligeed Israa'iil
Laguma arag uun
34 Farrisiinti ayaa
Waxaa ay yiraahdeen
waxa uu jinniyada
Ku eryaa waa uun
amiirka jinniyada
35 Magaalooyin iyo
tuulooyin ayuu

Uu Ciise kolkaa
uu ku soo wareegoo
Sunagogyada ayuu
uu wax ku baraayoo
Injiilka boqortooyada
ayuu ku wacdiyoo
Oo bugto iyo cudur
walba ayuu bogsiiyey

## Naxariistii Sayidka

36 Markii uu arkay
dadkii aadka u badnaa
Waa u naxriistoo
waayo iyaga
Dhib ayaa haystay
ma ay hayasan gargaar
Sida ido oo kale
aan lahayn ari jir
37 Xertiisii ayuuna
ku yiri iyagii
Waxa beerta iyada
laga gooyni ayaa
Aad u badan iyaga
shaqaalaha ayaase
Aad u tiro yar
38 Waa in Sayidka beergoyska
Aad iyo aad u barisaan
in uu shaqaale
U soo diro beertiisa

## Laba Iyo Tobankii Rasuul Ee Sayid Ciise

10 Ciise ayaa u yeeray
laba iyo tobankii
Ahayd xertiisa

wuxuu siiyey amar
Ay jinniyo shar badan
ay ku saari karayaan
Ayna bugto walba
iyo cudur kasta
Ay ku bogsiin karayaan
2Laba iyo tobankii
Rasuulada ahaa
magacyadoodu wuxuu ahaa
Simoon, oo Butros la oran jiray
iyo walaalkiis
Andros, iyo Yacquub ina Sebedi
iyo walaalkiis
Yooxanaa, 3iyo Filibos
iyo Bartolomayos, iyo
Toomas, iyo Matayos
oo canshuurqaade ahaa
Iyo Yacquub ina Alfayos
iyo Tadayos, 4iyo
*Simoon reer Kaana iyo
Yuudas Iskariotkii
Gacan geliyey isaga

* *"Simoon reer Kaana" waa Simoon Qiroole*

## Howshii Rasuullada

5Ciise ayaa diray
laba iyo tobankii
Amray isagoo leh
ha u tegina haddaba
Kuwa aanan Yuhuud
aanan ahayn
Hana isku gelina
magaalo ay leeyihiin
Reer Samariya uun

[6]waxaa aadse u tagtaan
Idaha lunsan ee
ah qoyska Israa'iil
[7]Oo intaad socotaan
waa in aad wacdisaan
Oo waxaad tiraahdaan
boqortooyadii ahayd
[8]Tii jannada uun
waa ay dhaw dahay
Oo kuwa bukana
waa in aad bogsiisaan
Oo kuwa dhintayna
waa in aad noolaysaan
Oo kuwa leh baraskana
waa in aad nadiifisaan
Oo kuwa qaba jinniga
waa in aad ka saartaan
Hadiyad ahaan ayaad
ku hesheen idinkuye
Hadiyad ahaana
waa in aad u siisaan
[9]Dahab ama lacag
ama naxaas iyo
Waa in aad ku qaadanin
kiishashkiina idinka
[10]Qandina waa in
aanad qaadanin
Ama laba qamiis
kabo iyo ulba
Illeyn shaqaaluhu
waa istaahillaa cunto
[11]Magaalo kale iyo
tuuladii ay noqotaba
Tii aad gashaanba
waa in aad ka doontaan
Mid isagu istaahila

oo jooga halkaas
Illaa aad ka tegaysaan
[12]Hadba goortii aad
Guri aad gelaysaan
waa in aad salaantaan
[13]Oo hadduu gurigu
uu istaahilo waa
In nabaddiinnu
ay ku soo degtaa
Haddii uusan istaahilin
nabaddiinnu waa
In ay idinka
idinku soo noqotaa
[14]Oo ku alle kii aan
idin soo dhawaynin
Oon maqlin hadaladiin
goortii aad gurigaas
Ama magaaladaas
aad isaga baxaysaan
Waa in cagihiinna
aad ka dhabaandhabtaan
Wixii siiga ah
[15]Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
maalinta xisaabta ah
Sodom iyo Gomora
ayaa iyagaba
Xisaab ahaan runtii
aad uga fududaan uun

## Silica

[16]Waxaan idiin dirayaa
sida ido oo kale
Oo yeey ku dhex jira

sidaa aawadeed
Aqli u lahaada
abeesooyin oo kale
Una sir la'aada
qoolleeyo oo kale
17 Dadka iska jira
Shirar ayay idinka
Idiin dhiibi doonaan
oo sunagogyada
Yey idinku karbaashi
18 Aawaday ayaana
La idin hor geeyni
madax iyo boqorro
Inay ku noqoto marag
iyaga iyo weliba
Kuwa aan ahayn Yuhuud
19 Goortii ay idinka
Idin gacan geliyaan
ha ka uun welwelina
Waxaad oran lahaydeen
ama sidii aad
U oran lahaydeenba
saacaddaas ayaa
La idin siiniba
waxaad oran lahaydeen
20 Waayo maahan idinka
kuwa oran hadalkee
Waase Ruuxa Aabbihiin
kan idinka dhexdiinna
Oranaya hadalada
21 Walaal ayaa walaalkiis
Ayaa uun gacan gelin
si loo dilo isaga
Aabbana wiilkiisa
caruur ayaa waalidkood

Isku taagi doonoo
dhimashana u raadin
22 Dadka oo dhan iyagu
magacayga aawadiis
Ayay idiin necbaane
kan adkaysta laakiin
Illaa ugu dambaysta
ayaa badbaadi doona
23 Magaalo markii ay
idinku silciyaan
Tan kale u carara
waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
magaalooyinka Israa'iil
Ma aad wada gaaraysaan
illaa Wiilka Aadanuhu
Uu ka yimaado isaguye
24 Qof xer ahu sidiisaba
Kama uu sarreeyo
isaga macallinkiisee
Addoonkuna sayidkiisa
kama uu sarreeyee
25 Waa ay ku filan tahay
Macallinkiisa oo kale
In uu noqdo xerkuye
addoonkuna sida
Sayidkiisa oo kale
hadday odayga reekii
Ayba ugu yeereen
Be'elsebul inuu yahay
Intee in ka badan
ayay ugu yeeri
Kuwa jooga aqalkiisa!

# Ha Baqina!

[26]Waa in aanad baqina
wax daboolaan ayaan
Innaba jiraynoo
oon soo muuqan doonin
Wax qarsoon ayaan jirin
oon la garan doonin
[27]Wixii aan guducurka
idinkugu sheego
Iftiinka ku dhaha
oo waxaad dhegta
Ka maqashaan idinku
aqalada dushooda
Kaga dhawaaqa uun
[28]Waa inaanad ka baqan
Kuwa jirka uun dila
aanse karaynin
In ay dilaan nafta
waase in aad ka baqdaan
Kan awooda inuu
uu ku tuuro jahannamo
Nafta iyo jirkaba
[29]Taano miyaan lagu iibin
Shimbiro labo ah
Middoodna iyadu
Dhulka kuma ay dhacdo
amarka Aabbihiin
Haddii aanay ahayn
[30]Timaha oo dhan
Oo ku yaalla madaxiinna
waa ay tirsan yihiin
[31]Haddaba waa in
idinku aanad baqina
Waayo idinku waad
aad ka qiima badan tihiin

Shimbiro tiro ahaan
iyo aad u badan
32Sidaa aawadeed
midwalba oo aniga
Igu qirta isagu
dadka uun hortiisa
Anna waa aan ku qiran
Aabbaha jannada
Ku jira uun hortiisa
33Ku alla iyo kii
Igu dafira aniga
dadka uun hortiisa
Anna waan ku dafiri
Aabbahayga jannada
Ku jira uun hortiisa

## Natiijada Addeecidda Sayidka

34Ha u malaynina
in aan u imid
Si aan nabad uun
aan dhulka u keeno
Uma anaanan iman
in aan nabad keeno e
Waxa anse u imid
in aan keeno seefe
35Waxaa aan u imid
Inaan iska horkeeno
nin iyo aabbihiis
Gabar iyo hooyadeed
naag iyo sodohdeed
36Qof uun cadowgiisu
waxaa uu noqon
Dadka jooga aqalkiisa
37Kan aniga iga jecel

aabbihiisya hooyadis
Ima uu istaahilo
oo kan iga jecel
Wiilkiisa iyo
isaga hooyadiis
Ima uu istaahilo
[38]Iskutallaabtiisa
Kii aan soo qaadan
oo aan isoo raacin
Ima uu istaahilo
[39]Kii uun helaa naftiisa
Isagaa lumin doona
oo kii naftiisa
U lumiya aawaday
waa uu heli doonaa
[40]Kan idin aqbalaa
aniguu i aqbalaa
kan i aqbalaana
waxaa uu aqbalaa
Kii ani isoo diray
[41]Kan nebi ku aqbalaa
Nebi uun magaciis
nebi abaalkiis
Ayuu heli doonaa
kan qof xaq ah
Ku aqbala isaga
qof xaq ah magaciis
Waxaa uu helaa
qof xaq ah abaalkiis
[42]Ku alla kii
kuwan yaryarka ah
Koob biyo qabow ah
oo keliya iyaga
Qof uun xer ah
oo ku siiya magaciis
Waxaan idinku leeyahay

oo runtiina iga ah
Isaga abaalkiis
kama uu lumaayo
11 Goortii uu Ciise
u dhammeeyay amarkii
Laba iyo tobankii
ahaa xertiisa
Ayuu horay
u sii socdaaloo
Magaalooyin uu tegay
si uu iyaga
Wax uu u baro
una uu wacdiyo

## Nebi Yaxye

[2]Nebi Yaxye kolki uu
uu ku maqlay xabsiga
Shuqulladii uu
uu Masiixi falayay
Ayuu xertisii
u soo diray isaga
[3]Si ay u weyddiiyaan
Ma tahay adigu
Kii imanayay
mise mid kale
Ayaannu sugnaa?
[4]Markaas ayuu
U jawaabay Ciise
oo uuna ku yiri
Taga oo nebi Yaxye
uga warrama isaga
Waxaad aragtaan
iyo waxaad maqashaan
[5]Kuwii indhaha la'aa

waxbay arkaan
Kuwii aan lahayn lugo
waa ay soconayaan
Baraskana intii qabtay
waa nadiif iyaguna
Kuwii aan lahayn dhego
waa ay maqlaayaan
Intii geeriyootayna
waa ay soo noolaadeen
Injiilkana masaakiinta
ayaa lagu wacdiyaa
6 Oo waxaa barakaysan
midka aan aniga
Igu taraanturroon
7 Markii ay tageen
Ayuu billaabay Ciise
in dadkii badnaa
Uu nebi Yaxye
uu wax uga sheego
Oo wuxuu yiri
Maxaa aad cidlada
Aad ugu baxdeen?
Ma waxay ahayd
In aad soo argtaan
caws-duur ay
Dabayshu ay ruxayso?
8 Haddii aanay
Sidaa ahayn
maxaad u baxdeen?
Ma waxay ahayd uun
in aad soo aragtaan
Nin isagu xiran
dhar aad u bilicsan?
Taasi waa uun maya
dhar aad u bilicsan
Inta xirataa iyadu

waxaa ay joogaan
Aqalada boqorrada
[9]Haddaba maxaa aad
U baxdeen idinku?
Ma waxaa ay ahayd
In aad nebi idinku
haddaba soo aragtaan?
Haa, ayaan idinku
leeyahay iyo weliba
[10]Mid nebi ka weyn oo
Illeyn kani waa
Waxyi uun lagu yiri
Nebigayga Ayaan
hortaada aan diri
Si uu jidka adiga
uu kuugu diyaariyo
[11]Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Intii dumar ka dhalatay
nebi Yaxye isaga
Mid ka weyn innaba
kama aanu dhex kicin
Laakiin isaga
boqortooyadii ahayd
Tii jannada ayaa
kan ugu sii yar
Yaa ka weyn isaga
[12]Tan iyo Yaxye
Kan baabtisaha ah
boqortooyo jannada ah
Waala xoogay iyada
waana ayba qaateen
[13]Sharciga iyo Nebiyadu
illaa Yaxye ayay
Wax uun sii sheegeen
[14]Haddii aad doontaan

In aad tan aqbashaan
kanu waa Ilyaas
Kii iman lahaaye
15 Kii uun dhego lahow
Waa in aad maqashaa
16 Facan bal maxaa aan
Ku metalaa isaga?
Waa sida carruur uun
Suuqyada fadhiya oo
kuwo kale u yeeran
17 Iyaga oo oranaya
biibiile ayaan
Idiin yeerinnayoo
mana aad ciyaarina
Waana aan baroorannay
mana aad ilmaynina
18 Illeyn Yaxyaa yimid
waxba aan cunaynine
Oo weliba cabbahayn
waxaa ayna yiraahdeen
Jinni ayuu qabaaye
19 Wiilka Aadanuhu yimid
Isagoo cunaaya
oo cabbaaye weliba
Oo waxay yiraahdeen
waa nin cir weyn oo
Waxaa uu cabbaa khamri
saaxiibna la ah
Canshuurqaadayaasha iyo
dembiile oo idil
Inay xaq tahay xigmaddu
shuqulkeeda ayaa
Sidaas u caddeeyee

## Magaalooynkii La Habaaray

[20]Waxaa uu billaabay
in magaalooyinkii
Uuba canaanto
kuwaas uu ka fuliyay
Mucjisooyinki uu dhigay
kuwii ugu badnaa
Ma toobad keenin iyaguye
[21]Waa uun kuu hoog
Khorasinay adiga
waa uun kuu hoog
Beytsayday adiga
waayo haddii uun
Mucjisooyinkii aan
aan ku sameeyey dhexdiinna
Turos iyo Siidoon
lagu samayn lahaa uun
Mar hore ayay
iyagoo toobad keenay
Joonyado ayay weli
ayba xiran lahaayeen
Iyagoo weliba
dambasna uun ku fadhiya
[22]Laakiinse anigu
waxaan idinku leeyahay
Maalinta xisaabta uun
Turos iyo Siidoon
Ayaa xisaabtood
idinka sahlanaan
[23]Adna Kafarna'umay
ma adaa laguu sarraysiin
Xagga iyo samada?
Haadees* ayaad uun
Ku degi adiguye
waayo haddi uun

Mucjisooyinkii aan
aan ka fuliyay dhexdaada
Lagu samayn lahaa uun
Sodom uun dhexdeeda
Maantadan ayay
weli ay joogi lahayd
[24]Laakiinse anigu
waxaan idinku leeyahay
Maalinta xisaabta uun
dalka Sodom ah ayaa
Kaa xisaab uun fududaan

* *"Haadees" waa meeshii kuwii dhintay*

## Maanka Caruurta Oo Kale

[25]Ciisaa u jawaaboo
oo yiri hadalkan
Aabbow, Rabbiga
samada iyo dhulkow
anaa kuu mahadnaqi
wayo waxaa aad
Waxyaalahan oo idil
aad ka qarisay aqli iyo
Kuwa garasho uun leh
waadna aad u muusijay
Ilmaha yaryar
[26]Haa, Aabbow adiga
Sidaas ayaa adiga
kuu farxad ahe

## Shuqulka Sayidka

[27]Aabbahay wax walba
waaba ii dhiibay
Cidna Wiilka ma ay garan

Aabbaha mooyee
Cidna Aabbaha ma ay garan
Wiilka uun mooyee
Iyo Wiilku kii uu dooni
in uu u muujiyo
28Ii kaalaya kulligiin
kuwa uun hawshaysane
Oo culaabaysanow
anigaa idin nasine
29Harqoodkayga uun qaata
oo dushiina u rita
Waxna iga barta
illeyn waan qaboobahay
Qalbigayga isaguna
waa idiin nugul yahay
Oo naftiinna nasasho
u heli doontaan
30Harqoodkayga isagu
waa uun dhibyaryahee
Oo rarkayga isagu
waaba uu fudud yahay
**12** Wakhtigaa isaga ah
Sabti ayay ahaydoo
Ciisena isagu
waxaa uu dhax marayay
Beeraha dhexdooda oo
gaajo ayaana heysay
Isaga xertiisee
waxaa ay billaabeen
In ay jartaan sabuulkii
oo ay cunaanna
2Farrisiintii markii ay
arkeen iyagii
Isagay ku yiraahdeen
Eeg xertaada adigu
Waxa ay samaynayaan

xalaal wax aan ahayne
Sabti in la sameeyee
3Wuxuu ku yiri isagii
Ma akhrina miyaa weli
Daa'uud wixii uu
Uu sameeyay isagu
marki ay gaajoodeen
Isagiyo kuwii
ay wada jireenba?
4Waa isagii galay
gurigii Eebboo
Oo cunay kibistii
tii tusniinta ahayd
Xalaalna uma ahayn
in ay cunaanba
Isaga iyo intii
ay wada jireenba
Wadaaddada uun bay
xalaal u ahayde
5Miyaadna ka akhriyin
sharcigaaba orane
In wadaaddadii
macbudka uun ku jira Sabti
Ay Sabtida ka dhigaan
mid aan qudduus ahaynoo
Ayna eed la'yihiin?
6Waxaan idinku leeyahay
Waxaa idinla jooga
iminkadan waa mid
Ka sarreeya macbudka oo
7Haddaad aqoon lahaydeen
Macnaha erayadan
waxa aan doonayo
Waaba uun naxariis
ee ma ahan allabari
Kuwa aan lahayn eed

maba aad xukunteen
8Waayo Wiilka Adanaha
Sabtiguu u yahay Sayid

## Ninkii Gacanta La'aa Oo La Bogsiiyey

9Markii Ciise uu
halkaas isaga tegay
Sunagoggoogyadood ayuu
ugu galay gudahoo
10Nin gacan engegan baa
ayaa joogay halkaas
Ciise ayay weyddiiyeen
oo ku yiraahdeen
Ma xalaal baa in Sabtida
in wax la bogsiiyaa?
Waxay saas u yiraahdeen
in ay ashtakeeyaan
11Ciise ayaa ku yiri
ninkeennee idinka mida
Oo iska leh lax
haddii ay ku dhacdo god
Iyadoo Sabti ay tahay
aan ka soo bixiyeen?
12Oo haddaba ninku
imisa ayuu lax
Uu ka qiima badan yahay!
13Markaas ayuu ninki
uu ku yiri isagii
Gacantaada taag uun
isna uba soo taag
Waana u bogsatay
sida gacantii kale uun
14Farrisiinti ayaa baxay
iyagoo ka wada hadli
In ay Ciise dilaan

## Midiidinkii La Doortay

[15]Ciise waa ogaadoo
halkii isaga tag
Waxaa uuna raacay
dad aad u tira badan
Iyagana dhammaantood
ayuu wada bogsiiyey
[16]Isagoo ku amray
in ay cidna u sheegin
[17]Si loo oofiyo
nebi Ishacyaah wixii
Loo soo waxyooday
isaga oo leh:
[18]Eeg midiidinkaygii
aan doortay isaga
Midka aan jeclahay
oon ku faraxsanahay
Ruuxayga Ayaan
aan dul saari doonaa
Ummadaha ayuuna
uu caddaalad fari oo
[19]Mana uu illaaqtami
qaylana iskaba daa
Jidadkaa cid uun mari
aan maqlayn codkiisoo
[20]Oo isagu caws duur
hoolan ooba taag daran
Isagaaban jebinayn
Oo liifad qiiqdana
Marna aanba deminayn
illaa uu caddaaladda
Guul uba hooyo
[21]ummadahoo idilna
Magaciisa ayay
rajadooda gelin oo

## Ciise Iyo Be'elsebul

22 Isagaa markaana
waxaa ay u keeneen
Jinnoole indhaha la'
carrab aan lahayna
Waana uu bogsiiyey
carrab laawihii oo
Waana uu hadlayoo
waxna arag isagii
23 Dadkii badnaa ayaa
wada yaabay idilkood
Waxa ay yiraahdeen
kan miyaanu ahayn
Ina Daa'uud isagu?
24 Farrisiintu markii ay
Taas ay maqleenba
waxa ay yiraahdeen
Ninkan isagu jinniyada
wax kaleeto isagu
Kuma uuba saaree
waxaa uu ku saaraa
Be'elsebulki ahayd
madaxa ay leeyihiin
Dhammaan jinniyadu
25 Isagoo laakiin
Fikirkooda uun garan
ayuu ku yiri
Boqortooya kasta oo
kala qaybsantaa uun
Cidla ayay noqotaa
magaalo iyo gurigii
Kala qaysamaa uun
iyagaaban taagnaan
26 Haddii uuba Shaydaan
uu saaro Shaydaan

Iyagaaba qaysami
sidee ayay haddaba
U taagnaan karaysaa
boqortooyo uu lahaa?
27 Haddii aanba anigu
aan Be'elsebul iyo
Aan ku saari jinniyada
wiilashiinnu maxaa ay
Ku saaraan iyagu bal?
Haddaba iyagu
Waxaa ay ahaan uun
idinka xaakinnadiinna
28 Jinniyada haddii aan
balse aan ku saaro
Ruuxa Eebbe keligii
Boqortooyadii Alle
Ayaa idiin timid
29 Ama qof sidee buu
Axad xoog leh gurigiis
u geli karaayaa
Alaabtiisanuu dhici
haddii uusan kolka hore
Axadka xoogga leh
uusan uu xirxirin?
Markaas ayuuna
gurigiisa dhici uun
30 Kan aanba ila jirin
isagu waaba iga gees
Kan aan ila ururin
waa iga firdhinayaa
31 Haddaba anigu
waxaan idinku leeyahay
Dembi iyo caay walba
dadka ayaa loo cafin
Ruuxa Qudduuska ah
caydii ka gees ah

Aayaan la cafinayn
32 Ku Alla iyo kii
Ku hadlaa eray uun
Wiilka Aadanaha
Ka gees ah isaga
isagaaba loo cafin
Balse kii ku hadla uun
eray uun ka gees ah
Ruuxa Qudduuska ah
isagaanba loo cafin
Wakhtigan isaga ah
iyo kan imanayaba
33 Ama geedka wanaajiya
iyo mirihiisaba
Ama geedka xumeeya
iyo mirihiisaba
Illeyn geedka isaga
mirihiisa ayuunbaa
Lagu garan isaga e
34 Sidee ayaad dhal jilbisey
Wanaag ugu hadlaysaan
idinkoo shar leh?
Afku wuxuu ku hadlaa
wixii qalbiga ku badan uun
Axadkii wanaagsani
waxaa uu ka soo saari
35 Maalkiisa ah wanaaga
wax wanaagsan uun
Axadkii shar ahise
waxaa uu ka soo saari
Maalkiisa ah sharka
wax shar ah uun e
36 Waxaan idinku leeyahay
Eraygii aan waxtarahayn
Dadku uu ku hadlaba
maalinta xisaabta ah

Xisaab ayay ka bixin uun
[37]Waayo eraygaaga uun
Ayaa laguugu ammaani
ama laguugu eedayn

## Sayidka Oo Diiday Mucjisooyinkii La Weyddiistay

[38]Markaas ayaa culimmadi
iyo Farrisiintii
Qaar ka mid ah iyaga
u jawaabeen Ciise
Kuna ay yiraahdeen
Waxaa aannu dooni
In macallimow aad
inna tustaa mucjisad
[39]Isna u jawaabyoo
waxaa uu ku yiri
Fac shar iyo sinno badan
ayaa doona mucjisad
Mucjisadna lama uun
siinayo iyaga
Nebi Yoonis tii uun
isaga la siiyey mooyee
[40]Sida Yoonis oo kale
seddax maalmood iyo weli
Seddaxdood habeen ayaa
ayuu calooshii
Nibiriga uu ku jiray
sidaas oo kalena
Wiilka Aadanaha
seddax maalmood iyo
Seddaxdood habeen ayuu
caloosha dhulka ah
Uu ku jiri doonaa

41Dadka reer Nineweh ah
Xisaabta ayay isla taagi
dadka facan uune
Iyagaana xukumi uun
illeyn wacdigii Yoonis
Ayay ku toobad keeneen
oo bal eegga iminka
Yoonis mid ka weyn ayaa
halkan idinla joogee
42Boqoraddi uun
koonfurta ka timid ayaa
Ayaa la kici dadka
farcankan isaga ah
Waana ay xukumi uun
illeyn waxay ka timid
Dhulka meesha ugu fog
si ay Sulaymaan
Xigmaddiisi u maqasho
oo bal eega iminka
Mid uun Sulaymaan
ka weyn isaga
Ayaa halkan
idinla jooga idinkee

## Jinnigu Waa Ku Noqday Qofkii Uu Ka Baxay

43Jinniga wasakhda ah
goorta uu ka baxo qof
Meelo aan biyo lahayn
ayuu soo maraayoo
Nasashuu rabaa illeyn
mana uu helaayee
44Markaas ayuu yiraahdaa
Waan u noqon anigu

Gurigii aan ka baxay
marka uu yimaadana
Waxaa u helaayaa
gurigi oo maran
Isagoo la xaaqay
oona hagaagsan
[45]Markaas ayuu galaayoo
waxa uu wataana
Jinniyo toddoba ah
oo ka xun isaga
Waana ay galaanoo
ay degaan halkaase
Wakhtiga dambe ayaa
qofkaa uga darnaada
Wakhtigii hore ahaa
sidaas ayayna u noqon
Farcankan sharka ah

## Walaaltinimada Dhabta Ah

[46]Intuu weli la hadlayay
dadki aadka u badnaa
Bal isaga hooyaddiis
iyo walaalihiis
Ayaa dibadda taagnaa
waxa ayna dooneen
In ay la hadlaane
[47]Mid ayaana ku yiri
Bal eeg hooyadaa
iyo walaalahaa
Ayaa taagan dibaddee
waxa ayna dooni
Inay kula hadlaane
[48]Isna waa u jawaabay
Oo uu ku yiri

Yaa hooyaday ah
Iyo walaalahayba?
49 Gacantiisa ayuuna
Uu ku tilmaamay
isaga xertiisee
Oo uuna yiri
Aniga hooyadey
Iyo walaalahay
waa uun kuwanee!
50 Waayo ku alla
iyo kii yeela
Doonista Aabbahay
oo ku jira jannada
Kaas ayaa ii ah
aniga walaalkay
Iyo walaashey
hooyana ii ah

## Sarbeeb Ku Saabsan Beerreyga

13 Ciise ayaa maalintaas
gurigii ka baxay oo
Waxaa uuna fadhiyay
badda agteedee
2 Dad aad u badan
ayaa u soo ururayoo
Taas ayaana keentay
in uu dooni fuuloo
Uuna fadhiisto
dadkii aadka u badnaa
Waxa ay taagnaayeen
xeebta agteeda
3 Arrimo fara badan
sarbeeb ugu sheegay
Isaga oo leh

Beerrey ayaa baxay
In uu wax beerro
4 oo intuu beeraayay
Qaar ayaa mirihii
jidka agtiisa
Ayay ku dhaceen
shimbiro ayaa yimid
Waana ay cuneene
5 dhul dhagax ahna
Miro kale ayaa
ku dhacay isaganoo
Carro aad u badan
maba uu lahayne
Durba waa ay soo baxeen
illeyn carradu
Hoos umaba dheerayn
6 markii ay qoraxdii
Soo baxday iyadu
waaba ay gubteene
Waana ay engegeen
illeyn ma lahayn xidid
7 Miro kale ayaa
waxa ay ku dhaceen
Qodxan uun dhaxdood
qodxantii ayaa
Inta soo baxday
ceejisay abuurkii
8 Miro kale ayaa
ku dhacay iyagu
Dhul aad u wanaagsan
miro ayay dhaleenna
Mid boqol ayuu dhalay
mid lixdan ayuu dhalay
Mid soddon ayuu dhalay
9 I maqal kii dhega lahow

## Sababta Sarbeebta Loo Isticmaalo

[10]Xertiisii ayaa timid
oo waxay weyddiiyeen
Sababta uu Ciise
ugu hadlo sarbeebta
[11]Waana u jawaabay
oo ku yiri iyagii
Idinkaa laydin siin
si aad u garataan
Waxii uun qarsoon
oo boqortooyada
Tan jannada ahi
ay iska leedahay
Iyagase lama siin
[12] Waayo ku alliyo kii
Isagu wax haystaa
wax ayaa la siinoo
Waana uun loo badin
kii aan wax haysanse
Waa uun laga qaadi
waxa uu haystee
[13]Taasi ayaa ah sababta
aan u sarbeebee
Marka aan la hadlayee
waayo ma arkaan
Marka ay arkaayaan
mana ay maqlaayaan
Marka ay maqlaayaan
mana ay gartaane
[14]Iyagay u noqotay
waxyigii Ishacyaah
Isaga oo leh
Maqal ayaad ku maqli
idinkoonan garanayn
Idinkoo arkaayana

waxbaad arki doontaan
Idinkoonan garanayn
[15]Waayo dadku iyagu
Qalbigooda ayaa
ah mid adkaaday
Waana adag tahay
in ay wax maqlaane
Indhahoodi ayay
iskuna qabteene
Si aanay u arag
oo aanay u maqlin
Oo aanay u garan
si aanay u soo noqon
Oo aanan u bogsiin
[16]Laakiin idinka
indhihiinna ayaa
Kuwo barakaysan ah
illeyn iyagu
Wax ayay arkaane
iyo dhegihiinna
Wayo iyagu
wax ayay maqlaane
[17]Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Dad xaq ah iyo
nebiyo aad u badan
Waxaa ay dooneen
in ay arkaan
Waxa aad aragtaan
mana aanay arkin
Waxa ayna dooneen
in ay maqlaan
Waxa aad maqlaysaan
mana aanay maqlin

## Micnaynaynta Sarbeebta Beerreyga

[18]Haddaba maqla uun
sarbeebtii ahayd
Ninka beereyga ah
[19]Erayga boqortooyo
Qofkii maqlaa uun
oo aanan garanin
Waxaa u yimaada
kan sharka ahoo
Isagaa ka dhufta
abuurkii ku dhacay
Isaga qalbigiisa
kani waa abuurkii
Isagu ku dhacay
jidka agtiisee
[20]Abuurkii dhagaxa
lagu beeray isna
Waa kan erayga maqla
oo kolkiiba farxa
Oo sidaas ku qaata
[21]illeyn xidid malahoo
Wuxuu sii jiraa inyar
oo goortuu yimaad dhib
Ama silic uu dhaco
erayga aawadiis
Durba wayska inkiraa
[22]Abuurka lagu beeray
Meesha qodxaanta ah
waa kan erayga maqla
Dunida ayuu ka welwelaa
maal ayaa sasaban
Eraygana ceejiya
oo noqdaa miro la'aan
[23]Abuurkii ku dhacay
dhulki u wanaagsanaa

Waa kan maqla erayga
oo misna garta
Isagaa miro dhala
mid ayaa ah boqol
Midna ayaa ah lixdan
midna ayaa ah soddon

## Sarbeebta Ku Saabsan Gocondhada

24 Sarbeeb kale ayuu
Ciisena u sheegay
Waxaa uuna yiri
Boqortooyada Jannada ah
Ayaa loo ekaysiin
nin isaga beertiis
Abuur wacan ku beeray
25 cadowgiisi uu yimid
Dadki oo hurdaaya
gocondho iyadi ah
Ayuu kaga dhex beeray
Sarreenki ay lahaayeen
Waana uu isaga tegay
26 Markii uu sarreenkii
Uu soo baxay
mirana uu dhalay
Ayaa gocondhadii
soo muuqatay iyaduna
27 Odaygi reerka
waxaa u yimid
Adeegayaalkii
uu isagu lahaa
Oo ay ku yiraahden
Sayidow adigu
Ma abuur wanaagsan
ayaadna beerin

Kuna abuurin beerta?
Haddaba halkee ayay
Gocondhadan iyadu
bal innooga timid?
[28]Waxaa uu ku yiri
cadowgeenna ayaa
Sidan inna yeelay
Adeegayaashii
Ayaa ku yiri
Miyaad aad dooni
In aannu tagno
oo aannu siibno
Gocondhada oo dhan?
[29]Odaygi baa yiri
Mayee iska daaya
waaba intaas oo
Inta aad gocondhada
is leedihiin siisiiba
Aadba sarreenka
isna aad la rujisaan
[30]Labadooda iyagu
ha isla baxaano
Illaa beergoyska
oo wakhtiga beergoyska
Aayaan kuwa gooya
waxaan ku oran
Horta soo ururiya
gocondhada oo dhan
Oo xirmo xirmo
isugu soo xira
Si iyada loo gubo
sarreenkase isaga
Ku soo ururiya
maqsinka aan leeyahay

## Labadii Sarbeeb Ee Ku Saabsanaa Iniin Khardal Ah Iyo Khamiirka

[31]Sarbeeb kale ayuu
Ciisena u sheegay
Boqortooyada jannada ah
ayaa loo ekaysiin
Iniin khardal ah
tan uu nin qaaday
Uu ku beeray beertiisa
[32]Taas ayaana ugu yar
Iniinaha oo dhan
marka ayse weynaato
Iyadaa ugu weyn
dhirta beerta oo dhan
Waxaa ayna noqotaa
geed dhererkiisa
Laamaha uu leeyahay
ay shimbiraha cirku
Inta ay yimaadaan
ku degaan iyaga
[33]Sarbeeb kale ayuu
kula hadlay iyagii
Boqortooyada jannada ah
ayaa loo ekaysiin
Sida khamiir oo kale
kan ay naagi qaadday
Oo ay bur badan
ay ku dhex qooshtay
Illaa uu khamiiray
burkii oo dhan
[34]Waxan oo dhan
ayaa Ciise kula hadlay
Iyagoo sarbeeb ah
dadki aadka u badnaa
Waxbana kumuu oran

isagoon sarbeeban
[35]Si ay u noqoto
waxyigii Eebbe
Nebigiisa uu faray
isaga oo leh:
Sarbeebo Ayaan
afkayga ku furayaa
Wax iska qarsoonaa
aasaaskii dunida
Illaa iyo manta
ayaan ku hadlayaa

## Micnaynta Sarbeebtii Gocondhada

[36]Dadkii aadka u badnaa
yuu kolkaa isaga tegay
Gurigii ayuu galay
xertiisii ayow timid
Oo kuna yiraahdeen
Innoo macnee sarbeebtii
Gocondhadii iyada ahayd
ee ku taalay beerta
[37]Isna wuu jawaaboo
waxa uu ku yiri
Midka abuuray
abuurka wanaagsan
Waxaa weeye isagu
Wiilka Aadanaha
[38]Beertuna iyadu
waa uun dunida
Abuurka wanaagsani
waxaa uu yahay
Ilmaha boqortooyada
gocondhada iyaduna

Waa ilamaha sharrowga
39 Cadowga abuurayna
Waa Ibliiska isaga ah
beergoyska isaguna
Waa adduunku markuu
uu dhammaadka gaaro
Waa malaa'igta uun
kuwa gooya iyaguna
40 Gocondhada oo kale
sidii loo ururiyey
Dabka inta la saaray
loo gubay iyada
Sidaas ayay noqon
marka uu dhammaado
Aduunkan isaga ah
41 Wiilka Aadanahuna
Isagaaba soo diri
malaa'igta uu leeyahay
Oo ka soo ururin
boqortooyadiisa uun
Dembi wixii u keena
iyo inta sharka leh
42 Waxaa ay ku tuuri
dabka aadka u kulul
Ilka jiriqsiyo baroor
ayaana halkaa jiri
43 Kuwa xaqa ahina
waxa ay ka nuuri
Boqortooyadii ahayd
tan Aabbahoode
Sida cadceedda oo kale
kii dhega lahow maqal

## Sarbeebyadii Maalkii Qarsoonaa, Luulka, Iyo Shabagga

44 Boqortooyadii ahayd
tii jannada ayaa
Waxaa loo ekaysiin
meel beer ah maal
Isaga qarsoonaa
oo qofkii helaa qarsaday
Farxad ayuu la baxayna
wixii uu lahaana
Dhammaan wada iibiyey
oo beertaasna iibsaday
45 Boqortooyadii ahayd
tii jannada ayaa
Waxaa loo ekaysiin
ganacsade oo kale
Luul wanaagsan uun raba
oo doondooni isaga
46 Markii uu helayna
luul aad u qaali ah
Ayuu iska baxayna
waxii uu lahaana
Dhammaan wada iibiyey
luulkiina iibsaday
47 Boqortooyadii ahayd
tii jannada ayaa
Waxaa loo ekaysiin
shabag inta la dhigay badda
Kalluun aad u kala duwan
aad u soo qabtayoo
48 Markii uu buuxsamay
kalluumaysatadi ayaa
Dibadda u soo saaray
wayna u fadhiisteen
Intii wanaagsanayd

weel ayay ku ururiyeen
Intii xumaydna
waa iska tuureen
49Sidaas ayay noqon
adduunka dhammaadkiisa
Malaa'igaha ayaa
soo bixi iyagu
Oo kuwa sharka leh
ayay ka sooci
Kuwa xaqa ah
50Iyagoo ku tuuri
Dabka aadka u kulul
Ilka jiriqsiyo baroor
Ayaana halkaa jiri
51Waxyaalahan oo dhan
Miyaad aad garateen?
Waxa ay dheheen, Haah
52Markaas ayuu yiri
mid kastoo ah culimmada
Oo xer looga dhigay
boqortooyadii ahayd
Tii jannada uune
waxaa uu eg yahay
Sida odaygi reerka
maalkiisa isagu
Ka soo saara uun
wax cusayb ah iyo
Wax duug ah intaba

## Sayidka Oo Laga Celiyey Naasared

53Markii uu sarbeebtan
uu dhammeeyay Ciise
Halkaas ayuu ka tegay
54Magaaladiisi ayuu yimid

Sunagoggooda ayuu
waxna uu ku baray
Waana ayla yaabeen
waxa ay yiraahdeen
Ninkani xaggee ayuu
xigmadda uu ka helay
Iyo mucjisooyinka
awoodda weyn leh?
55 Kanu miyaanu ahan
inankii nijaarka?
Oo miyaanan Maryan
hooyadii la oran?
Yacquub iyo Yoosee
Simoon iyo Yuudas
Walaalihiis ahayn?
56 Gabdhihii ahaana
Isaga walaalihi
miyaanay idilkood
Innala joogin iyagu?
Haddaba xaggee ayuu
Waxyaalahan oo dhan
uu ka helay isagu?
57 Waana ay ka xumaadeen
Ciise ayaa ku yiri
Nebi ma uu jiro
marwo la' isagu
Magaaladiisa iyo
gurigiisa ma ahee
58 Halkaas isagu
mucjisooyin aad u badan
Kuma uusan samayn
waayo ma ay lahayn
Wax iimaan ah iyagu

**14** Wakhtigaas isaga ah
taliyihii ahaa Herodos
Ayaa warkii Ciise
maqlay isagu

2 Oo adeegayaashiisii
ayuu ku yiri
Kani waxaa uu yahay
Yaxyihii Baabtiisaha ahaa
Kuwii dhintay ayuu
uu ka soo sara kacay
Illeyn mucjisooyinkan
aad awoodda u leh
Ayaa ku dhex jira
oo ka dhex shaqaynaya
3 Waayo Herodos ayaa
Yaxye qabtay isaguye
Oo intuu xiray isagu
ayuu xabisayoo
Wuxuu sidaas u yeelay
walaalkiis ahaa Filibos
Naagtiisii ahayd Herodiya
iyada aawadeed
4 Yaxye ayaa ku yiri
xalaal kuuma ahan adi
In aad haysataa iyada
5 Herodos ayaa damcay
Inuu dilo Yaxye
waxse uu ka baqay
Dadkii badnaa iyagu
illeyn nebi ayay
U heysteen isaga
6 Goortii ay timid
U dabbaaldegiisii
markii uu dhashay Herodos
Oo Dadkii dhexdiisa
ayay ku ciyaartay
Inantii Herodiya
oo Herodos ayay ka farxisay
7 Dhaar ayuu Herodos
ugu balan qaaday
Wixii ay weyddiisataba

inuu siiyo iyada
[8]Illeyn horay ayay hooyadeed
ula soo talisee
Waxaa ay ku tiri
Halkan xeero igu sii
Madaxa Yaxye oo
Baabtiisaha ahaa
[9]Boqorkii isna waa
uu ka calool xumaaday
Balse dhaarihiisii iyo
martidiisii u fadhiday
Ayuu amray
in la siiyo iyada
[10]Cid ayuuna u diray
oo xabsigii ayay
Ugu tageen Yaxye
[11]madaxi ayna ka jareen
Xeero ayaana madaxii
loogu sooo riday oo
Inantii la siiyey
iyaduna hooyadeed
Ayay u keentay
[12]Xertiisiina u timid
Oo waxaa ay qaadeen
meydkiisii isaga
Waana ay aaseen
Ciise ayayna u tageen
Waana u warrameen

## Casho Ayaa La Siiyey Shan Kun Oo Qof Dad Ka Badan

[13]Markii uu maqlay Ciise
arrinkaas isaga ah
Dooni ayuu halkaas
uu ka soo raacoo

Meel cidla ah
ayuu tegay keligiis
Dadkii aadka u badnaa
markii ay maqleen
Warkaas isaga ah
magaalooyinkii ayay
Lugeeyeen iyagu
iyagoo raacaaya isaga
14 Markii uu Ciise
doonnidii uu ka degay
Ayuu arkay dad badan
wuuna u naxariistay
Oo kuwoodii bukay
ayuu bogsiiyeyoo
15 Makhribkii markii uu
soo dhawaaday ayay
Xertiisii u timid
oo ay ku yiraahdeen
Meeshaani iska cidla weeyaan
waana habsaan iminkee
dadkan iska dir
tuulooyinka ha aadaanee
Ha soo iibsadeen cunto
16 Ciise ayaa ku yiri
Uma baahna in ay tagaane
cunto siiya idinku
17 Waxaa ay ku yiraahdeen
Innagu halkan
Waxaan uun ku haynaa
shan kibis ah
Iyo laba kaluun ah
18 Isna wuxuu ku yiri
Halkan iigu keena
19 Dadkii aadka u badnaa
Ayuu ku amray
in ay cawska fadhiistaane

Isna wuxuu qaaday
shantii kibista ahayd
Iyo labadii kaluun
oo cirka ayuu eegay
Ayuu barakeeyey
oo jejebiyey kibistii
Xertiisii ayuuna siiyey
iyaguna dadkii badnaa
Ayay u sii gudbiyeen
[20]Dhammaana waa ay cuneen
Waana ay ka dhergeen
Oo waa soo gureen jajabkii
Iyaga ka haray
oo laba iyo toban dambiil
Ayay ka buuxsheen
[21]Intii cuntaa ku dhawayd
Shan kun oo nin
naagaha iyo caruurtuna
Aanay ku jirin

## Sayidka Ayaa Badda Ku Dul Socday

[22]Isla markiiba
xertii amar ku siiyey
In ay doonta fuulaan
dhanka kale si ay
U sii taagaanoo
intuu kala diraayo
Dadki aadka u badnaa
[23]Markii uu kala diray
Dadki aadka u badnaa
ayuu buurta fuulay
Isagoo tukanaya
makhrib ayayna noqotay
Keligiis ayuuna

halkaas iska joogay
[24]Wax badan ayayse
doonnidii fogayd oo
Jiinka ay ka dheereyd
hirar ayaana dhibayay
Illeyn dabayshaa
iyada ka gees ahayd
[25]Ciisena aroortii
ayuu u yimidoo
Biyaha ayuuna
uu dushooda isagu
Uu ku soo soconayay
[26]Markii ay xertiisii
Ay arkeen isaga
isagoo biyaha
Isaga dul soconaya
waa ay nexeenoo
Oo waxay yiraahdeen
Waa reer aakhiraad
Cabsi ayayna
ay lawada qayliyeen
[27]Isla markiiba Ciise
waa uu la hadlay
Isagoo ku leh
Ha baqina idinku
Waa anigi uunee
[28]Butros u jawaabyoo
Waxaa uu ku yiri
Sayidow haddii aad
Adigi aad tahay
igu amar biyaha
Inaan dushooda
aan kuugu imaado
[29]Kaalay, ayuuna ku yiri
Oo Butros isagu
Doontii ayuu ka degay

biyihii ayuuna
Ku dul socday isagu
si uu Ciise ugu tago
30 Balse isagu markii
uu dabaysha arkay
Ayuu cabsooday
isla markiiba
Waxaa uu billaabay
inuu dego Butros
Oo waa uu qayliyay
isaga oo leh
Ibadbaadi Sayidow
31 Oo isla markiiba
Ciise gacan u fidiyay
soo qabyay isagina
Waxaa uuna ku yiri
Immaankaagu yaraa
Waa maxay sababta aad
adigu aad u shakiday?
32 Doonnida markii ay
iyagu ay fuuleen
Dabayshii ayaa
joogsatay iyadu
33 Intii ku jirtay doonnida
isagay caabudeen
Oo waxay ku yiraahdeen
Runtii Wiilka Eebbe
Ayaad adigu tahay

## Dadkii Lagu Bogsiiyey Gennesared

34 Markii ay gudbeen
Gennesared ayay
Ay wada yimaadeen
35 Oo dadkii halkaas

Degganaa iyagu
markii ay garteen
Farriin ayay u direen
gobolka oo dhan
Oo waxay u keeneen
kuwii bukay oo dhan
36 Iyagoo ka baryaya
in faraqa maradiisa
Ay uun ka taabtaan
oo kuwii taabtayna
Waa ay bogsadeen

## Ciise Ayaa Ka Jawaabay Eedayntii Ku Saabsanayd Ku Xadgudubka Xeerka

15 Yeruusaalem ayaa
Ciise uga yimaadeen
Niman Farrisiin ah
iyo kuwo culimmo ah
Waxa ay ku yiraahdeen
2 xertaadu maxaa ay
Ay xeerarka waayeellada
ay ugu xadgudbaan?
Waayo iyagu marna
ma ay faro xashaan
Inta aysan wax cunin
3 Wuuna u jawaabay
Oo uu ku yiri iyagii
Idinkuba maxaad
Amarkii Eebbe
aad uga gudubtaan
Xeerkiinna aawadiis?
4 Waayo Eebbe ayaa amray
Aabbe iyo hooyadaa

waa in aad maamuustaa
Oo aabbe iyo hooyadiis
kii u gefaa isagu
In la dilo weeyaan
5 Waxaa aadse leedihiin
Kii aabbe ama hooyadiis
ku yiraahda isagu
6 Waxaan idin siin lahaa
waxaa aan ka dhigay
Hadiyad Eebbe leeyahay
aabbe iyo hooyadiis
Kuma uu maamuuso
7 Waxa aad tihiin
Laba-wejiileyaal uun
Ishacyaah ayaa uun
Idin sheegay idinka
markuu yiri isagu:
8 Dadkan iyaga ahi
afka oo keliya
Ayay aniga
igu maamuusayaan
Uurkoodu laakiin
waa iga fog yahay
9 Micne si aan lahayn
yey ii caabudayaan
Waxaa ay dadka baraanna
wax uu dad sameeyey
10 Dadkii badnaa ayuu Ciise
uu isugu yeeray
Waxaa uuna ku yiri
Afka wixii galaa
Ma ahan kuwa
nijaaseeya isaga
11 Isagase waxaa uun
nijaaseeya isaga

Waa waxa afkiisa
ka soo baxaya uun
12 Markaas ayaa xertiisii
inta u timid isaga
Oo kuna yiraahdeen
Ma ogtahay adigu
In ay ka xumaadeen
markey eraygaa maqleen?
13 Isna waa u jawaabay
oo uu ku yiri
Geed walba oo aan
Aabbahayga jannadu
Uu abuurin isagu
in la rujiyeey tegi
14 Iska daaya iyaga
waa indhoolayaal
Ay indhoolayaali
ay iyaga hagayaan
Laakiin nin indha la'i
haddii uu hagaayo
Nin isna indha la'a
god ayay labaduba
Ay ku dhici doonaan
15 Butros ayaa u jawaabay
Oo ku yiri isagii
Sarbeebta innoo macnee
16 Markaas ayuu ku yiri
ma dammiin ayaad
idinku tihiin weli?
17 Miyeydnaan arkaynin
Wax kastoo afka galaa
waxaa ay tagaan calool
Waana uun la xaaraa
18 Laakiin ogaada
Afka wixii soo maraa

uurka yey ka yimaadaan
Waana uun kuwaa
qof uun waxa nijaaseyn
19 Waayo uurka sidiisaba
waxaa uun ka soo baxa
Fikir uun shar badan leh
iyo dhiig la galo iyo
Sinno iyo maacisyo
iyo tuuganimadaba
Iyo maragga beenta ah
af xumiyo gefba
20 Waa kuwan iyaga ah
axad waxa nijaaseyn
Balse in wax lagu cuno
gacmo aan la mayrin
Cidna ma ay nijaaseyn

## Bogsiinta Inantii Reer Kancaan

21 Ciise yaa isaga tegay
halkii uu ku sugnaa
Turos iyo Siidoon
dhulkaa ayuu tegay
22 Naag reer Kancaan ah
oo deggan dhulkaas
Yaa isaguu timid
iyadoo ku qayliyi
Ii naxariiso aniga
Sayidow ina Daa'uud
Inanteydi aniga
jinni ayaa si xun
Iyada u waalaya
23 Balse Ciise isagu
Uma uu jawaabin

Xertiisii ayaa u timid
Iyaga oo ku leh
Eri naagtan, Sayidow
Innaga ayayba
innaga daba qayline
24 Balse wuu u jawaabay
isaga oo leh
Aniga layma soo dirin
idaha lunsan ee
Reer beni Israa'iil
iyaga mooyee
25 Balse iyadu waa u timid
u sujuudday isagii
Iyada oo ku leh
Sayidow i caawi
26 Isna waa u jawaaboo
waxaa uu ku yiri
Inna maba wanagsana
in la qaado kibista
Ay carruurtu leedahay
oo loo tuuro eeyaha
27 Waxa ay ku tiri
Eraygaagu waa sax
Laakiinse eeyuhu
waxaa ay cunaanba
Waxa uun ka soo dhaca
miiska sayidka iska leh
Markaas ayuu Ciise
u jawaabay iyadii
Isaga oo leh
28 Naag yahay iimaankaagu
Waa mid aad u weyn
ha kuu noqoto adiga
Sida aad dooneyso
Isla saacadaasna
Inanteedi bogsatay

# Dadkii Badnaa Ee La Bogsiiyey

29 Ciise ayaa markaas
halkaas isaga tegay
Oo badda Galili
ayuu u soo dhawaaday
Buurta ayuu fuulayna
oo halkaas fadhiistay
30 Markaasaa waxaa u yimid
dad aad u fara badan
Waxaa ay u keeneen
kuwo cuuryaan ah
Iyo kuwo indha la'
iyo kuwo carrab la'
Iyo kuwo addimo la'
iyo kuwo kaloo badan
Waxaa ayna dhigeen
cagihiisa agtooda
Wuuna uu bogsiiyey
31 haddaba dadkii oo dhan
Ayaa wada yaabay
goortii ay arkeen
Kuwii carrabka la'aa
iyagoo hadlaaya
Kuwii lugaha aan lahayn
iyagoo bogsaday
Kuwii cuuryaanka ahaa
iyagoo soconaya
Kuwii indhaha la'aa
iyagoo arkaaya
Eebbaha reer Israa'iil
ayayna ammaaneen

# Cunto Ayaa La Siiyey Afar Kun Oo Qof Dad Ka Badan

32 Markaas ayuu Ciise
xertiisii u yeeray
Isaga oo ku leh
Dadkan aad u badan
Ayaan u naxariisan
seddax maalin ayay
Haatan innala joogeen
mana ay haystaan
Wax ay cunaane
dooni maayo inaan diro
Iyagoo baahan
waaba intaas oo ay
Iyagu itaal beelaan
jidka intey maraayaan
33 Xertiisii ayaa tiri
Innagoo joogna
Meel cidladan ah
halkee ayaan ka helaynaa
Kibis intan la'eg
si ay ugu filnaato
Dad sidan u badan?
34 Ciise ayaa yiri
Immisa kibsood
ayaad haatan haysaan?
Waxa ay yiraahdeen
Toddobo kibsood iyo
In yar oo kalluun ah
oo aad u yaryar
35 Ciisena isagu
dadkii aadka u badnaa
Ayuu ku amray
dhulka in ay fadhiistaan
36 Isagoo soo qaaday

toddobadii kibsood iyo
Kaluunkii isaga ahaa
oo intuu ku mahadnaqay
Ayuu kala jejebiyey
oo xertiina siiyey
Dadkii aadka u badnaa
yey xertii ey siiyeen
37 Dhammaantood iyagu
waa ay wada cuneenoo
Waana ay ka dhergeen
waxay soo ururiyeen
Toddoba dembiil oo
jajab uu ka buuxo
38 Dadkii cunay ayaa ahaa
afar kun oo nin
Naagaha iyo caruurtuna
aanay ku jirin
39 Dadkii aadka u badnaa
markii uu kala diray
Ayuu dooni fuulay
isaga oo tegay
Magadan agteeda

## Ciise Waa Diiday Markii Calaamo La Weyddiistay

**16** Waxaa u yimid isagii
Kuwo Farrisiin ah
Iyo weliba Sadukiintii
Jirrabaad ayay
isaga la maageen
Waxaa ay ka baryeen
in uu samada
Calaamad uga muujiso
2 wuuna u jawaabay

Oo ku yiri iyagii
Makhrib marka ay tahay
Waxa aad tiraahdaan
maalin aad u wanaagsan
Ayay noqon doontaa
waayo cirka ayaa
Iminka guduudan
[3]Aroortii markey tahay
Waxa aad tiraahdaan
roob ayaa imanaya
Waayo cirka ayaa
iminka guduudan
Waana ay muuqataa
in uu kicinsan yahay
Waxa aad taqaaniin
sida aad u garataan
Sida uu cirku
uu u muuqdo markaas
Balse ma aad garataan
wakhtiga iyo
Calaamadaha u gaarka ah
[4]Waxaa calaamo doona uun
kuwa sharta uun leh
Iyo qarnigan
sinada uun leh
Calaamo ayaan la siinayn
mid uun mooyee
Waana Yoonis tiisi uun
Kolkaas ayuuna
Iyagii isaga tegay

## Ciise Wuxuu Xertiisii Ku Canaantay Indhala'aantoodii

[5]Markii ay xertiisii
ay yimaadeen dhanka kale

Waxay soo illoobeen
kibis in ay sii qaataan
[6]Ciise ayaa ku yiri
iska eegoo iska jira
Khamiirka Farrisiinta iyo
Sadukiinta oo idil
[7]Markaas ayay isla hadleen
oo isku yiraahdeen
Sababtaas ayaa ah
kibisti aan ka soo tagnay
[8]Ciise ayaa gartayoo
waxaa uu ku yiri
Maxaad isula hadlaysaan
rumaysadkiini aaway?
Ma la'aanta kibistaa?
[9]Oo weli ma garanina
ama aad xusuusnayn
Kibistii shanta ahayd
ay shan kuni cuntay?
Iyo shantii dambiilood
eed ka ururiseenba?
[10]Ama toddobadii kibsood
afartii kun cuntay
Iyo intii dambiilood
eed ka soo ururiseen?
[11]Sideed u garan weydeen
kibis inaanan ka hadlayn?
Iska jira khamiirka
Farrisiinta iyo
Sadukiinta oo idil
[12]Kolkaas ayay garteen
in uusan ku lahayn
Iska jira khamiirta
ay kibistu leedahay
Balse uu wax baridda
Farrisiinta iyo
Sadukiinta uga digi

## Butros Ayaa Qiray In Ciise Yahay Masiixa

13Ciise kolkii uu yimid
Kaysariya iyo
Filibos agteeda
ayuu xertiisii
Weyddiiyay iyaga
oo wuxuu ku yiri
Dadku yay aniga
tolow igu sheegaan
Haddaan anigu ahay
Wiilka Aadanaha?
14Waxay ugu jawaabeen
qaar ayaa yiraahda
Yooxaanihi ahaa
Baabtiisaha inaad tahay
Qaar kalena Eliyaas
Yeremyaah inaad tahay
Qaar kalaaba aaminay
nebiyadi midkood uun
15Kolkaasuu iyagii
waxaa uu ku yiri
Yaad igu sheegtaan
idinku dhammaantiin?
16Simoon Butros ayaa
u jawaabay oo yiri
Masiixii ayaad tahay
iyo Wiilka Eebbaha
Nolol u sugnaatay
17Ciisaa u jawaabay
oo ku yiri isagii
Simoon ina Yoonis
kuu ahaatay barako
Arrintan iyada ah
kuuma muujin adiga
Bini-aadmi oo idil

laakin Aabbahayga
Oo ku jira jannada
kuu muujiyay adiga
[18]Anigaaba kugu leh
Butros ayaad tahay
Oo dhagaxan Ayaan
dushiisa aan ku dhisayaa
Kiniisaddayda aniga
albaabadi Haadeesna
Kama adkaan karayaan
[19]Waxaa aan ku siin
furahan isaga ah
Ee boqortooyada jannada
wixii aada adigu
Dhulka aad ku xidhaa
jannada ayuu ku xiran yahay
Dhulka wixii aad ku furtaa
jannada ayuu ku furan yahay
[20]Markaas ayuu xertisii
waxaa uu ku amray
In cid aanay u sheegin
in uu yahay Masiixa

## Ciise Waa Sii Sheegay Dhimashadiisa Iyo Sarakiciddiisa

[21]Ciise Masiix intaas kadib
xertiisii u sheegyay
In ay waajib kuba tahay
Yeruusaalem inuu tago
Wadaaddada sare iyo
waayeelada agtooda
Wadaaddada sare iyo
culimmada iyagana
Xanuun in ay la maagaan

ayna dili doonaan
Oo maalinta seddaxaad
sare u kici doono
[22]Butros ayaa kolkaas
inta gees ula baxay
Ayuu canaantay isagii
oo wuxuu ku yiri
Eebbe ha kaa hayo
Sayidow adiga
Waxaad sheegtay adigu
ma ay kugu dhacaayaan
[23]Laakiin Butros ayuu
u jeestay xaggiisii
Waxaa uuna kuba yiri
iga mar gadaal
Shaydaan ayaad tahay
hay xumaynin aniga
Waxyaabaha Eebbe
kuma aadan fikirin
Waxa dadka ayaad
ku fikirtay adiguye

## Nafta Waa In La Diido

[24]Ciise ayaa xertiisii
waxaa uu ku yiri
Kii doonaya isagu
iga daba yimaado
Doonistiisa waa in uu
dayriyaa isagu
Iskutallaabtiisana
ha soo qaado isagu
Hana uu i raaco
[25]Kan doonaya naftiisa
in uu badbaadiyo

Waa uu lumin doonaa
naftiisa kii ii lumiyana
Waa uu heli doonaa
26 Nin maxay u taraysaa
Dunida oo dhan
haddii uu helo
Balse uu naftiisa
uu lumiyo isagu?
Ayaa naftiisa isagu
ku bedelan adduunyo?
27 Waayo Wiilka Aadanuhu
ammaanta Eebbe
Wuxuu kula imanayaa
malaa'igaha Eebbe
Ninkastaa ayuuna
abaalgudkiisa siinoo
Camalkiisa awgiis
28 Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
qaar idinka mid ah
Ma ay dhimanayaan
illaa ay ka arkaan
Boqortooyada Eebbe
Wiilka Aadanaha
Sidaa ku imanaya

## Waxaa Is Bedelay Muuqa Ciise

**17** Lix ayaamood kadib
Ciise ayaa waday
Butros iyo Yacuub
iyo walaalkiis Yooxanaa
Keligood ayuuna
buur dheer uu geeyay
2 Hortooda ayuuna

ku bedelmay iyagii
Wejigiisa ayaa
u ekaaday qoraxdii
Waana uu dhalaalay
oo dharkiisa isagana
Sida nuurki oo kale
ayuu u caddaaday
3Oo bal eega iyagii
waxaa u muuqday
Muuse iyo Eliyaas
oo la hadlaya isaga
4Markaas ayuu Butros
u jawaabay Ciisoo
Isagoo ku yiri
waxaa inoo wanaagsan
In aan Sayidkiiyow
halkan aynu joogno
Oo haddii aad dooni
halkan ayaan ka dhisayaa
Seddax waab oo waafiya
mid adaan kuu dhisayaa
Midna Muuse yaan u dhisi
midda kalena Eliyaas
5Intuu weli hadlaayay
daruur dhalaal ah
Ayaa haraysay
daruurtii ayaa cod
Intuu ka soo baxay
ayaa wuxuu yiri
Kan ayaa ah Wiilkay
aan aadka u jeclahay
Oo aan ku farxee
maqla oo addeeca
6Isaga xertiisii
markii ay maqleen
Wejigay u dheceen

Waana ay baqaayeen
7 Ciise ayaa u yimidoo
Oo taabtay iyagii
Kaca oo ha baqina
Ayuu ku yiri yoo
8 Kor u qaaden indhihii
Ciise uun mooyee
cid kalena ma ay arag
9 Markii ay ka soo degeen
buurti ay fuuleen
Ciise ayaa amrayoo
cid in ay u sheegiin
Wixii ay arkeenba
illaa Wiilka Aadanuhu
Uu ka soo sara kaco
kuwi dhintay oo dhan
10 Xertiisii ayaa tiri
maxay u yiraahdeen
Culimmadu in uu
Eliyaas in uu hor imanayo?
11 Wuu u jawaabay iyagoo
oo ku yiri waa run
Eliyaas wuu imanayaa
isagaana soo celin
Wax walbee u suga bal
12 Waxaan idinku leeyahay
Eliyaas mar horuu yimid
iyaguna ma ay garan
Wax kasta ooy doonayeen
ayay kuba sameeyeen
Sidaas oo kaleetana
Wiilka Aadanahuna
Waa ay silcin doonaan
13 Xertii ayaa garatay
In uu ka hadlayay
Yooxannihii oo
Baabtiisaha ahaa

## Waxaa La Bogsiiyey Wiilkii Jinniga Qabay

[14]Dadkii badnaa markii ay
isaga u yimaadeen
Nin ka mid ah iyagii
ayaa jilba joogsaday
Ayuu ku yiri isagii
[15]Sayidow u naxariiso
Aniga wiilkayga
suuxdin ayuu leyahay
Aad ayuu u xanuunsan
marar aad u badanna
Dabka ayuu ku dhacayaa
biyahana mar ayuu
Toos ugu dhacayaa
[16]xertaadina u keenay
Ma aysan bogsiinin
[17]Ciisaa u jawaabay
Oo wuxuu yiri
qarni ayaad tihiin
Uu rumaysad daranoo
madaxiinu adagaa
Illaa iyo intee baan
idinla jiri doonaa?
Ii keena isaga
[18]Ciise ayaa canaantay
Isaga bax jinnigii
oo bogsaday wiilkii
[19]Xertiisii oo keli ah
ayaa u timid Sayidkii
Waxa ay weyddiiyeen
maxaanan u awoodin
Jinka in aan saarno?
[20]Waxa uu ku yiri
Rumaysadkiina idinku
aad ayuu u yar yahay

Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Haddii aad leedihiin
iimaan la eg uun
Iniin khardal ah
buurtan ayaad ku leedihiin
Ka dhaqaaq halkaan oo
wayna ay dhaqaaqi
Waxna ma kari weydaan
21 Laakiin caynkan oo kale
Kuma baxo wax aan ahayn
tukasho iyo soon

## Mar Labaad Ayuu Ciise Sii Sheegay Dhimashadiisii

22 Intii ay Galili
ku ag wareegeen
Ciise ayaa ku yiri
Wiilka Aadanaha
Gacantuu u gelayaa
dad isaga dhibaya
23 Waa ay dili doonaan
Seddax ayaamood dabadeed
Ayuu sarakacayaa
waa ay calool xumaadeen

## Canshuurtii Macbudka Ayuu Ciise Bixiyay

24 Kafarna'um kolkii ay
ay wada yimaadeen
Waxaa u yimid Butros

lacag iyagoo dooni
Kuwii ururin jiray
laba daraakmo oo qura
Waxaa ay yiraahdeeen
Macallinkiinnu idinka
Laba daraakmo waa inuu
canshuur ahaan u bixiyaa
25Butros ayaa ku yiri
isagu wuu bixinayaa
Aqalkii kolkuu galay
Ciise ayaa hadlayoo
Oo ku yiri iyagii
Simoonow bal eeg
Boqorrada adduunku
dadka ayay canshuuraan
Baadna way u raacshaan
waxba kama ay qaadaan
Ubadkooda iyaga
shisheeyaha uun mooyee
26Ugu jawaab, Shisheeye
Ciise ayaa ku yiri
Ubadkaa ka reebban
baad iyo canshuurba
27Si aanay isu xumayn
badda iminka noo tag
Jillaab intaad ku tuurto
kalluunka ugu horreeya
Soo qaboo innoo keen
afkiisaadna furaysaa
Waxaad ku arki doontaa
afar daraakmo
Aniga iyo adigaba
innaga bixi canshuurta

## Is-hoosaysiinta

**18** Saacaddaas ayay xertii
u yimaadeen Ciise
Iyagoo ku oranaya
kee ayaa jannada
Boqortooyo ugu weyn?
2 wuxuu ugu jawaabay
Isagoo u yeeray
ilmo meesha joogay
Oo dhexdooda joojiyay
waxaa uuna yiri
3 Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Haddii aadan noqonina
sida ilmahan oo kale
Ma aad geli doontaan
boqortooyo janno ah
4 Kii isu hoosaysiin
ilmahan oo kale
Kaas ayaa ugu weyn
boqortooyo janno ah
5 Oo ku Alla kii
magacayga ku aqbala
Wuu i aqbalaayaa

## Ciise Ayaa Ka Digay In Aan Dadka La Xumayn

6 Ku Alla kii xumeeyaa
yaryarkaan iyaga ah
I rumeeyay aniga
waxaa loo qaatay isaga
In dhagax shiid ahoo culus
luqunta looga xiro oo

Oo uu ku hafto
badda moolka ahe dheer
7Waa u hoog dunidan
xumaantaa aawadeed!
Xumaantu way imanaysaa
hoog waxay u tahay uun
Inta fasha xumaantee
8Haddii addin ku xumeeyo
Gacan iyo lug
midkii ay noqotaba
Iska jar oo iska tuur
Waa adi dantaada
Inaad addin la'aan
aad ku gasho nolosha
Inta adoo lug iyo gacan leh
naarta aad geli lahayd
9Iska tuur ishaada
dembi haddey kuu iisho
Waxaa adi dantaadaa
in aad il la'aan
Aad ku gasho nolosha
intii laba indhood
Naar aad ku geli lahayd
10Iska jira inaydnaan
Marna aadan quursan
ilmahaan saqiirka ah
Waxaan idinku leeyahay
markasta oo ay tahay
Malaa'igtooda ayaa
oo ku jira jannada
Ayaa eega wejiga
Aabbahayga ku jira
Jannadaa iyada ah
11Waayo Wiilka Aadanaha
Ayaa u yimid badbaadinta
kuwa ambaday oo dhan

## Masaalka Ku Saabsan Laxdii Luntay

[12]Maxay idinla tahay
nin hadduu uu leeyahay
Tiro ido ah oo dhan
midi ay ka luntoo
Miyaanu intii kale
sagaashan iyo sagaalkood
Cidlada uusan uga tegin
tii ambatay doono?
[13]Mar haddii uu helana
waxaan idinku leeyahy
Oo runtiina iga ah
aad ayuu u farxaa
Si uusan ugu farxin
kuwa badane aan lumin
Sagaashan iyo sagaalkooda
[14]Taas waxaa la mid ah
Doonista Eebbe ma ahan
ilmahaan midkoodna
In uu lumo welgiis

## Xumaanfalayaal Wixii Loo Samayn Lahaa

[15]Oo haddii walaalkaa
kugu dembaabo adiga
U tag oo canaano
adiga iyo isaga uun
Haddii uu ku maqlo
walaalkaa adiga
Usoo noqoy xagaaga
[16]Haddii uu ku diido
Mid ama labo wado
si hadalka oo idil
Loogu adkeeyo afka

markhaatiyaal ah
Laba ama seddax
17 Hadduu diido iyagana
Kiniisadda u sheegoo
hadduu diido iyagana
Qof aan Eebbe garanayn
ayuu kuula siman yahay
Canshuur qaade oo kale
18 Waxaan idinku leeyahy
Oo runtiina iga ah
wax alla iyo wixii
Oo ku xiran dhulka
jannada ayay ku xiran yihiin
Dhulka wixii aad ku furtaan
jannada ayay ku furan yihiin

## Tukashada Jameecada Ah

19 Waxan idinku leeyahay
haddii laba dhexdiina ah
Dhulka ay ku heshiiyaan
waxkasta ooy baryaan
Way u noqon doontaa
xagga Aabbaha ku jiraa
Jannada iyada ah
20 Laba ama seddax meeshii
Ay ku kulmaan magacayga
dhexda ayaan ka joogaa

## Waajibka Is Cafinta Iyo Masaalkii Ku Saabsanaa Midiidinkii Aan Abaalka Lahayn

21 Butros ayaa u yimidoo
oo ku yiri isaga
Sayidow imisa goor

ayaan cafin walaakay
Hadduu igu dembaabo?
Ma illaa toddoba goor?
[22]Ciise ayaa ku yiri
kugu oran mayo
Illaa toddoba goor
balse illaa toddobaatan
Toddoba jeer ah
iska cafi isaga
[23]Haddaba ogaada
boqortooyada ah
Jannada ayaa
loo ekaysiinaayaa
Nin boqor ah oo kale
oo doonayaa maalin
In addoomadiisa
xisaab xir ku eego
[24]Markii uu billaabay
xisaabtii uu xirayay
Ayaa la hor keenay
toban kun oo talanti
Ninkii uu ku lahaa
[25]Wax uu haystay malahayn
Sayidkii ayaa ambray
iibintii miskiinkaas
Xaaska iyo caruurta
iyo wax kastuu lahaa
Si uu qaanta u bixiyo
[26]Addoonkii intuu dhacay
Ayuu yara sujuuday
ayuu wuxuu yiri
Ii dulqaado anigaa
iska bixin dayntee
[27]Sayidkii addoonkii
naxariis ayuu tusay
Wuuna iska daayay

u cafiyay amaahdii
[28]Balse baxyay addoonkii
isagoo kolkaa arkay
Mid ka mid ah addoontii
uu la shaqayn jiray
Waxaa uu ku lahaa
waa boqol uun dinaar
Ceeji ayuu ku qabtay
aad ugu hanjabay
Iska bixi amaahda
aan kugu leeyahay
[29]Addoonkuu la shaqayn jiray
isku riday cagahiisa
Intuu baryay ayuu
waxaa uu ku yiri
Ii dulqaado anigaa
iska bixin amaahdee
[30]Isna wayska diiday
xabsi ayuu ku tuuray
Inta uu ka bixinayo
daynta uu ku lahaa
[31]Kuwii uu la shaqayn jiray
arke waxa uu falayay
Aadna uga xumaadeen
Sayidkina u sheegeen
Wixii dhacay oo dhan
[32]Sayidkii u yeeryay
Waxaa uu ku yiri
addoon sharleh baad tahay!
Waan kuu dhaafay anigu
amaahdaydi oo dhan
Waad i bariday adigu
[33]Maxaad u garan wayday
Naxariis in aad tusto
addoon kula shaqayn jiray?
Ood u naxariisatid

amba kuu naxriistaye?
[34]U carooday sayidkii
waxaa uu u dhiibay
Kuwo aad u silciya
illaa uu bixiyo
Amaahdi oo dhan
[35]Sidaas oo kaleetaa
Aabbahayga jannada
ku jira isagu
Idinku samayn uun
haddii uu midkiinba
Qalbiga uusan ka cafin
walaalihiisa oo dhan

## Wax Ku Saabsan Naag Furidda

**19** Ciise ayaa dhammeeyay
haddalkaas oo dhan
Oo Galili kaba tag
waxaa uuna yimid
Yahuudiya agteeda
Webi Urdun korkiisa
[2]Dad aad u tira badan
yaa soo raacay isagii
Halkaas iyada ah
ayuu ku bogsiiyey
[3]Farrisiintii ayaa
kolkaas u timid
Waana ay jirrabayeen
waxaa ay jiraahdeen
Xalaal ma u tahay
ninku in uu ooridiisa
Sabab kastaa u furo?
[4]Wuuna u jawaabay
Isagoo ku yiri

ma akhrina miyaa
Eebbaa uumay iyagoo
lab iyo dhedig weeyaan
[5]Waxaa uu ku yiri
sababtaas aawadeed
Ninka ayaa ka tegaya
aabbe iyo hooyo
Xaaskiisa ayuu
isagu la joogaa
Isku jir ayay noqon
ninka iyo naagtuba
[6]Laba ma ahan iyagu
isku jir weeyaan
Eebbe wuxu isku xiray
uunku yuusan kala furin
[7]Waxaa ay ku yiraahdeen
Muuse ayaa amray
Ninku in uu siiyo
islaanta furniinkeeda
Iyadoo qoraal ah
[8]Waxaa uu ku yiri
Muuse idiin fasax
furitaanka ooryaha
Qalbigiina oo adag
ayuu saas u yeelay
Arrinkuse bilowgii
sidaas ma uu ahayn
[9]Waxaan idinku leeyahay
kii ku fura ooridiisa
Sino mooyee arrin kale
islaan kale guursada
Sino ayuu ku dhacayaa
kii guursada islaan
Uu ku dhacay furniin
isna wuu sinaystaa
[10]Xertiisii ayaa tiri

nin xaalkiis haddii uu
Sidanba uu yahay
Xagga ooridiisa
in la guursadaa adag
11 Waxaa uu ku yiri
uunka badankiisu
Ma aqbali karaayaan
eraygaan isaga ah
Inta la siiyey mooyee
12 Waxaa iyana jira uun
Bohommo iskood
uurka hooyo uga yimid
Waxaa kale oo jira
Bohommo iyaguna
Dadku ay dhufaaneen
iyana waxaa jira
Bohommo rag iska dhigay
Boqortooyada ah
Jannada awgeed
kii aqbali karaayow
Hadalkaan ha aqbalo

## Ciise Ayaa U Duceeyay Carruur Yaryar

13 Ciise ayaa loo keenay
ilmo aad u yar yar
In uu saaro gacmaha
uu una duceeyo
Xertiisii ayaa
isaga canaanatay
14 Ciisaa ugu jawaabay
ii daaya ilmaha
Marna ha u diidina
in ay ii yimaadaan

Waayo iyaga oo kale
ayaa ka mid ah
Boqortooyo jannada ah
15Ilmihi saar gacmaha
Meeshaasna isaga tag

## Nin Hodon Iyo Dhalinyaro Ah Ayaa Doonaya Nolosha Weligeed Ah

16Mid ayaa u yimid
oo ku yiri Macallin
Oo wanaagsanow
maxaa ii wanaagsan
Oo aan sameeyaa
si aan anigu u helo
Nolosha weligeed ah?
17Wuxuu ugu jawaabay
Maxaad wax iiga weyddiin
waxa uu wanaag yahay?
Mid wanaagsan ayaa jira
haddii adigu aad doonto
Nolosha ah weligeed
in aad gasho adigu
Qaynuunnada ixtiraam
18Waa kuwee ayuu yiri
Qudh in aadan goynin
oo aad sinaysanin
Waxna aadan xadin
marag been ah ka fogow
19Waa in aad maamuustaa
aabbe iyo hooyadaa
Deriskaaga u jeclow
sida naftaada oo kale
20Ninkii ayaa ku yiri
kuwaas dhawray idilkood

Wax ii dhiman miyaa jira?
[21]Ciise ayaa ku yiri
Haddii aad samaan dooni
tag oo iibi maalkaaga
Masaakiin u qaybi
maal ayaad jannada
Aad ku yeelan doontaa
ee kaalay isoo raac
[22]Arrintaas markuu maqlay
ninki ayaa murgooday
Wuuna iska dhaqaajiyay
taajir ayuu haa

## Faa'iido La'aanta Hodonka

[23]Ciise ayaa xertiisii
waxaa uu ku yiri
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Boqortooyada jannada ah
nin taajir ah inuu galo
Waa ay ku adag tahay
[24]Waxaan idinku leeyahay
Nin taajir ah in uu galo
boqortooyada Eebbe
Waxaa uun ka hawl yar
in awr ka duso
Irbad daloolkeed
[25]Xertii markii ay maqleen
Aad yaya u yaabeen
iyagoo ku oranaya
Iyaa badbaadi kara?
[26]Ciise intuu eegay
Oo ku yiri iyagii
waxani uma suurtoobaan

Dadka balse Eebbe
wuu awoodaa wax walba
27 Butros ayaa u jawaabay
oo wuuxu ku yiri isagii
Annaga haddaan nahay
maal adduun ka soo tagnay
Adigaan ku raacnay
ee maxaan helaynaa?
28 Ciise ayaa ku yiri
waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
kuwiinna i raacay
Marka uu wakhtigu
uu cusboonaato
Goortii Wiilka Aadanaha
carshiga ammaantiisa
Uu ku fadhiisto
laba iyo tobanka carshi
Ayaad ku fadhiisan
idinka oo xukumaya
Laba iyo tobankii
qolo ee Israa'iil
29 Oo mid walba oo ka tegay
guryo ama walaalo
Aama aabbe ama hooyo
caruur ama beero
Magacayga awgiis
boqol laab ayuu heli
Waxa uu dhaxlaayaa
nolosha ah weligeed
30 Kuwo badan oo hore
ayaa dambayn doona
Kuwo kale oo dambe
ayaa horrayn doona

## Masaalkii Ku Saabsanaa Beerta Canabka Ah Iyo Shaqaalaha

**20** Boqortooyada jannada ah
waxaa ay u eg tahay
Nin oday reer u ah
oo baxay aroortii
Si uu shaqaale
beerta ugu kireeyo
Beertiisa canabka ah
shaqaalaha uu keenay
2 Heshiis ayuu la galay
maalintii in uu siin
Dinaar xaqooda ah
beertii canabka ahayd
Iyagii u diryay
3 Saacaddii seddaxaad ayuu
Uu baxay oo arkay
qaar aan shaqo haysan
Suuqa iska taagan
4 oo wuxuu ku yiri
Beerta canabka taga oo
halkaas iiga shaqeeya
Anaa idin siinaya
idinka xaqiina
Shaqadii ayay tageen
5 Markii ay noqotay
Saacaddii lixaad iyo
saacaddoo sagaal ah
Ayuu baxay oo falay
sidii hore oo kale
6 Saacaddu markey ahayd
kow iyo toban
Intuu baxay ayuu arkay
kuwo aan shaqaynayn
Waxaa uu ku yiri

maalinti oo dhan
Maxaad isaga joogtaan
idinkoon shaqaynayn?
[7]Waxa ay u sheegeen
in aysan weli helin
Cid ay u shaqeeyaan
Waxaa uu ku yiri
Iiga shaqeeya aniga
beertayda canabka ah
[8]Makhrib ayaa la gaaray
ninki beerta iskalahaa
Wakiilkiis u yeeray
waxaa uu ku yiri
Shaqaalaha u yeeroo
iminka sii mishaarkooda
Adoo ka billaabaya
kuwii u dambeeyay
Illaa kuwi hore u yimid
[9]Goortii ay yimaadeen
[10]Markii kuwii hore
ay wada yimaadeen
Waxay u malaynayeen
wax dheeri ah helayaan
Balse waxa ay heleen
hal dinaar ah ruuxii
[11]Intay lacagti qaadanayeen
ayay gunuunacaayeen
[12]Oo waxay yiraahdeen
oo kuwa dambeeyay
Saacad keliya ayay
shaqadoodu ahayd
Waxaad wax innoo siisay
si isku mid ah
Innagoo qabanay
shaqadii u cuslayd
Kulayl aan ku shaqaynay

maalinti oo dhan
[13]Balse wuu u jawaabay
oo ku yiri midkood
Kuma aan xumaynin
saaxiibkaygi anigow
Sow adigu dinar
igulamaad heshiinin?
[14]Waxaaga qaado oo tag
anigaaba doonaya
Kan ugu dambeeya
inaan siiyo anigu
Intaan ku siiyey adiga
[15]Oo maxaa ku jaban
In aan xoolahayga
sidii aan doono yeelo?
Ma waxay ishaadu
manta ay u xun tahay
Wanaagga aan falayo?
[16]Sidaas oo kale
Ayay kuwa dambe
u horrayn doonaan
Oo ku horena
u dambayn doonaan
Sababta ayaa ah
kuwo badan in loo yeeray
In yar se la doortay

## Mar Seddaxaad Ayuu Ciise Sii Sheegay Dhimashadiisa

[17]Yeruusaalem intii uu
Ciise uu ku socday
Laba iyo tobanki
ayuu keli ahaan weday
Jidka intay ku socdeen
iyagii ayuu ku yiri

[18]Yeruusaalem ayaynu
iminka ku soconnaa
Wiilka Aadanaha
waxaa ay u dhiibayaan
Wadaaddada sare iyo
iyo weliba culimmada
Dhimasho ayayna
ay ku xukumi doonaan
[19]Waxay u dhiibi doonaan
kuwo aan Yuhuud ahayn
In ay ku kajamaan
oo ay karbaashaan
Iskutallaabta ku qodbaan
oo maalinta seddaxaad
Ayuu sarakacayaa

## Waxaa La Weyddiistay Derejada Dunida

[20]Waxaa u yimid Ciise
wiilashii ina Sebedi
Hooyadood iyo iyagii
waa ay u sujuudday
Oo wax ka bariday isagii
[21]Iyadiina weyddii
Wixii ay doonaysay
waxay ugu jawaabtay
Ii amar wiilashayda
mid in uu midigtaada
Midna uu bidixdaada
ay boqortooyadaada
Ay ku fadhiistaan
[22]Ciise ayaa u jawaabay
Oo ku yiri iyadii
aqoon uma lihidiin

Waxaad i weyddiisanaysaan
ma awoodi karaysaan
In aad ka cabtaan
koobka aan ku dhawahay
In aan ka cabbo
ama baabtiiskayga
La idinku baabtiiso?
Waxa ay yiraahdeen
Waan karaynaa innagu
23 Wuxuu ugu jawaabay
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Aniga koobkayga
ayaad ka cabbi doontaan
Oo aniga baabtiiska
la igu baabtiisay
La idinku baabtiisi
in aad fadhiisataan
Aniga midigtayda
iyo bidixdaydaba
Anigu ma aan lihi
in aan idin siiyo
Kuwa lasiin ayaa ah
kuwa uu diyariyay
Aniga Aabbahay

## Weynaanta Runta Ah

24 Tobankii markii ay
arrinkaas maqleen
Walaalihii labada ahaa
aad ugu caroodeen
25 Laakiin Ciise ayaa
iyagii u yeeray
Oo ku yiri idinku

aqoon ayaad u leedihiin
In quruumuhu madaxdooda
ay u taliyaan
Oo kuwooda u waawayn
ay xukun ku leeyihiin
26 Balse idinka dhexdinna
ma ahaan karayso
Ku alla iyo kii dooni
in dhexdiinnna ku waynaado
Midiidinkiinna ha ahaado
27 oo ku alla kii dooni
Inuu idiin horreeyo
addoonkiina ha ahaado
28 Sida Wiilka Aadnaha
uusan u imaanin
In loo adeego
balse in uu adeego
Naftiisana u bixiyo
in ay xoroobaan
Dad aad u tiro badan

## Ciise Ayaa Bogsiiyey Laba Nin Oo Indhala'

29 Yerixoo markii ay
ka tagayeen iyagu
Dad aad u badan
ayaa raacay iyagii
30 Laba nin oo indhala'
jidkii ag fadhiistay
Markii ay maqleen
in Ciise marayo
Ayay qayliyeen
iyagoo leh, Sayidow
Ina Daa'uudow

innoo naxriiso
[31]Dadkii aadka u badnaa
ayaa canaantay
Si ay u aamusaan
laakiin si aad uga badan
Qaylo ugu dhufteen
iyagoo oranaya
Sayidow ina Daa'uud
innoo naxriiso
[32]Ciise ayaa joogsaday
inta uu u yeeray
Ayuu weyddiiyay
waxa ay doonayeen
In uu u sameeyo
[33]Waxay ugu jawaabeen
In indhuhu noo furmaan
ayaan dooni Sayidow
[34]U naxriisay Ciise
indhihiina u fur
Markii uu ka taabtay
indhihii ayaa furmay
Aragoodi soo noqoy
isagayna raaceen

## Ciise Guul Ayuu Ku Galay Yeruusaalem

**21** Yeruusaalem markii ay
ay ku soo dhawaadeen
Beytfaage ay galeen
illaa Buur Saytuun
Ciise ayaa diray
laba ah xertiisi
[2]Oo wuxuu ku jiri
tuulada ah hortiina

Waa in aad tagtaan
durba waxaad arkaysaan
Dameer iyo qayl
ay dameertu xiran tahay
Inta aad furtaan
ii keena aniga
3 Ninki idin weyddiiya
waxa aad u sheegtaan
Sayidkaa u baahan
oo kolkiiba isagaa
Iisoo diri doona
4 Arrintaan ayaa dhacday
Waxyigii uu helay
nebigee ahaa
5 Gabadha Siyoon u sheega
bal eeg boqorkaagu
Waa kuu imanayaa
isagoo qalbi qabow
Oo dameer fuushan
iyo qayl dameeraad
6 Xertiisii ayaa tagtay
amarki Ciise raaceen
7 Dameerti iyo qaylkii
ayay u keeneen
Dusha ayay ka saareen
iyaga dharkoodii
Waa uu ku fadhiistay
8 Intoodii badnayd dadka
Dharki ay xidhnaayeen
jidka ayay ku gogleen
Qaar dadka ka mid ahna
geedihii ayay
Laamo uga soo jareen
oo jidka ku gogleen
9 Dadkii badnaa isaga
ayay hor socdeen

Iyo kuwi daba socday
ayaa ku qaylinayay
Hoosanna ha u jirto
ina Daa'uud
Barakowyay isagu
magaca Eebbe
Kan ku imanaya
how ahaato Hoosanna
Meel alloo saraysa
10Yeruusaalem ayuu galay
Magaalada oo dhan
ayaa kacsanayd
Iyagoo oranaya
waa ayo kani?
11Dadkii badnaa ayaa yiri
Ciise weeye isagu
Oo isagu waa nebi
Naasared ayuu ka yimid
Tii Galili ahayd

## Macbudkuu Ciise Nadiifiyay

12Ciise ayaa galay
macbudka Eebbe
Waxaa uuna ka eryay
kulli kuwii
Wax ku iibinayay
isaga dhexdiisa
Miisaskii ayuu rogay
oo ay lahaayeen
Isku bedelka lacagaha
kuwii ay ahayd
In ay ka shaqaystaan
iyo weli kuraastii
Kuwii iibinayay

qoolleyda iibka ah
[13]Iyaguu ku yiri
waa ay qoran tahay
Gurigayga ayaa
la oran doonaa
Aqalkii tukashada
waxse aad ka dhigateen
God ay tuugo leedahay
[14]Waxaa macbudka ugu yimid
Kuwo indho iyo lugo
midna aan lahayn
Waana uu bogsiiyey
[15]Wadaaddadi sare iyo
Culimmadu markey arkeen
waxyaalahaas yaabka ah
Ee uu samaynayay
iyo caruurta macbudka
Ooy dhexdiisa ka qaylin
iyagoo oranaya
Hoosanna ha u jirto
ina Daa'uud
Ayay caroodeen
[16]oo ay ku yiraahdeen
Adigu ma maqlaysaa
waxa kuwani ay leeyihiin?
Ciise ayaa ku yiri haa
weligiin ma akhrin miyaa
Afka ilmaha ayaad
ammaan ku hagaajisay
Aadka u yar yar
iyo caanonuugga?
[17]Waana uu isaga tegay
magaaladii isaga bexe
Illaa Beytaniya
oo halkaasuu ku hoyday

## Geedkii Berdaha Ahaa Ee Miraha Aan Dhalin

[18]Aroortii kolkey tahay
usoo noqoy magaalada
Gaajo ayuu dareemay
[19]Waxaa uuna arkay
Geed berde ah
oo jidka ku ag yaal
Kolkaas ayuu u yimid
waxna kama uu helin
Caleen uun ma ahine
Oo wuxuu ku yiri
Iminka dabadeed
miro ha yeelan abidkaa
Oo isla markiiba
geedki berdaha ahaa
Waa uu engegay
[20]Xertiisii markey arkeen
Waa ay la yaabeen
waxaa ay ku yiraahdeen
Geedkii berdaha ahaa
durba side ayuu
Sidan ugu engegay?
[21]Ciisaa u jawaabay
Oo ku yiri iyagii
waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
haddii aad rumaysaan
Oo aanad shakiyin
Wixii ku dhacay geed berdaha
Oo keliya maad fasheen
oo weliba haddii aad
Buurtan aad ku tiraahdaan
ruq oo badda isku tuur
Way idiin noqonaysaa

[22]Oo wax kasta oo aad
Tukasho aad ku baridaan
idinkoo rumaysan
Way idiin ahaan

## Ciise Waxaa Wax Laga Weyddiiyey Amarkiisii

[23]Macbudkii markii uu galay
intuu wax baraayay
Wadaaddadii sare iyo
waayeelladi dadka ayaa
Isagii u yimidoo
waxaa ay ku yiraahdeen
Amarkee ayaad adigu
waxan aad ku samayn?
Yaase ku siiyey amarkaas?
[24]Ciisaa u jawaabay
Oo ku yiri iyagii
Hal aan idin weyddiiyo
Taas haddaad ii sheegtaan
anna waan idiin sheegi
Amarka aan anigu
waxaan aan ku samayn
[25]Xaggee ayuu ka yimid
Yooxanaa kii ahaa
Baabtiiski uu lahaa?
Xaggaa iyo jannada
Mise xagga aadanaha?
Dhexdooda ayay doodeen
Iyagoo oranaya
in uu jannada ka yimid
Haddii aan qirano
wuxuu inna leeyahay
Maxaadna u rumaynina
[26]Haddii aynu dhahno

Xagga aadanaha
dadkaas aadka u badan
Iyagaan ka baqaynaa
sidii nebi oo kale
Ayay Yooxanaa u haystaan
27 Ciisey u jawaabeen
Oo ku yiraahdeen
aqoon uma lihin
Wuxuu ugu jawaabay
Idiin sheegi mayo
Amarka aan waxan
aan ku sameeyo anigu

## Masaalkii Ku Saabsanaa Labadii Wiil

28 Maxay idinla tahay?
Nin ayaa lahaa laba wiil
Wuxuu u yimid kii hore
oo uu ku yiri
Wiilkaygiiyow aad
beerta canabka ah
Oo maanta ka shaqee
29 Wuxuu ugu jawaabay
Oo uu ku yiri
maya ee iga daa
Laakiin in yar ka dib
waa uu qoomamooday
Oo aaday beertii
30 Kii labaad ayuu u yimid
Oo ku yiri sidoo kale
Kolkaas ayuu ka aqbalay
Oo u yiri waan tegayaa
Sayidow iminka
Balse ma uusan tegin
31 Kee ayaa labadooda

addeecay aabbihiis?
Kii hore ayay yiraahdeen
Ciise ayaa yiri
Waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
Canshuurqaadayaasha iyo
Dhillooyinka ayaa
idinka hortiin geli doona
Boqortooyada Eebbe
32Yooxanaa idiinku yimid
Jidka xaqnimada ah
ma aadna rumaynina
Canshuurqaadayaashii iyo
dhillooyinkii ayaa
Isaga rumeeyay
Markaad aragteen kadib
Iskama aynaan qoomamayn
si aad u rumaysaan

## Masaalkii Ku Saabsanaa Beerta Canabka

33Iga maqla masaal kale
waa ayaa waxaa jiray
Nin oday reer u ah
beer canab ah beeray
Ku heeraaray oodna
waxaa uu ka dhex qoday
God macsaro ah
oo munaarad ka dhisay
Oo niman ah beeraleey
ayuu u kiraystay
Oo dal kale aaday
34Markii ay soo dhawaatay
Mira gurashadii ayuu
soo diray addoomadiis

Si ay mirihi beerta
ay ugu soo qaadaan
35 Addoomadii waxaa qabtay
beeralaydi oo
Mid waa ay garaaceen
midna waaba ay dileen
Midna waa ay dhagxiyeen
36 Addoomo kale ayuu diray
Waana ka badnaayeen
kuwii uu horuu diray
Iyagana sidii oo kale
ayay ku sameeyeen
37 Wiilkiisii ayuu
misna uu u soo diray
Isagoo u qaatay
in ay isaga Wiilkiisa
Ay maamuusi doonaan
38 Beeralaydi markii ay
Wiilkii ay arkeen
waxay isku yiraahdeen
Kan ayaa ah kii lahaa
dhaxalka aabbihiis
Kaalaya aan dilnee
dhaxalkiisa qaadannee
39 Isagii ayay qabteen
waxaa ay ku tureen
Beerti canabka ahayd
meel dibadda ka ah
Waana ay dileen
40 Marka uu yimaad
Sayidka iskalahaa
beertaa canabka ah
Muxuu uu ku samayn
beeralayda iga ah?
41 Waxay ugu jawaabeen
nimankaas sharka ah

Si baas ayuu isagu
u baabin doonaa
Beerta canabka ahna
wuxuu u kiraysan
Beeraley kale oo
iyagaas aan ahayn
Kuwo siin isaga
mirihii usoo go'a
42 Ciise ayaa ku yiri
Qorniinka ma ka akhriseen
Dhagaxii ay diideen
kuwa dhiseyaasha ah
Ayaa noqoday madaxa
rukunka ahaa
Arrintan iyada ahi
xagga Rabbi ayay
Ka timid iyadu
yaab ayayna ku tahay
Indhahayaga
43 Waxaan idinku leeyahay
Boqortooyada Eebbe
La idinka qaadi doonaa
oo waxaa la siin
Dad iyagu bixiya
miraha ay leedahay
Boqortooyada Eebbe
44 Oo kan dhagaxan ku dhacaa
Ayaa jejebi doona
oo kan uu ku dhacana
Waa uu burburin doonaa
45 Wadaaddadi sare iyo
Farrisiintii markii ay
ay maqleen masaallada
Waxaa ay garteen
in uu iyaga ka hadlay
46 Goortii ay dooneen

in ay isaga qabtaan
Dadkii badnaa ayay
uga baqeen isaga
Waxaa ay u haysteen
in uu isagu nebi yahay

## Masaalka Ku Saabsan Casuumaadda Arooska

**22** Ciise ayaa mar kale
u jawaabay iyagii
Isagoo masaallo
kula hadlay iyagii
Waxaa uu ku yiri
2 Jannada boqortooyo ah
Waxaa ay la mid tahay
sidii boqor u dhigay
Wiilkiisa aroos
3 U diray addoomadiisi
In ay u yeeraan
inta lagu casuumay
Arooska inankiisa
balse ma aanay doonayn
In ay yimaadaan
4 Haddana addoomo kale
Ayuu u diray iyagii
oo wuxuu ku yiri
Dadkii aan u yeeray
iyaga u sheega
Bal eegga cuntadii
waa aan diyaariyay
Dibiyadaydi iyo weliba
neefafkii ahaa shilis
Waa ay qalan yihiin
wax walbana aniga

Waa iga diyaare
ee arooska kaalaya
[5]Waa iska fududaysteen
oo iska tageen
Mid beertiisuu aaday
midna aaday ganacsigiisi
[6]Kuwii kalena addoomadii
ayay soo qabteenoo
Dil iyo caay isugu dare
[7]Boqorkii ayaa maqlay
Waana uu carooday
askartiisi u diryoo
Baabi'iyay iyagii
kuwii dilay addoomadi
Oo magaaladoodii
dab ayuu ku daaray
[8]Waxaa uu ku yiri
isaga addoomadiisii
Waa diyaar arooskii
kuwii aan u yeeray
Ma ay istaahilin
[9]Isgoysyada wadada taga
Hadba inta aad heshaan
ugu yeera arooska
[10]Markaas ayaa addoomadi
u baxeen waddooyinka
Oo ay soo ururiyeen
intii ay heleenba
Kuwii sharka lahaa iyo
intii wanaagsanaydba
Gurigii arooskana
marti ayaa buuxisay
[11]In uu eego martida
boqorkii u soo gal
Waxaa uu ku arkay
dharkii arooska

Nin aanba qabinba
[12]oo wuxuu ku yiri
Saaxiibow sidee ayaad
halkaan u soo gashay
Adiga oo aan qabin
dharkii arooska?
Wuuna iska aamusay
[13]Markaas ayuu boqorkii
Adeegayaashii ku yiri
gacmaha iyo lugaha
Inta aad ka xirtaan
gudcurkaas dibadda ah
Inta aad ku tuurtaan
waxaa u jiri doonta
Baroor ilko jirriqsi leh
[14]Waayo kuwo badan ayaa
Loo yeeray iyaga
in yarse la doortay

## Wax Ku Saabsan Canshuurta La Siiyo Kaysar

[15]Farrisiinti ayaa baxay
waxaa ay ka showreen
Si ay Ciise hadalkiisa
ugu qaban lahaayeen
[16]Waxaa ay soo direen
iyaga xertoodii
Herodosiinti ayaa
iyagii la socday
Waxaa ay ku yiraahdeen
Waan ognahay Macallimow
In aad runlow tahay
oo aad jidka Eebbe
Dadka aad run u bartid
midna aad u eexan

Oo marna ma eegtid
wejiga dadka adigu
17 Bal innaga innoo sheeg
siday adiga kula tahay
In canshuur la siiyo Kaysar
ma arrin banaan baa?
18 Ciise arag shartoodii
waxaa uuna ku yiri
Maxaad ii jirrabaysaan
labawejiile ayaad tihiin
19 I tusa lacagta canshuurta
dinaar ayay u keeneen
20 Wuxuu ku yiri iyagii
sawirkan iyo qorniinkaan
Horta yaa iska leh?
21 Kaysar, ayay yiraahdeen
Wuxuu ugu jawaabay
Kaysar siiya idinku
Kaysar wixii uu leeyahay
Eebbena siiya wixii
Uu Eebbe leeyahay
22 Saas markii ay maqleen
Inta ay yaabeen
ayay isaga tageen

## Sarakicidda Kuwii Dhintay

23 Waxaa u yimid maalintaas
Sadukiin kuwii ahaa
Kuwii oran jiray
wax jira ma ahan
In uu sarakaco
qof hadduu mar uu dhinto
Oo waxay weyddiiyeen
24 oo ku yiraahdeen

Macallimow, Muuse ayaa yiri
haddii nin uu dhinto
Isagoon caruur lahayn
walaalkiis ha dumaalo ooridiisa
Ha u dhalo caruuroo
[25]Waxaa innaga nala jiray
Toddoba walaalo ah
kii ugu horreeyay
Ayaa horta guursaday
waana uu ka dhintay
Dhalna kama uu tegin
walaalkii ayaana
Ooridiisi dumaalay
[26]Sidaas ayaa ku dhacday
Kii labaad iyo
iyo kii seddaxaad
Illaa kii toddobaad
[27]Waa ay wada dhinteen
Ooridiina dhimatay
[28]Marka ay sarakacaan
Toddobaday u dhaxday
kumay ooridiis noqon?
Waayo iyaga dhammaantood
way u wada dhaxday
[29]Laakiin Ciise u jawaab
oo ku yiri iyagii
Wax ayaa idinka qaldan
Qorniinka ayaadna garanayn
Iyo awoodda Eebbe
[30]Marka uunku sarakaco
Geeri ay ka toosaan
la iskuma guursado
Guurna la isma siiyo
malaa'igta Eebbe
Ee ku jira jannadiisa
oo kale ayay noqon

[31]Sarakicidda iyada ah
ma akhrina miyaa
Wuxuu Eebbe idinku yiri
markii uu lahaa
[32]Anigu waxaan ahay
Eebbaha Ibraahiim
Iyo Eebbaha Isxaaq
iyo Eebbaha Yacquub
Eebbaha kuwa dhintay
ma ahan isagu
Waa Eebbaha kuwa nool
[33]Dadkii aad u yaabyay
Markii ay maqleen
siduu wax u barayay

## Qaynuunka Ugu Weyn

[34]Farrisiintii ayaa maqlay
in uu aamusiiyey
Sadukiinti isu timid
ayay isu yimaadeen
[35]Sharciga mid bartay ayaa
wax weyddiiyey isaga
Isagoo jirrabaya
waxaa uu ku jiri
[36]Macallin bal ii sheeg
sharciga isaga ah
Qaynuunkeebaa ugu weyn?
[37]Wuxuu ugu jawaabay
Rabbiga Eebbahaaga
qalbigaaga oo dhan
Waa in aad ka jeclaataa
naftaada oo dhan
Aqligaaga oo dhan
[38]Qaynuunkan ayaa ugu weyn

Oo ugu horreeya
[39]Ku labaad ayaa u eg
Waxaa uuna leeyahay
deriskaaga u jeclow
Sida naftaada oo kale
[40]Sharcigii oo dhan
Iyo nebiyadiiba
labadan ah qaynuun
Ayay suran yihiin

## Wax Masiixa Ku Saabsan

[41]Markii ay Farrisiintii
ay isu yimaadeen
Ayaa Ciise wax weyddiiyey
[42]oo wuxuu ku yiri
Masiixa isaga ahi
yuu idinla yahay?
Waa ina ayo?
Waxay ugu jawaabeen
Waa ina Daa'uud
[43]Wuxuu ku yiri iyagii
Haddaba sidee ayuu
Ruuxa Rabbi ugaga yeeray
Daa'uud isagu?
Isagoo oranaya
[44]Rabbiga ayaa ku yiri
Sayidkayga aniga
Bal fadhiiso adigu
midigteyda aniga
Illaa aan cadawgaaga
aan cagtaada hoos dhigo
[45]Haddii uu Daa'uud
uu ugu yeeray Sayid
Sidee ayuu ku noqon

wiilkiisa isaga?
[46]Ninna uma jawaabin
oo maalintaas dabadeed
Ninna kuma dhicin inuu
su'aal ula yimaado

## Ciise Ayaa Canaantay Culimmadii Iyo Farrisiintii

**23** Intaas kadibna
Ciise ayaa la hadlay
Dadkii aadka u badnaa
iyo xertiisii
[2]Oo wuxuu ku yiri
Culimmo iyo Farrisiin
Waxaa ay ku fadhiistaan
ayaa ah kursiga Muuse
[3]Wax kasta ooy sheegaan
waa in aad dhawrtaan
Dhawra oo yeela
innaba ha sameeynina
Waxa ay sameeyaan
waayo waxa ay leeyihiin
Ma ay sameeyaan
[4]Culaabo culculus ayay
Isku xirxiraan
Dadka ayay garbahooda
Ay culayska saaraan
balse ma ay doonayaan
In ay culayskaas
far ay ku dhaqaajiyaan
[5]Waxay u shuqloodaan
waxna ay u sameeyn
Dadku in uu arko uun
waxa ay ballaariyaan

Xirsiyada ay xirtaan
oo faraqa dharkoodana
Waa ay weyneeyaan
[6]waxaa ay jecel yihiin
In ay fadhiistaan
safka ugu horreeya
Casuumaad marka ay tahay
iyo in ay fadhiistaan
Kuraasta u horreeysa
sunagog ay joogaan
[7]Iyo salaanta suuqa
iyo in loogu yeero
Macallin, ayay jecel yihiin
[8]Ha aqbalina
In ay Macallin
dadku idinku yeeraan
Waayo mid ayaa uun
macallinkiinna ah
Idinkuna kulligiin
walaalo ayaad tihiin
[9]Dhulka mid idinla joogaa
aabbe ha ugu yeerina
Waayo mid baa Aabbihiin ah
Aabbahaas isaga ah
Jannada ayuu ku jiraa
[10]Yaan la idinku yeerin sayiddo
Waayo mid ayaa ah
idinka sayidkiinna
Kaasna waa Masiixa uun
[11]Kan idinkugu weyn
Ha idiin adeego
[12]Kii isi sarraysiiya
Hoos ayaa loo dhigayaa
kii is-hoosaysiiya
Kor ayaa loo qaadayaa
[13]Laakiin waa idiin hoog

Culimmo iyo Farrisiin
labawejiile ayaad tihiin
Sababta ayaa ah
dadka ayaad ka xirtaan
Boqortooyada jannada ah
idinku ma aad gashaan
Oo kuwa gelayana
uma aad daysaan
Si ay u galaan
14 Waa idiin hoog idinka
Culimmo iyo Farrisiin
labawejiile ayaad tihiin
Waxa aad laysataan
aqalada carmallada
Tukashooyin dhaadheer ayaad
istusin u tukataan
Arrimahan dartood
waxa aad heli doontaan
Xisaab aad u daran
15 Culimmo iyo Farrisiin
Waa idiin hoog
labawejiile ayaad tihiin
Waxa aad wareegtaan
bad iyo dhul
In aad mid soo haddaysaan
oo kolkuu sidaa noqdo
Waxaa aad ka dhigtaan
ilmo jahannamo
Laba kol in ka badan idinka
16 Waa idiin hoog idinka
Hoggaamiyayaalka ah
oo indhaha la'u
Oo leh kii ku dhaartaa macbudka
waxba ma aha
Balse haddii uu ku dhaarto
dahabka ah macbudka

Dhexdiisa kan yaalla
Wixii uu ku dhaartay
ayaa lagu leeyahay
17 Doqonno yahow indha la'u
midkee ayaa weyn
Dahabka iyo macbudka?
Macbudka ayaaba
Dahabka yaala aaggaas
ka dhiga qudduus uun
18 Weli waxaa aad leedihiin
Ku alla kii ku dhaarta
Meesha allabariga
wax ma ahan dhaartiisu
Haddii uu ku dhaartase
hadiyadda oogada ka saran
Wixii uu ku dhaartay
ayaa lagu leeyahay
19 Indhoolayaal yahow
haddee kee ayaa weyn
Haddiyadda iyo
meesha allabariga
Iyadaaba ka dhigta
qudduuska uu yahay
20 Meesha allabariga
hadba kii ku dhaarta
Iyaduu ku dhaartaa
iyo wixii dul saran
21 Marka aad macbudka
aad ku dhaaranaysaan
Waxa aad ku dhaaran
macbudka iyo weliba
Kan isaga dhex deggan
22 Marka aad jannada
Aad ku dhaaranaysaan
waxa aad ku dhaaran
Carshiga Eebbe iyo

Eebbaha ku dul fadhiya
[23]Waa idiin hoog
Culimmo iyo Farrisiin
Labawejiilayaasha ah
waayo idinku
Reexaan iyo kabsar
iyo kamuunta ayaad
Toban meelood ayaad meel
aad ka bixisaan
Waxa aadna dhaaftaan
wixii ugu cuslaa
Sharciga oo dhan
waxa ayna yihiin
Caddaalad iyo naxariis
iyo weliba iimaan
Waxaa idinku waajiba
waxan in aad samaysaan
Wixi kale oo idil
idinka oon ka tageynin
[24]Kuwiina indhaha la'a
hoggaamiyeyaal ahow
Kaneecaad iska miirtaan
awrna waad liqaysaan
[25]Culimmo iyo Farrisiin
waa idiin hoog idinka
Labawejiilayaasha ah
koobka iyo saxanka
Dusha ayaad ka mayrtaan
gudahooda eega
Cir weyni iyo damac badan
ayaa ka buuxa
[26]Farrisiyahow indhaha la'u
marka ugu horraysa
Horta waa inaad adigu
gudaha aad ka nadiifisaa
Koobka isaga ah

Si ay dusha koobku
u nadiifsanaato
[27]Culimmo iyo Farrisiin
waa idiin hoog idinka
Labawejiilayaasha ah
waxa aad u egtihiin
Xabaalo ay caddeeyeen
inta dad rinji ay mariyeen
Dusha qurux uga eg
Lafo dad dhintay ayaa
Aad uga buuxa
iyaga dhexdooda
Iyo wasakh oo dhan
[28]Sidaas iyo si la mid ah
dushaad uga ekaateen
Sidii dad xaq ah oo kale
idinkasegudihiina
waxaa ka buuxa
Labawejiilenimo iyo
dembiga aad falaysaan
[29]Culimmo iyo Farrisiin
waa idiin hoog idinka
Labawejiilayaasha ah
waxa aad dhistaan xabaalaha
Nebiyadu ku aasan yihiin
waxa aad qurxisaan
Qabuuraha ay leeyihiin
kuwii xaqa ahu
[30]oo waxaad tiraahdaan
Haddii aannu joogi lahayn
waagii awowayaasheen
Qayb kama aan noqoneen
markii ay qubayeen
Dhiiggii nebiyadii ay dileen
[31]Waad isku marag furteen
In aad tihiin wiilashii

intii dishay nebiyadii
32 Idinku haddaba dhammaystira
qiyaastii awowayaashiin
33 Abeesooyin ayaad tihiin
iyo weliba dhal jilbis
Xisaabtii jahannama ahayd
sidee ayaad uga baxsan?
34 Waxaan idiin soo dirayaa
nebiyo iyo caaqillo
Iyo weliba culimmo
Qaar ayaad dili doontaan
Iskutallaab ku qodbi doontaan
sunagogyadiinna ayaad qaar
Ayaad ku karbaashi doontaan
magaalo iyo magaalo
Ayaad ku silcin doontaan
35 dushiinna inuu ku soo dego
Dhiiggii xaqa ahaa
oo dhulka ku daatay oo dhan
Kasoo bilow uun Haabiil
illeyn xaq buu ahaaye
Illaa dhiiggii Sakariye
ina Barakiyas aad ku disheen
Meesha qudduuska ah iyo
meeshii allabariga dhexdooda
36 Runtii waxaan idinku leeyahay
waxyaalahan oo dhan
Ayaa qarnigan isaga ah
ayaa ku dul degi doona

## Ciise Ayaa U Ooyay Yeruusaalem

37 Yeruusaalemay
Yeruusaalemay
Nebiyada ayaad dishaa

kuwa adi laguu soo diray
Ayaad dhagxisaa!
Intee baan marar badan
Aan anigu jeclaaday
Inaan carruurtaada
u soo ururiyo uun
Sida ay digaaggaddu
ay baalasheeda
Ugu hoos ururiso
balse ma aydnaan jeclaysan
38Gurigiinnii isagoo cidla ah
waa la idiin daayay
39Waxaan idinku leeyahay
ima arki doontaan
Iminka dabadeed
illaa aad ka tiraahdaan
Waa uu barakaysan yahay
kan ku imanaya
Magaca Eebbe

## Ciise Ayaa Sii Sheegay Dumidda Macbudka

24 Ciise ka bax macbudka oo
intii uu tegayay
Ayaa xertiisii u timid
waxa ay doonayeen
In ay tusaan isaga
dhismaha ah macbudka
2Laakiin wuu u jawaabay
oo wuxuu ku yiri
Miyaydnaan arkaynin
waxyaalahan oo dhan?
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah

Halkan ayaan lagu daynin
dhagxaan is dulsaaran
Oo aan la dumin doonin

## Dhibaatooyinka Imanaya

3Buur Saytuun ayuu
dusha uu ka fadhiistay
Xertii ayaa u timid
iyagoo keli ah
Waxaa ay ku yiraahdeen
innoo sheeg goorta ay
Waxani iman doonaan
oo calaamada imaatinkaaga
Iyo dhammaadka wakhtiga
maxaa ay ahaan
Dunidan iyada ah?
4Ciisaa u jawaabay
Oo ku yiri iyagii
iska eega idinku
Yaan la idin qiyaamayn
5Qaar aad u farabadan
Ayaa magacayga
ku iman doonee ogaada
Oo waxay oran doonaan
Waxaan ahay Masiixa
Qaar aad u tiro badan
ayay qiyaamayn
6Oo waxaad maqli doontaan
dagaallo iyo weliba
Hadalhayn dagaallo ah
iska jira oo ha baqina
Waxaasi waa in ay dhacaan
balse waxaa weli ah
Dhammaadka imaatinkiisa

[7]Quruunba quruun ayay
Ay ku kici doontaa
boqortooyo iyaduna
Boqortooyo kale uun
meelo kala duwan ayaa
Abaaro iyo dhulgariir
ayaa ka dhici doona
[8]Waxaas oo dhammi
bilow u ah hooggaga
[9]Markaas ayaa idinka
la idin dhibi doonaa
Oo la idin dilayaa
oo magacayga aawadiis
Quruumaha oo dhammi
idiin necbaan doonaan
[10]Xiligaas isaga ah
qaar aad u badan
Ayaa xumaan doona
midba mid ayuu
U gacangelin caddawga
wayna is nebcaanayaan
[11]Nebiyo badan oo been ah
ayaa kici doona
Qaar aad u badan
ayay qiyaamayn
[12]Dembiga ayaa badnaan
taas aawadeed
Qaar aad u badan
jacaylkooda ayaa yaraan
[13]Laakiin kii adkaysta
illaa iyo dhammaadka
Kaas ayaa badbaadaya
[14]Oo injiilka boqortooyada
Ayaa lagu wacdin
dunida oo dhan
In uu marag u noqdo

quruumaha oo dhan
Intaas kadibna
dhammaadka ayaa iman
[15]Goorta aad aragtaan
waxa baaska ah
Ee hallaynta ah
ee nebi Daanyeel
Isaga loo waxyooday
isaga oo taagan
Meesha qudduuska ah
(kii akhriya ha garto)
[16]Markaas isaga ah
Yuhuudiya inta joogta
Ha u carareen buuraha
[17]Oo guri kii fuushanna
Yuusan usoo degin
si uu u qaato
Alaab taala gurigiisa
[18]Inta beerta joogtana
Dib yaanay usoo noqon
si uu dharkiisa
Horay ugu soo qato
[19]Laakiin waa u hoog
Kuwa uurka leh
iyo kuwo wakhtigaas
Ilmo nuujinaaya
[20]Barya inaan cararkiinnu
Wakhti qabow uusan noqon
ama maalin Sabti ah
[21]Wakhtigaas isaga ah
dhib aad u weyn
Ayaa dhici doona
kaas oon horay u dhicin
Illaa bilowgi dunida
illaa iyo manta
Dibna aan u dhici doonin

22 Haddii aan la gaabin
Wakhtigaas isaga ah
cidna ma ay badbaaddeen
Kuwa la doortay aawadood
ayaa wakhtigaas
Ayaa loo gaabinayaa
23 Wakhtigaas isaga ah
Haddii la idinku yiraahdo
Kan ayaa Masiixii ah
Ama waakan Masiixii
idinku ha rumaynina
24 Sababta ayaa ah
in ay kici doonaan
Masiixiyiin been ah
iyo nebiyo aan run ahayn
Waxa ay samayn doonaan
calaamooyin waaweyn ah
Iyo weliba yaabab
si kuwa la doortay
Ay xitaa qiyaamaan
haddii ay karayaan
25 Bal eega idinku
horaan idiinku sheegay
26 Sidaas aawadeed
hadday idinku yiraahdaan
Bal eega idinku
cidlada ayuu joogaa
Marna ha u bixina
Bal eega isaga
Waxaa uu joogaa
qolal qarsoodi ah
Midna yuu rumaysan
27 Sida uu hillaacu
Bari uga yimaado
oo uu u ifiyo
Illaa galbeedka

sidaas oo kale
Ayaa imaatinka
Wiilka Aadanuhu noqon
28 Meel allliyo meeshii
uu bakhtigu yaalo
Haadka bakhti cunka ahi
uu isugu iman

## Imaatinka Wiilka Aadanaha

29 Dhibka ayaantaas kadib
si dhaqsi aada leh
Cadceeddu u madoobaan
dayaxna uusan nuureyn
Xiddigaha iyaguna
cirka ayay ka soo dhici
Awoodaha cirkana
waa ay gariiri doonaan
30 Cirka ayaa markaas
waxaa isna ka muuqan
Wiilka Aadanaha
calaamadaha uu leeyahay
Markaas ayaa haddaba
iyagu barooran doonaan
Qolooyinka dhulka oo dhan
waxay arki doonaan
Wiilka Aadanaha oo
oo daruuraha cirka
Ku imanaya isagoo
xoog weyn iyo ammaan leh
31 Wuxuu isagu soo diri
malaa'igihiisa oo wata
Buun aad u weyn
oo kuwuu doortay isagu
Ayay ka soo ururin

afarta jihood e
Cirka Meesha ugu fog
illaa meesheeda kale

## In La Soo Jeedo Ayaa Loo Baahan Yahay

[32]Iminkadan la joogo
geedka berdaha ah
Ka garta masaal uun
Inta ay laantiisu
Ay curdin tahayoo
ay caleen bixinayso
Waxaa aad garanaysaan
in roobku dhaw yahay
[33]Idinku saas oo kale
goorta aad aragtaan
Waxaan oo dhan
garta in uu dhaw yahay
Oo uu albaabada
agahooda joogo
[34]Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Qarnigan ayaan idlaan
inta waxaan oo dhan
Aanay dhicinba
[35]Cirka iyo dhulku
Waa idlaan doonaan
laakiin erayadaydani
Ma idlaan doonaan
[36]Maalintaas iyo saacaddaas
Ninna waxba kama oga
malaa'igaha jannada iyo
Wiilka Aadanahuba
midna ma ogaan karaan

Aabbahey keliya mooyee
37Wakhtigii Nuux oo kale
Ayuu ahaan doonaa
Wiilka Aadanaha
Isaga imaatinkiisa
38Sidey wax u cunayeen
Oo wax u cabbayeen
oo u guursanaayeen
Oo loogu guurinaayay
Intuusan dhicin daadkii
Illaa doonta gudaheeda
uu Nuux ka gelayay
39Oo ma aanay garan
illaa daadki uu yimid
Wada qaaday iyagii
sidaas oo kale
Ayuu ahaan doonaa
Wiilka Aadanaha
Imaatinkiisu isaga
40Wakhtigaas isaga ah
Laba nin ayaa
beerta ku jiri doona
Mid ayaa la qaadi
oo kan kaleetana
Waa laga tegaayaa
41Laba dumara ayaa
Iyagoo dhagax
ay wax ku shiidanaayaan
Mid ayaa la qaadi
oo tan kaleetana
Waa laga tegaayaa
42Waa in aad soo jeeddaan
Waayo ma aad ogidiin
maalinta uu imanayo
Idinka Rabbigiinna
43Balse tan ogaada

Odayga reerku haddii
uu ogaan lahaa
Wakhtiga tuuggu imanayo
waa uu soo jeedi lahaa
Waayo uma ogolaadeen
in tuug jabsado
Isaga gurigiisa
44Diyaar ahaada idinku
Saacad aadan filaynin
ayuu imanaayaa
Wiilka Aadanuhu

## Masaalka Ku Saabsan Addoommadii Aaminka Ahaa iyo Kuwii Aan Aaminka Ahayn

45Addoonka aaminka ah
oo aqliga leh
Waa kuma isagu
kan uu sayidkiisu
Dadka aqalkiisa
u sarreeysiiyey isaga
In wakhtigeeda
uu siiyo cuntada?
46Addoonkaas ayaa
barakaysan isagu
Kan uu sayidkiisu
marka uu yimaado
Durba uu helaayo
sidaas isagoo samayn
47Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Wuxuu leeyahoo idil
ayuu ka sarreeysiin
48Haddii addoonka sharka lihi

iska yiraahdo qalbigiisa
Sayidkaygi ayaa raagay
[49]Oo uu garaaco kuwii
Isaga la shaqaynayay
oo uu wax la cuno
Waxna uu la cabbo
ku ah sakhraanka
[50]Addoonkaasi sayidkiisu
wuxuu iman doonaa
Maalin uusan filaynin
iyo saacad uusan ogayn
[51]Waa uu kala jari doonaa
waxaa uuna ka dhigi
Mid ku weel ah kuwa
labawejiilayaasha ah
Oo halkaas waxaa jiri
baroor iyo weliba
Ilko jirriqsi

## Masaalka Ku Saabsan Tobankii Gabdhood

**25** Boqortooyada jannada ah
waxaa loo ekaysiin
Toban gabdhood oo bikra ah
iyagoo qaatay feynuus
Si ay uga hortagaan
ninka arooska ah
[2]Shantu waxay ahaayeen
kuwo doqonno ah
Shanta kale aqli
ayay wada lahaayeen
[3]Kuwii doqonnada ahaa
ayaa qaatay feynuus
Saliidna ma ay qaadan
[4]Kuwii aqliga lahaa

Iyana feynuus qaaday
iyo weliba saliid
Weelal ay ku qaateen
5 Ninkii arooska ahaa
Ayaa soo daahay
waana ay lulmoodeen
Oo ayna seexdeen
6 Qaylo ayaa saqdii dhexe
Isu wada yeertay
Arooskii waa soo socdaaye
Soo baxa oo ka hor taga
7 Kolkaas ayay iyagii
Bikradihii oo dhan
soo wada kaceen oo
Feynuus ay diyaarsheen
8 Doqomada kuwii ahaa
Waxaa ay ku yiraahdeen
kuwii aqliga lahaa
Idinka saliiddiinna
wax innaga siiya
Way innaga demayaan
innaga feynuusyaduye
9 Kuwii aqliga lahaa
ayaa u jawaabay
Oo waxay ku yiraahdeen
mayee raali ahaada
Waaba intaasoo
idinka iyo innaga
Ayba nagu filnaane
bal u taga idinku
Kuwa saliidda iibiya
oo ka soo iibsada
10 Markii ay tageen iyagu
si ay u soo iibsadaan
Ninkii arooska haa
waaba uu yimaaday

Kuwii diyaarka u ahaa
ayaa la galay aqalkii
Arooska loo habeeyay
albaabkiina la xir
11 Bikradihi kale ayaa
iyana kolkaa yimid
Oo waxay yiraahdeen
Sayidow, Sayidow
Innaga fur aqalka
12 Waxaa uu ku yiri
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Anigu idinma garanayo
13 Haddaba idinku soo jeeda
Waayo ma garanaysaan
maalinta ama saacadda

## Masaalka Ku Saabsan Talantiyaasha

14 Sababta ayaa ah
nin tegaya oo kale
Oo aadaya dal kale
una yeeray addoommadiisii
Xoolihiisii u dhiibay
15 Mid ayuu siiyey shan talanti
Midna laba ayuu siiyey
midna mid ayuu siiyey
Mid kastaba awooddiis
ayuu wax u siiyey
Waana uu ka dhoofay
16 Oo isla markiiba
Addoonkii shanta helay
ayaa intuu tegay
Lacagtii ayuuna
uu ku galay ganacsi

Waxaa uuna faa'iiday
shan talanti oo kale
[17]Sidaas oo kalena
addoonkii labada helay
Laba kalena ayuu
isna ku helay faa'iido
[18]Addoonkii midka helayna
dhulka inta qoday
Ayuu wuxuu xabaalay
lacagtii uu lahaa
Isaga sayidkiisu
[19]Muddo dheer kadib ayaa
Sayidkii addoomada
ayaa intuu yimid
Ka xisaab qaaday iyagii
[20]Addoonkii shanta helay
Ayaa intuu yimid
shan talinti oo kale
Ayuu u keenay sayidkii
oo wuxuu ku yiri
Sayidkaygi anigow
waxaa aad ii dhiibtay
Shan talanti ee eeg
shan talanti oo kale
Ayaan ka faa'iiday
[21]Sayidkiisi ayaa yiri
Sida aad yeeshay
waa si wanaagsan
Addoon yahow wanaagsan
oo aaminka ah
Wax yar ayaadna
ku noqotay aamin
Wax intii ka badan
madax kaaga dhigay adi
Farxadda sayidkaaga uun
bal gal adigu

22 Addoonkii labaadee
ee helay laba talanti
Isna waa uu yimidoo
sayidow ayuu yiri
Laba talanti ii dhiibtay
waxaa aan faa'iiday
Laba talanti oo kale
23 Sayidkiisii ayaa yiri
Sida aad yeeshay
waa si wanaagsan
Addoon yahow wanaagsan
oo aaminka ah
Wax yar ayaadna
ku noqotay aamin
Wax intii ka badan
madax kaaga dhigay adi
Farxadda sayidkaaga uun
bal gal adigu
24 Talanti oo qura
addoonkii helayna
Inta uu u yimid
ayuu ku yiri, Sayidow
Waa aan garanayay
qalbigaaga engegan
Oo aad wax ka guratid
meel aanad ku beeran
Waxna aad ka urursatid
meel aanad ku firdhin
25 Anna waa aan baqayoo
inta aan iska tegay
Ayaan talantigaagii
dhulka aan ku aasay
Bal eeg, waa kan kaagii
26 Sayidkii u jawaab
Oo ku yiri isagii
Addoon sharleh ayaad tahay

Oo weliba caajis ah
waad ogayd miyaa
In aan wax ka gurto
meel aanan ku beeran
Oo aan ka urursho
meel anan ku firdhin
27Waxay kuu ahayd adi
in aad u dhiibto lacagta
Bangiyada iyaga ah
marka aan soo laabto
Faa'iido iyo lafaha
ayaan qaadan lahaa
28Inta ka qaaddaan talantiga
waxaa aad u dhiibtaan
Addoonka haaya tobanka
29Mid kasta oo wax haystaa
Waa la siin isaga
waana loo kordhin isaga
Kii aan wax haysanna
intuu haysto isagu
Ayaa laga qaadayaa
30Addoonkan aan waxtar lahayn
Waxa aad ku tuurtaan
gudcurka dibadda ah
Waxaa jiri un meeshaas
ilko jirriqsi
Iyo baroore

## Maalinta Xisaabta

31Wiilka Aadanahu
goortuu ku imanayo
Isaga ammaantiisa
isaga oo malaa'igaha
Oo wada dhan gebigood

markaas ayuu
Uu ku fadhiisan doonaa
carshiga ammaantiisa
32 Quruumaha oo dhan
ayaa isaga hortiisa
Lagu ururin doonaa
isagoo u kala sooci
Arijiraha oo kale
siduu u kala sooco
Idaha iyo riyaha
33 Idaha ayuu joojin
Isaga midigtiisa
oo riyahana bidixdiisa
34 Markaas ayuu Boqorku
Inta joogta midigtiisa
Ayuu ku oran doonaa
War idinku kaalaya
Kuwa uu barakeeyay
Aniga Aabbahay
oo dhaxla boqortooyadan
Tan la idiin diyaariyay
illaa aasaaski dunida
35 Aniga oo gaajoon
cunto ayaad i siiseen
Aniga oo harraadsan
ayaad i waraabiseen
Aniga oo qariiba
ayaad i soo dhaweeyseen
36 Aniga oo qaawan
ayaad dhar i huwiseen
Anigu waan bukay
oo waad i soo booqateen
Anigu xabsi baan ku jiray
oo waad ii timadeen
37 Kuwa xaqa ah ayaa
u jawaabi isagoo

Iyagoo oranaya
Goormeen ku aragnay, Sayidow
Adigoo gaajaysan
oon cunto ku siinnay
Ama adigoo harraadsan
oon biyo ku siinnay?
38Goormee ayaan ku aragnay
adigoo qariib ah
Oon ku soo dhawaynay
ama adigoo qaawan
Oo aan dhar ku huwinnay?
39Goormee ayaan ku aragnay
Adiga oo buka ama
adigoo xabsi ku jira
Oo aannu kuu nimid?
40Boqorkaa u jawaabi
Oo ku oran doona
waxaan idinku leeyahay
Oo runtiina iga ah
in alla iyo intii
Aad u samayseen
mid kastoo ka mid ah
Aniga walaalahayga
midkan u yar iyaga
Anigaad ii samayseen
41Markaas ayuu isagu
Inta joogta bidixdiisa
ayuu ku oran doonaa
Kuwiinan inkaaran
iga taga oo gala
Dabka weligiis ah
kan Ibliiska iyo
Malaa'igihiisa isaga
loo diyaariyay uun
42Aniga oo gaajaysan
cunto ima siinina

Aniga oo harraadsan
ima aad waraabina
43 Aniga oo qariib ah
ima aydnaan soo dhawayn
Aniga oo qaawan
dhar imaadna huwinina
Markii aan anigu bukay
xabsi markii aan galay
Imaad soo booqanina
44 Iyaguna ku jawaabi
Oo ay oran doonaan
Sayidow adiga
Goormeen ku aragnay
adigoo gaajaysan
Adigoo harraadsan
adigoo qariib ah
Adigoo qaawan
adigoo buka
Ama xabsi ku jira
oo aan diidnay in aan
Ku kaalmeyno adiga?
45 Markaas ayuu u jawaabi
oo uu ku oran doonaa
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
In alla iyo intii
aad u samayn weydeen
Mid ka mid ah kuwaan
u yar yar iyagu
Aniga ayaadba
ii samayn weydeen
Kuwan ayaa geli doona
taqsiirta weligeed ah
Kuwa xaqa ahuse
waxaa ay geli doonaan
Nolosha weligeed ah

## Shirqoolkii Ciise Loo Dhigay

**26** Markii uu Ciise dhammeeyay
hadalladan oo dhan
Ayuu xertiisii ku yiri
2 Waxaa aad ogtihiin
In laba maalmood kadib
ay tahay Iiddii
Kormaridda ahayd
oo Wiilka Aadanaha
Ayaa loo gacangelin
in iskutallaabta
Lagu qodbo isaga
3 Wadaadaddii sare iyo
Waayeellada dadka
waxay isku ururusadeen
Barxaddi uu lahaa
wadaadka sare ee Kayafas
Kii la oran jiray
4 Oo waxay ka wada hadleen
Sidii ay Ciise qiyaano
ugu qaban lahaayeen
Una dili lahaayeen
5 Waxse ay yiraahdeen
Wakhtiga Iidda yey noqon
si aysan rabshadi
Dadka uga dhex kicin

## Ciise Oo Lagu Subkay Beytaniya

6 Ciise markii uu isagu
uu joogay Beytaniya
Oo guriga Simoon
baraslaha ahaan jiray
uu ku jiray isagu

[7]Waxaa u timid naag
Oo weel ku sidata
alabastar udgaya
Cadar qaaliyana ah
waxaa ay ku shubtay
Isaga madaxiisa
intuu cuntada u fadhiyay
[8]Xertii markey arkeen
waaba ay caroodeen
Oo waxay yiraahdeen
Khasaaradan bal eega
[9]Cadarkan ayaa ku jooga
qiima aad badan
Waxaa loo iibin karay
masaakiin aan yarayn
[10]Ciise ayaa gartay
oo ku yiri iyagii
Naagta maxaad u dhibaysaan?
Arrin aad u wanaagsan
Ayay ii samaysay
[11]Masaakiinta ayaa ah
Kuwa idinla jooga
mar kastey ahaataba
Balse anigu mar walba
idinlama joogo
[12]Cadarkan ayay
ay jirkayga ku shubtay
In ay aaskayga
ii diyaariso uun
[13]Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Dunidan oo dhan
meel alla meeshii
Injiilkan lagu wacdiyo
waxa ay samaysay
Iyada xusuusteeda
ayaa looga hadlayaa

## Khiyaanadii Yuudas

14 Mid laba iyo tobankii
ka mid ahaayoo
Oo Yuudas Iskariyod
la oran jiray
Ayaa wadaaddada sare
inta uu u tegay
15 Ayuu ku yiri iyagii
War maxaad aniga
I siin karaysaan?
Anna waxaan samayn
In aan isaga
idiin gacangeliyo
Oo waxay siiyeen
sodon lacag gogo' ah
16 Markaas ayuu doonay
xilliga ugu wanaagsan
Oo uu gacangeliyo

## Cashadii Ugu Dambaysay

17 Maalintii ugu horraysay
Oo liddii Kibistii
Aan khamiirka lahayn
xertiisii ayaa Ciise
Isagii u timid
waxaa ayna yiraahdeen
Xaggee ayaad dooni
in aan ku diyaarinno
Si aad u cuntid
Cashada Iidda Kormaridda?
18 Waxaa uu ku yiri
Magaalada gala oo
Oo hebel u taga

oo ku dhaha isaga
Macallinkii ayaa yiri
wakhtigaygii ayaa dhaw
Gurigaaga adiga
cashada Iidda Kormaridda
Ayaan kula samaysan
aniga xertayda
[19]Xertii ayaa samaysay
sidii Ciise ku amray
Cashadi Iidda Kormaridda
ayay diyaargareeyeen
[20]Makhribkii markay ahayd
laba iyo tobankii
Ee xerta ahaa ayuu
cunto ula fadhiistay
[21]Oo intay wax cunayeen
ayuu ku yiri iyagii
Waxaan idinku leeyahay
oo runtiina iga ah
Midkiin ayaa aniga
i gacangelin doona
[22]Markaas ayay aad iyo aad
u caloolxumaadeen
Oo waxay billaabeen
in mid kastaa isagii
Uu ku yiraahdo isagii
Sayidow ma anigaa?
[23]Wuu u jawaabay
oo wuxuu ku yiri
Kii saxanka aniga
ila geliya gacanta
Kaas ayaa aniga
i gacangelin doona
[24]Waa uu baxayaa
Wiilka Aadanuhu
Sida ay u qoran tahay

hoog ayuuse leeyahay
Ninka Wiilka Aadanaha
gacangeliya isaga
Ninkaas waxaa u wanaagsan
in uusan dhalanba
[25]Yuudas oo ah ninkii
isaga gacangeliyay
Ayaa u jawaabay
oo ku yiri isagii
Sayidow ma anigaa?
Adiga ayaa yiri
Ayuu ugu jawaabay
[26]Oo intay wax cunayeen
Ciise kibis ayuu qaaday
oo uu barakeeyay
Inta uu jejebiyay
ayuu siiyey xertiisii
Oo ku yiri iyagii
Qaata oo cuna
Waa aniga jirkaygii
[27]Koobkii ayuu qaaday
Waana uu mahadnaqay
oo siiyey iyagii
Oo wuxuu ku yiri
idilkiinba koobkaan
Waa in aad ka cabtaan
[28]Waa aniga dhiiggey
Axdiga cusub ah
oo dhiiggan kuwo badan
Loo daadshay isaga
oo dembidhaafkooda
Loo daadshay aawadiis
[29]Waxaan idinku leeyahay
Iminkadan kadib
kama aan cabbi doono
Miraha geedka canabka ah

illaa iyo maalinta
Aan iyada oo cusub
idinkula cabbayo
Boqortooyadda Aabbaha
iyada dhexdeeda
30Goortii ay ku gabyeen
gabay ammaan ah
Buur Saytuun ayay
u baxeen dhammaantood

## Ciise Ayaa Sii Sheegay Xertiisa Ka Tegiddooda

31Ciise ayaa kolkaa yiri
caawa idinku dhammaantiin
Waad i diidi doontaan
waayo waa ay qoran tahay
Arijirka ayaan dili
oo idaha foofka ah
Ayaa kala firdhi doona
32Marka kuwii dhintay uun
La iga sarakiciyo
markaas kadib ayaan
Galili idinka hortiin
ayaan tegi doonaa
33Butros ayaa jawaaboo
oo ku yiri isagii
Haddii ay kulligood
adi kaa xumaadaan
Anigaan weligay
aan kaa xumaanayn
34Ciise ayaa ku yiri
Waxaa aan ku leeyahay
Oo runtiina iga ah
isla caawadaanba

Intaan diiqu uu ciyin
seddax goor ayaad ani
I dafiri doontaa
35 Butros ayaa jawaaboo
Waxaa uu ku yiri
haddii xitaa aan kula dhinto
Kuma dafiro adiga
xertii oo dhammina
Sidaas ayay yiraahdeen

## Ciise Oo ku Jiray Beer Getsemane

36 Ciise ayaa iyagii
waxaa uu la yimid
Meel la oran jiray
Getsemane oo
Xertii ayuu ku yiri
halkan ii fadhiista
Intaan xaggaa tegayo
oon soo tukanayo
37 Butros ayuu watay
iyo labadi wiil
Oo Sebedi uu dhalay
waxaa uu billaabay
Inuu calool xumaado
tiiraanyooday isaguna
38 Markaas ayuu yiri
aniga naftaydu
Aad iyo aad ayay
u calool xun tahay
Tan iyo dhimasho
halkan jooga idilkiin
Oo ila soo jeeda
39 Waxoogaa ayuuna
Horay uu u socday

wejigiisa una dhac
Waana uu tukaday
isagoo oranaya
Aabbow haddii ay
suurtagal ay tahay
Ha i dhaafo koobkani
balse yaysan noqonin
Sidaan anigu doonayo
ha ii noqoto aniga
Sidaad adigu doonaysid
40Xertii ayuu u yimid
Oo waxaa uu arkay
iyaga oo hurdaaya
Butros ayuuna ku yiri
Waa sidee arrintani?
Ma awoodi weydeen
in aad ila soo jeedaan
Hal saac oo keliya?
41Soo jeeda oo tukada
Si aydnaan u gelin
jirrabaadda iyada ah
Ruuxaa ayaa diyaar ah
jirka ayaa daciif ah
42Marlabaad ayuu tegay
oo tukaday isagoo leh
Aabbow haddii aanay
suurta gal ahaynin
Inuu i dhaafo koobkani
in aan cabbo mooyee
Sidaad adigu doonto
ha ii noqoto Aabbow
43Mar kale ayuu yimid
oo uu arkay iyagi
Oo misna hurdaaya
indhahooda iyaguna
Lulmo ayay gebigood

aad ula cuslaayeen
[44]Intuu iska daayay
ayuu isaga tegay
Mar seddaxaad ayuu
isagii tukadayoo
Isagoo ku hadlaya
hadalkii oo kale
[45]Xertiisii ayuu u yimid
oo ku yiri iyagii
Hadda seexda oo nasta
Bal eegga saacaddii
Ayaa aad u dhaw oo
Wiilka Aadanaha ayaa
Dad dembiileyaal ah
ayaa loo gacangelin
[46]Kaca aan tagnee
Bal eega idinku
Kii i gacan gelin lahaa
ayaa soo dhaw iminka

## Ciise Waa La Qabtay

[47]Intuu weli hadlaayay
Yuudas ayaa yimid
Kaas oo ka mid ahaa
laba iyo tobankii
Waxaa isaga la yimid
dad aad u fara badan
Oo seefo iyo ulo
ayaa u ahaa hub
Waxaa ay ka yimaadeen
wadaaddada sare iyo
Iyo waayeellada dadka
[48]Gacangeliyihi ayaa
Calaamo ayuu iyagi

kula ballamay oo yiri
Mid alla iyo midkii aan
anigu dhunkado waa isagi
Ee soo qabta idinku
49 Ciise ayuu u yimidoo
Oo ku yiri Macallimow
waa nabad intuu
Dhunkashana ugu daray
50 Kolkaas ayaa Ciise
Isagii ku yiri
Maxaad u timid iminka
Saaxiibkaygi anigow?
Markaas ayay yimaadeen
Ciise ayay saareen
iyaga gacmahoodii
Waana ay qabteen
51 Bal eegga idinku
Mid ka mid ah kuwii
oo la joogay Ciise
Yaa fidiyay gacanta
oo la baxay seeftiisii
Oo wuxuu ku dhuftay
addoon uu lahaa
Wadaadka ah kii sare
dheg ayuu ka gooyay
52 Ciise ayaana ku yiri
Seefta aad sidato
Ku celi halkeedi oo
inta seefo qaaddoo dhan
Seef ayay ku halligmi
53 Ma waxay ad kula tahay
Aabbahay in aanan
baryi karin anigu
Oo haddadaan la joogo
uusan soo diri karayn
Laba iyo toban guuto

malaa'igo aad uga badan?
[54]Qorniinku sidee ayuu
u noqon karayaa
Midka qorayoo oran
Waa in sidaasu noqotaa?
[55]Saacaddaas iyada ah
dadkii badnaa ayuu Ciise
Iyagii ku yiri
Ma seefo iyo ulo
Ayaad iila soo baxdeen
si aad ii soo qabataan
Sidaan anigu tuug ahay?
Macbudka ayaan joogay
Maalin ay ahaataba
anigoo wax baraya
Ima aadan qaban marna
[56]Oo waxaan oo dhan
Ayaa haddaba noqday
inuu rumoobo qorniinki
Nebiyadu ay sheegeen
markaas ayaana
Xertiisi oo dhammi
ay ka wada tageen
Oo ay ka carareen

## Ciise Ayaa Lagu Xukumay Wadaadkii Sare Hortiisa

[57]Ciise kuwii qabtay ayaa
waxaa ay u geeyeen
Kayafas oo ahaa
wadaadkii sare oo
Illaa meshii culimmada
iyo waayeelladiiba
Ay ku urursanaayeen

58 Laakiin Butros ayaa
Illaa iyo meel fog
kasoo daba socday oo
Illaa iyo barxadda
wadaadkii sare oo
Intuu gudaha soo galay
ayuu la fadhiistay askartii
Si uu bal u arko
illaa kama dambaysta
59 Wadaaddadii sare iyo
shirkii oo dhanba
Ayaa waxaa ay dooneen
markhaati been ah
Oo Ciise ka gees ah
si ay isaga u dilaan
60 Waase ay heli waayeen
In kastoo markhaatiyaal
Badan oo been abuur ah
ay u yimaadeen
Balse laba ayaa timid
61 oo waxay yiraahdeen
Kani waxaa uu yiri
Waan karayaa anigu
Macbudka Eebbe
in aan dumiyo anigu
Oo seddax maalin gudahood
aan dib ugu dhiso
62 Wadaadkii sare ayaa
kolkaas istaagay
Oo ku yiri isagii
Wax miyaanad adigu
Aadna ka jawaabayn?
Maxaad adi ka leedahay
Waxa ay intaniba
ay kugu maragfureen?
63 Iska aamus Ciisena

wadaadkii sare ayaa
Waxaa uu ku yiri
Waxaan aan kugu dhaarin
Eebbaha noole
bal adigu noo sheeg
In aad tahay Masiixa
Wiilka Eebbaha nool
Iyo in aadan ahayn
64 Adiga ayaa yiri
Ayuu ku jawaabay Ciise
Waxaan idinku leeyahay
Hadda dabadeed ayaad
idinku arki doontaan
Wiilka Aadanahoo fadhiya
midigta xoogga Eebbe
Oo daruuraha circa
isagoo ku imanya
65 Wadaadkii sare ayaa
inta dharkiisi jeexjeexay
Isagoo oranaya
Wuu caytamay isagu
Sababtee ayaannu
ugu baahannahay weli
Markhaatiyaal iminka?
Bal eegga haddeertan
Isaga caytankiisa
ayaad wada maqasheen
66 Maxay idinla tahay?
Iyana way u jawaabeen
Oo ay ku yiraahdeen
Ninkani dhimasho ayuu
Iminka istaahillaa
67 Wejiga ayay candhuuf
Kaga tufeen isagii
oo waa garaaceen
Qaar ayaa dharbaaxay

68 iyagoo ku oranaya
Masiixow innoo sheeg
waa ayo kan iminka
Adiga kugu dhuftay?

## Butros Ayaa Dafiray Ciise

69 Butros ayaa fadhiyay
barxadda dibadda ah
Gabar ayaa u timid
oo waxay ku tiri
Ciisaad la joogtay adigu
kii reer Galili ahaa
70 Iyagii dhammaantood
ayuu ku hor dafiray
Oo wuxuu ku yiri
Anigu garan mayo
Waxa aad ku hadlaysid
71 Goortuu iridda tegay
Mid kalaa aragtay
oo waxay ku tiri
Intii joogtay halkaas
Kan ayaa la jiray
Ciisihii ahaa
reer Naasarede arka
72 Haddana dhaar ayuu
ku dafiray isagii
Oo Wuxuu yiri
Anigu garan mayo
Ninkaas isaga ah
73 In yar dabadeed kadib
Kuwii ag taagnaa
ayaa u yimid isagii
Oo ku yiri Butros
Waa run oo adigu

Iyagaad ka mid tahay
oo adiga lahjaddaada
Ayaa ku muujinaaya
[74]Markaas ayuu billaabay
In uu caytamo
oo uu ku dhaarto
Ninka in uusan garanayn
oo isla markiiba
Diiqii ayaa ciyey
[75]Butros ayaa xusuustay
Eraygii Ciise kula hadlay
Intaan diiqu ciyin
Aniga ayaad seddax goor
i dafiri doontaa
Markaas ayuu baxay
oo aad u ooyay

## Ciise Waxaa Loo Dhiibay Billaatos Oo Taliyaha Reer Rooma Ahaa

**27** Aroorti markii la gaaray
wadaaddadii sare iyo
Waayeelladii dadka oo dhan
ayaa Ciise wax ka gees ah
Ka wada hadlay iyagu
si ay u dilaan
[2]Markaas ayay xireen
oo ay kaxeeyeen
Oo waxay u dhiibeen
taliyihii Billaatos ahaa

## Dhimmashadii Yuudas

[3]Markaas Yuudas ooh aa
kii isaga gacangeliyey

Goortuu arkay in la xukumay
ayuu isqoomameeyey
Oo sodonkii gogo'
oo lacagta ahaa
Ayuu wadaaddadii sare
iyo waayeelladii
Iyagii ku celiyay
4oo wuxuu ku yiri
Waan dembaabay anigu
markii aan gacangelshay
Dhiig eed la'aan ah
Waxaase ay ku yiraahdeen
Maxaa innaga quseeya?
Waa adiga howshaa
5Kolkaas ayuu lacagtii
Gudaha macbudka meel ah
ayuu ku tuuray iyadii
Oo markaas isaga tegay
waana uu is deldelay
6Wadaaddadii sare ayaa
iyagii qaaday lacagtii
Waxaa ayna yiraahdeen
Xalaal ma ahan lacagtani
Waa in aanan lagu ridin
qasnadda qudduuska ah
Waayo waa dhiig iibkiis
7Waa ay ka wada hadleen
Oo waxay ku iibsheen
dheriyasameeye kii ahaa
Dhulkii uu lahaa
in shisheeye kuwa ah
Dadku ay ugu aasaan
8Illaa iyo maantadan
Dhulkii dhiigga ayaa
isaga loogu yeeraa
9Kolkaas ayay noqotay

wixii uun nebi Yeremyaah
Lagaga hadlay isaga
markii uu yiri
Waxaa ay qaateen
soddonkii gogo' ee
Lacagta ahaayoo
oo ah qiimihii iibka
Isaga ku qiimeeyeen
10Waxaa ayna ka bixiyeen
Dhulkii uu lahaa
dheriyasameeyaha kii ahaa
Sida Rabbigu iigu amaray

## Ciise Oo Billaatoos Hor Taagan

11Ciise ayaa hor istaagay
kii ahaa taliyaha
Oo taliyahaana weyddiiyay
oo ku yiri isagii
Ma adiga ayaa ah
boqor Yuhuudda mid u ah?
Ciisaa ugu jawaabay
Afkaagey ka yeertay
12Wadaaddadi sare iyo
waayeelladu kuwii aha
Ay ashtakeeyeen
uma uusan jawaabin
13Billaatos ayaa ku yiri
Miyaadna aad maqlaynin
Waxa aadka u badan
ooy kugu maragfureen?
14Hal eray ha noqotee
Ciise uma jawaabin
Taliyihii ayaana
si aad ah ula yaabay

15 Taliyaha ayaa
waxaa uu lahaa caado
In uu iidda dadka
u soo daayo maxbuus
Hadba kii ay doortaan
16 Waxaa ay lahaayeen
Maxbuus caan ah oo xun
Baraabbas la oran jirya
17 Goortay isu urureen
Billaatos ayaa ku yiri
Iyamaad doonaysaan
in aan idiin soo daayo?
Baraabbas ama Ciise?
Kan ay Masiix yiraahdaan?
18 Waayo waa uu ogaa
in ay hinaaso uun
Ugu soo dhiibeen isaga
19 Inta kursigii xukumaadda
Uu ku fariistay
ayaa isaga naagtiisi
U soo dirtay farriin
waxaa ay ku tiri
Ha dhex gelin adigu
xaajada nin xaq ah
Waayo maanta anigoo
ku riyoonaya isaga
Ayaan aad u xanuunsaday
20 Wadaaddadii sare iyo
Waayeellada kuwii ahaa
dadkii aadka u badnaa
Ayay oggolaysiiyeen
in ay Baraabbas dalbadaan
Oo Ciise la dilo
21 Taliyihii ayaana
Aad u jawaabay
oo ku yiri iyagii
Iyaga labadooda

kee ayaad doonaysaan
In aan idiin sii daayo?
Waxaa ayna yiraahdeen
Baraabbas innoo sii daa
22 Billaatos ayaa ku yiri
Oo maxaan ku samayn Ciise
kan ay Masiix yiraahdaan?
Waxaa ay wada yiraahdeen
Iskutallaabta ku qodob
23 Oo waayo ayuu yiri
sharkuu falay bal ii sheega?
Waana ay sii qaylsheen
si weliba aad ah
Iyagoo oranaya
Iskutallaabta ku qodob
24 Billaatos markuu arkay
in uusan wax ka tarayn
In rabshad kacdo mooyee
ayuu biyo qaatay
Oo dadkii hortooda
uu ku gacmo dhaqday
Ayuu ku yiri iyagii
anigu eed kuma lihi
Dhiigga ninkan xaqa ah
idinkana yeelkiin
25 Dadkii oo dhan ayaa
u wada jawaabay
Oo ku yiri isagii
ninkan isaga dhiiggiisu
Annaga iyo caruurteenna
ha inna dul saarnaado
26 Waana uu u sii daayay
kii Baraabbas ahaa
Ciise goortii uu karbaashay
ayuu dhiibay isagii
Si ay iskutallaabta
ay ugu qodbaan

## Ciise Waxaa Lagu Qodbay Iskutallaabta

27 Taliyaha askartiisii
ayaa Ciise geeyay
Aqalkii taliyaha
oo askartii oo dhan
Ayay ku soo ururiyeen
halkii uu joogay Ciise
28 Waxaa ay ka qaadeen
isaga dharkiisii
Oo dhar guduudan
ayay u geliyeen
29 Markaas ayay
qodxaan uga toleen taaj
Oo madaxiisay saareen
oo caws duurna
Gacantiisa midigta ah
ayay u geliyeen
Oo inta hortiisa
ay jilba joogsadeen
Oo ku majaajiloodeen
ayay ku yiraahdeen
Nabad sow ma ahan
adiga ah boqorkii
Dadka Yuhuudda ah
30 Oo waa ku candhuufeen
Markaas ayayna
isagii ka qaadeen
Cows duurki oona
madaxa uga dhufteen
31 Oo markii ay isaga
ay ku majaajiloodeen
Ayay dharkii ka qaadeen
dharkiisina u geliyeen
Markaas ayay wadeen
in ay iskullaabta

Ay isaga ku qodbaan
32 Goortii ay soo baxeen
Nin ayay arkeen
reer Kuranaya ah
Oo Simoon la oran jiray
midka ay ku qasbeen
Inuu u qaado isagu
Ciise isku tallaabtiisa
33 Waxaa ay yimaadeen
meel la oran jiray Golgota
Oo meeshii dhakada
ayaa loo yaqaanaa
34 Khamri ayay siiyeen
ay ku dareen xammeeti
Si uu u cabbo
Goortii uu dhadhamiyay
In uu cabbo diidyay
35 Markii ay iskutallaabta
Ay isaga ku qodbeen
dharkii uu lahaa ayay
Iyagu qaysadeen
iyagoo saami ridan
Si ay u noqdaan
wixii uu nebigii
Uu ku hadlay isagu
Dharkii aan lahaa ayay
Qaybsadeen iyagu
oo aniga maradaydi
Saaami ayay u riteen
36 Meeshaas ayay fariisteen
Waana ay dhowrayeen
37 Isaga madaxiisa
Meel ka korraysa in yar
waxaa ay ku qoreen
Ashtakadii isaga
lagu ashtakeeyay

Taas oo ahayd:
*KAN AYAA AH CIISE*
*YUHUUDDA BOQORKOODA AH*
[38]Markaas ayaa
iskutallaabta isaga
Ay kula qodbeen
laba nin oo tuugo ah
Mid midigtiisa ah
midna isaga bidixdiisa
[39]Kuwii ag marayay
ayaa caayay isaga
Madaxa iyagoo luli
[40]waxaa ay ku yiraahdeen
Macbudka kan intuu dunsho
seddax maalin oo qura
Dib ugu dhisaayow
isbadbaadi adigu
Haddaad tahay adigu
Wiilka Eebbe
Iskutallaabta ka soo deg
[41]Sidaas oo kaleeto
Wadaaddada sare ay
ugu majaajiloodeen
Iyaga iyo culimmada
iyo waayeelladuba
Isagay ku yiraahdeen
[42]kuwo kale ayuu badbaadshay
Isna isma badbaadin karyo
waa Boqorka Israa'iil
Iskutallaabta bal hadda
isagu ha ka soo dego
Si aan annaguna
bal aan u rumaysanno
[43]Eebbe ayuu isku halleeyay
Haddeer ha u gurmado
Haddii uu isagu

uu ku faraxsan yahay
Waayo isagaa yiri
Waxaan ahay Wiilka Eebbe
44 Tuugtii iskutallaabta
ay kula qodbeenna
Sidaas oo kale
ayay isna u caayeen

## Ciise Waa Dhintay

45 Saacaddii lixaad iyo
illaa saacaddii sagaalaad
Dhulka oo dhammi
gudcur ayuu ahaa
46 Abbaaraha saacaddii
sagaalaad ay ahayd
Ciise ayaa cod weyn
ku dhawaaqay oo yiri
Eloy, Eloy, lama sabakhtani
micnaheedu uu yahay
Eebbow, Eebbow
maxaad ii dayrisay?
47 In ka mid ah kuwii
aaggaas taagnaa
Goortii ay qaarkood
ay maqleen ayaa yiri
Eliyaas ayuu kani
iminka u yeertaye
48 Midkood ayaa orday
oo qaaday geed ah isbonji
Oo khal uga soo buuxshay
oo uu saaray cows duur
Ayuu siiyey inuu cabbo
49 Kuwo kale ayaa yiri
Iska daaya aan aragnee

inuu u yimaado Eliyaas
Oo uu badbaadiyo
50Markaas ayuu Ciise
Cod kale oo weyn
ayuu ku dhawaaqay
Oo bixiyay ruuxii
51Daahii macbudka ayaa
Kor illaa iyo hoos
u kala dillaacay labo
Dhulkii ayaa gariiray
dhagxaantii iyaguna
Waa ay kala dillaaceen
52Xabaalihii ayaa furmay
Qudduusiin badan oo hurdayay
ayaana meydkoodi
Oo hurdayay sarakacay
53Sarakiciddii kadib ayay
Xabaalihii intey furmeen
ayay ka soo wada baxeen
Magaaladii ahayd qudduus
ayay wada galeen
Waxaa ay u muuqdeen
dad aad u fara badan
54Boqol u taliyihii
iyo kuwii la jiray
Oo Ciise dhawrayay
markii ay arkeen
Dhulgariirki iyo
wixi kale ee dhacay
Aad yay u baqeen
oo ay yiraahdeen
Runtii Wiilkii Eebbe
ayuu kani ahaa
55Dumar badan ayaana
aaggaas joogay
Oo meel fog ayay

iyagu ay ka eegayeen
Kuwii isaga Ciise ah
ka soo raacay Galili oo
U adeegi jiray isna
56 Oo waxaa ka mid ahayd
Maryantii ahayd
reer Magdala iyo
Maryan kale oo
Yacquub iyo Yoosee
Hooyadood ahayd
iyo wiilashii Sebedi
Iyaga hooyadood

## Ciise Waa la Aasay

57 Casarkii markay ahayd
Nin ayaa yimid
Ah reer Arimataya
oo hodon ahaa
Oo Yuusuf la oran jiray
oo xerta Ciise ayuu
Isagu ka tirsanaa
58 Wuxuu u tegay Billaatos
Isaga oo ka baryay
meydka Ciise aaskiisa
Billaatos ayaa amray
in loo diibo meydka
59 Yuusuf ayaa qaatay
oo meydkii ku duubay
Karfan nadiif ah
60 Oo wuxuu geliyay
Xabaashiisii ahayd
midda aadka u cusub
Tan uu dhagax ka qoday
Oo xabaashii afkeedii

ayuu ku giringiriyey
Dhagax aad u weyn
waana uu isaga tegay
[61]Oo halkaas waxaa joogay
Maryantii ahayd
Reer Magdala iyo
Maryantii kale iyana
Oo xabaasha meel ah
ka soo horjeedka ayay
Iyagu fadhiyeen
[62]Maalintii dambe ee xigtay
Maalintii ahayd Diyaarinta
wadaaddadii sare iyo
Farrisiintii ayaa haddaba
u wada yimid Billaatos
[63]Oo ku yiraahdeen isagii
Sayidow, innaga ayaa xusuusan
In khaa'inkaasu yiri
intuu weli uu noolaa
Seddax ayaamood kadib
anigu waan soo sarakici
[64]Haddaba amar in xabaashii
si aad ah loo dhawro
Illaa maalinta seddaxaad
in aan xertiisu iman
Oo aanay xadin meydka
dadka aanay ku oran
Kuwii dhintay ayuu
isagu ka sarakacay
Oo khiyaanada dambe
tii hore ay ka xumaan
[65]Waardiyeyaal ayaad leedihiin
ayuu yiri Billaatos
Taga oo adkeeya
intaad adkayn karaysaan
[66]Waa ay tageen markaasoo

iyaga oo wata
Waardiyeyaashii iyaga ahaa
xabaashii ayayna
Soo wada adkeeyeen
dhagaxii ku awdnaa
Ayay shaabadeeyeen

## Ciise Ayaa Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay

28 Markii uu baryay waagii
Sabtidii kadib ahayd
Maalintii ugu horraysay
toddobaadkii bilow ahaa
Maryantii reer Magdala iyo
Maryantii kale ayaa
Waxaa ay u yimaadeen
in ay arkaan xabaashii
2 Dhulgariir weyn ayaa dhacay
malaa'igta Rabbiga ayaa
Intay samada ka soo degtay
ayay giringirisay dhagaxii
Dushana uga fadhiisatay
3 Midabkeedaa u ekaa
Hillaac oo kale
dharkeedana ayaa sida
Baraf cad u caddaa
4 Oo cabsi aawadeed
Ayaa kuwii illaalinayay
ay la gariireen
Oo sida meyd oo kale
ayay wada noqdeen
5 Malaa'igti ayaana
u jawaabtay iyagoo
Oo ku tiri iyagii

Ha baqina idinku
Waan ogahay anigu
Ciise in aad doonaysaan
Kii ay ku qodbeen
iskutallaabta isaga
[6]Halkan ma joogo isagu
waana uu sarakacay
Siduu yiri isagu
Kaalaya oo arka
Halkii uu Rabbigu
uu jiifay isagu
[7]Dhaqso u taga oo
xertiisii u sheega
Kuwii dhintay in uu
isagu ka saracay
Wuxuu idinka hor marayaa
Illaa iyo Galili
Halkaas ayaad isaga
ku arki doontaan
Bal eega idinku
waan idiin sheegaye
[8]Si dhaqsi ah ayay
xabaashii uga tageen
Baqdin iyo farxad weyn
waxaa ay u ordeen
In ay u warramaan
isaga xertiisii
[9]Kolkaas ayuu Ciise
iyagii ka hor yimid
Oo ku yiri, Nabad
Waana u dhawaadeen
Cagihiisa ayay qabteen
waana ay caabudeen
[10]Ciise ayaa ku yiri
Ha baqina idinku
Inta aad tagtaan

walaalahay u sheega
In ay Galili tagaan
oo halkaas ayay
Igu arki doonaan
11 Intay sii socdeen
Ayaa waardiyayaashii
qaar ka mid ahaa
Ay uga warrameen
magaaladi oo dhan
Oo wadaaddadi sare
ayay uga warrameen
Wixii dhacay oo dhan
12 Iyaguna goortay
Waayeelladii ay la shireen
ay wada hadleen
Ayay askartii siiyeen
lacag aad u badan
13 Waxay kuna yiraahdeen
Waxa aad tiraahdaan
Xertiisii ayaa timid
iyadoo habeen tahay
Oo xadday maydkii
intii aannu hurudnay
14 Haddii uu taliyihii
uu maqlo waxaan uun
Innagaa rumaysiin
idin welwel tirayna
15 Iyagu qaaday lacagtii
oo sidii lagu yiri
Ayay wada yeeleen
Maalintaas illaa maanta
Hadalkaas isaga ahi
dadka Yuhuudda ah
Waa uu ku dhex faafay

## Ciise Ayaa Galili Ugu Muuqday Kow Iyo Tobankii Xertiisa Ahaa

16 Kow iyo tobankii
xertiisii ahaa
Ay tageen Galili
illaa buurtii Ciise
Kula ballamay iyaga
17 Goortay isaga arkeen
Ayay caabudeen
qaar ayaase shakiyey
18 Ciise ayaa u yimid
oo la hadlay iyagii
Oo wuxuu ku yiri
Amar oo dhan ayaa
Samada iyo dhulka
aniga laygu siiyey
19 Haddaba taga idinku
oo quruumaha oo dhan
Xer ka dhiga iyaga
oo ku baabtiisa
Magaca Aabbaha iyo
Wiilka iyo Ruuxa
Qudduuska ah
20 oo bara in ay dhawraan
Wax walba oo aan
anigu idinku amray
Bal eega had iyo goor
ayaan idinla joogaa
Xataa illaa iyo
uu dhammaado wakhtigu

# GUNAANAD

Waxaan ku kalsoonahay in aad la dhacday akhrinta kitaabkan maansaysan ee Injiilka Shariifka Ah. Eebbe ha kugu anfaco wixii aad ka faa'iidday kitaabkan Sayid Ciise Masiix. Waxaan rejaynayaa in wixii aad ka baratay kitaabkan aad uga faa'iidayn doonto dad badan waayo wanaaggu wuxuu macaan yahay marka la wadaago.


Farxad gooni ah ayay aniga ii tahay in howsha kitaabkani ay magooshay ayna mira dhashay maantana aad gacanta ku hayso kitaabkan taariikhiga ah. In kasta oo dad badani igu dhiirigeliyeen in aan si tix ah u turjumo kitaabkan, haddana wixii gaabis ah oo laga helo turjumidda iyo soo bandhigidda kitaabkan waa mid aniga ii gaar ah.


Waxaan si gooniya u xusayaa dadkii Soomaaliyeed ee qaybta libaaax ka qaatay turjumidda Kitaabka Qudduuska Ah xitaa ka hor qoritaankii afka Soomaaliga. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa halyeygii weynaa ee Aadan Jimcaale Faarax kaas oo laf dhabar u ahaa turjumidda Kitaabka Qudduuska Ah iyo weliba gundhigga qasiiddooyinka Ilaah Ammaanka Ah ee lagu curiyo afka Soomaaliga.

Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan Masiixiyiinta Soomaaliyeed ee uu Eebbe siiyay hibada wax qorista ama curinta suugaanta in ay ila soo xiriiraan si aan ugu caawiyo in ay dhaxal qoraal ah uga tagaan kiniisadda Soomaaliyeed. Waxaad igala soo xiriiri kartaan e-mail-kan Amazingwisdom@gmail.com

**Aweis A. Ali**

Also, by Aweis A. Ali




## ABOUT THE TRANSLATOR

Rev. Aweis A. Ali (BTh., MDiv., PhD - candidate) is a missiologist, an author and poet. Aweis is a former house-church pastor, worship leader and evangelist; he has been in ministry since 1993. Aweis currently oversees the work of his denomination in the Horn of Africa; he can be reached at amazingwisdom@gmail.com



SOMALI
Bible Society

ISBN: 978-9914-701-21-0

9 789914 701210